# JAMHUURIYADA SOMALILAND
## GOLAHA WAKIILLADA

# XEERKA GUUD EE DOORASHOOYINKA QARANKA IYO DIIWAANGALINTA COD-BIXIYAYAASHA

XEER Lr. 91/2020

***September 2020***

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/WM/222-559/102020** **Taar: 14/10/2020**

# Wareegto Madaxweyne

## Dhaqan-galka Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha Xeer Lr. 91/2020

**Markaan Arkay:** **Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;**

**Markaan Arkay:** **Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-43/866/2020 ee summadiisuna tahay GW/G/07/170/2020, kuna taariikhaysan 10/10/2020, ujeedadiisuna tahay soo gudbinta go'aanka ansixinta Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha, Xeer Lr. 91/2020;**

**Markaan Arkay:** **Qodobbada 75aad iyo 76aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;**

**Waxaan soo saaray;**

**Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha, Xeer Lr. 91/2020.**

**Allaa Mahad Leh**

REPUBLIC OF SOMALILAND President

RL: 232 RECEIVED 15/10/2020

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

REPUBLIC OF SOMALILAND PRESIDENT

The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa.

Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha wakiilada
Xarunta Hargeisa

Ref: GW/KF-43/866/2020

Date: 09/10/2020

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangalinta Cod-bixiyayaasha Xeer Lr.91/2020**

## GOLAHA WAKIILADDU

**Markuu Arkay:-** Qodobka 4aad farqadiisa 1aad, Qodobka 9aad farqadiisa 1aad, Qodobka 22aad farqadiisa 3aad iyo Qodobada 40aad, 41aad, 42aad, 82aad, 83aad 111aad farqadiisa 2aad ee Dastuurka Qaranka JSL

**Markuu Arkay:-** In ay muhiim tahay in laga faa'iidaysto waayo aragnimadii laga dhaxlay doorashooyinkii kala duwanaa ee ay soo martay ummada Somaliland taas oo muujinaysa in loo baahan yahay in la adkeeyo nidaamka sharci ee suurto gelinaaya in ay muwaadiniintu cod-kooda ku dhiibtaan isla markaana la tir-tiro in ay dhacdo in lagu noq-noqdo cod-bixinta taa soo sharci-daro ah.

**Markuu Aqoonsaday:** Baahida loo qabo in dib u habeyn, wax ka badal iyo kaabis lagu sameeyo, dibna loo eego Xeerarkii Doorashooyinka Madaxtooyada, Golaha Wakiilada iyo Golayaasha Deegaanka iyo sidoo kale Xeerkii Diiwaangalinta Cod-bixiyayaasha.

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Komishanka iyo Xukuumada oo isku soo dartay hal xeerna iskaga soo dhigtay Xeerarkii Doorashooyinka oo dhan iyo Xeerkii Diiwaangalinta Cobxisiyayaasha kaas oo noqonaya Xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka iyo Diiwaangalinta Cod-bixiyayaasha Xeer **Lr. 91.2020.**

Website: www.somalilandparliament.net

Qodobka 14aad
Tir-tiridda

Waxaa la tir-tiray Wax Ka-beddelka Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-xigeenka Hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka ee Xeer Lr. 62/2013, ama Qodobkasta oo ka hor imanayaa xeerkan, laguna jideeyey xuquuqda Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka.

Qodobka 15aad
Dhaqan-galka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka labada Gole ee Xeerdejintu ansixiyaan Madaxweynuhuna saxeexo faafinta rasmiga ahna ku soo saaro.

**Cabdirisaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

**Baashe Maxamed Faarax**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**

# Tusmada Xeerka

CUTUBKA KOOWAAD....17

QAYBTA 1AAD....17

QODOBBADA GUUD....17

Qodobka 1aad....17

Magaca Xeerka....17

Qodobka 2aad....17

Eray-bixinta....17

QAYBTA 2AAD....20

Qodobka 3aad....20

Xadka Adeegsiga Xeerka iyo Mabaa'diida Guud....20

Qodobka 4aad....20

Shuruudaha Cod-bixiyaha....20

Qodobka 5aad....20

Xuquuqda Cod-bixiyaha....20

Qodobka 6aad....21

Wakhtiga Qabashada Doorashooyinka....21

Qodobka 7aad....21

Xaqa is Sharaxidda....21

Qodobka 8aad....22

Ka Qaybgalka Bulshada....22

Qodobka 9aad....22

Shaqaalaha Dawladda & Hay'adaha Dawliga ah....22

Qodobka 10aad....22

Muddo-xileedyada....22

Qodobka 11aad....22

Astaamaha murashixiinta iyo kala horaysiinta Magacyada iyo Astaamaha Xisbiyada/Ururada....22

**CUTUBKA LABAAD**....23

**QAYBTA 1AAD**....23

**KOMISHANKA DOORASHOOYINKA QARANKA JSL**....23

**Qodobka 12aad**....23

**Qaab-dhismeedka Komishanka Doorashooyinka Qaranka**....23

**Qodobka 13aad**....23

**Xubnaha Komishanka Doorashooyinka**....23

**Qodobka 14aad** ........ 23
**Shuruudaha Xubinta Komishanka** ........ 23
**Qodobka 15aad** ........ 24
**Xil ka Qaadista Komishanka** ........ 24
**Qodobka 16aad** ........ 24
**Awoodaha Komishanka** ........ 24
**Qodobka 17aad** ........ 25
**Miisaaniyadda Komishanka Doorashada** ........ 25
Qodobka 18aad ........ 25
Sanduuqa Doorashooyinka/Diiwaangalinta ........ 25
**Qodobka 19aad** ........ 26
**Xafiiska Goobta Cod-bixinta** ........ 26
**Qodobka 20aad** ........ 26
**Xafiiska Degmada ee Doorashada** ........ 26
**Qodobka 21aad** ........ 26
**Xafiiska Gobolka ee Doorashada** ........ 26
Qodobka 22aad ........ 26
Shaqaalaha komishanka doorashooyinka Qaranka ........ 26
Qodobka 23aad ........ 26
Shaqo qorista iyo ka Saarista gudoomiyayasha gobolada iyo degmooyinka doorasho ........ 26
**Qodobka 24aad** ........ 27
**Hawl-wadeennada Xafiisyada Doorashada/Diiwaangalinta** ........ 27
**Qodobka 25aad** ........ 28
**Gunnada Hawl-wadeenada** ........ 28
**Qodobka 26aad** ........ 28
**Dhawrsanaanta Komishanka, Musharixiinta iyo Hawl-wadeenada** ........ 28
CUTUBKA 3AAD ........ 28
QAYBTA 1AAD ........ 28
DIIWAAN-GELINTA COD-BIXIYAYAASHA ........ 28
**Qodobka 27aad** ........ 28
**Xadka ku dhaqanka** ........ 28
**Qodobka 28aad** ........ 28
**Diiwaanada Cod-bixiyeyaasha Qaranka Somaliland** ........ 28
**Qodobka 29aad** ........ 29

**La-haanshaha diiwaanka** ........ 29
**Qodobka 30aad** ........ 29
**Dhaqan-gelinta Diiwaangelinta Cod-bixiyaha** ........ 29
**Qodobka 31aad** ........ 29
**Dadka ay ka reeban tahay in la diiwaangeliyo** ........ 29
**Qodobka 32aad** ........ 29
**Kaydinta diiwaangalinta cod-bixiyayaasha iyo soo saarista liisaska Kama dambaysta ah** ........ 29
**Qodobka 33aad** ........ 29
**Dadka aan lahayn awoodda saxeexa** ........ 29
**Qodobka 34aad** ........ 29
**Habka xafidaadda qalabka diiwaangelinta** ........ 29
**Qodobka 35aad** ........ 30
**Hab-qoraalka magaca muwaadinka** ........ 30
**Qodobka 36aad** ........ 30
**Saxitaanka xogaha khaldama** ........ 30
**Qodobka 37aad** ........ 30
**Nooca kaadhka cod-bixinta** ........ 30
**Qodobka 38aad** ........ 31
**Lumista Kaadhka Cod-bixinta** ........ 31
**Qodobka 39aad** ........ 31
**Dhawrista Xogta Cod-bixiyaha** ........ 31
**Qodobka 40aad** ........ 31
**Qaadashada wax ka badan hal kaadh oo cod-bixineed** ........ 31
**Qodobka 41aad** ........ 31
**Diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha** ........ 31
**Qodobka 42aad** ........ 32
**Habka diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha** ........ 32
**Qodobka 43aad** ........ 32
**Shaqada komishanka doorashooyinka qaranka ee diiwaangelinta** ........ 32
**Qodobka 44aad** ........ 32
**Ku dhawaaqidda diiwaangelinta cod-bixiyayaasha** ........ 32
**Qodobka 45aad** ........ 32
**Dhaqan-gelinta diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha** ........ 32
**Qodobka 46aad** ........ 33

**Foomka diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha** ....33
**Qodobka 47aad** ....33
**Xogta lagu qorayo kaadhka codaynta** ....33
**Qodobka 48aad** ....33
**Sixitaanka iyo muranka da'da** ....33
**Qodobka 49aad** ....34
**Shaqaalaha diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha** ....34
**Qodobka 50aad** ....34
**Habka iyo goobaha diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha** ....34
**Qodobka 51aad** ....34
**Wakiillada Xisbiyada/Ururada qaranka ee diiwaangelinta cod-bixiyaha** ....34
**Qodobka 52aad** ....34
**Hawsha mas'uulka komishanka doorashooyinka qaranka ee goobta diiwaangelinta cod-bixiyaha** ....34
**Qodobka 53aad** ....35
**Soo saarista iyo daabacaadda liisaska cod-bixiyayaasha** ....35
**Qodobka 54aad** ....35
**Soo saarista liisaska Kama dambaysta ah ee cod-bixiyayaasha** ....35
**Qodobka 55aad** ....35
**Qaybinta kaadhka cod-bixinta** ....35
**Qodobka 56aad** ....35
**Guddiga farsamo ee hawlaha diiwaan-gelinta** ....35
**Qoddobka 57aad** ....35
**Gacan ka gaysashada arrimaha nabad-gelyada iyo wacyi-gelinta ee hawsha diiwaangelinta** ....35
**Qodobka 58aad** ....35
**Goob-joogayaasha** ....35
**Qodobka 59aad** ....36
**Soo saaridda xeer-nidaamiyayaasha diiwaangelinta (power to issue regulations)** ....36
CUTUBKA AFRAAD ....36
HABKA DOORASHADA MADAXWEYNAHA IYO KU XIGEENKA MADAXWEYNAHA ....36
Qodobka 60aad ....36
Hanaanka Doorashada Madaxweynaha iyo ku-xigeenka Madaxweynaha ....36
Qodobka 61aad ....36
Deebaajiga Madaxweynaha Iyo Ku-Xigeenka Madaxweynaha ....36
Qodobka 62aad ....36

Shuruudaha Musharaxa Madaxweynaha Iyo Ku-Xigeenka Madaxweynaha ....... 36
Qodobka 63aad ....... 37
Qabashada Liisaska Murashaxiinta ....... 37
Qodobka 64aad ....... 37
Qaabka soo Bandhigida Murashaxiinta ....... 37
CUTUBKA 5AAD ....... 38
DOORASHADA GOLAHA WAKIILLADA ....... 38
Qodobka 65aad ....... 38
Xaqa ka Qayb Galka Doorashada Golaha Wakiillada. ....... 38
Qodobka 66aad ....... 38
Tirada Guud ee Golaha Wakiilada ....... 38
Qodobka 67aad ....... 38
Shuruudaha Murashaxa Golaha Wakiillada ....... 38
Qodobka 68aad ....... 38
Deebaajiga musharixiinta doorashada Golaha Wakiillada ....... 38
Qodobka 69aad ....... 39
Habka Xulista Musharaxiinta ....... 39
Qodobka 70aad ....... 39
Khilaafaadka ka soo Baxa soo Xulida Murashixiinta Golaha Wakiillada. ....... 39
Qodobka 71aad ....... 39
Xeer-nidaamiyaha iyo Hagaha Xisbiyada ee Xulista iyo Magacaabista Musharaxiinta ....... 39
Qodobka 72aad ....... 40
U soo Gudbinta Komishanka liiska Musharixiinta Doorashada Golaha Wakiilada ....... 40
Qobodka 73aad ....... 41
Hubinta iyo Soo badalida Musharaxiinta doorashada Golaha Wakiillada ee buuxin waya shuuradaha xeerarka ama is-casila ....... 41
Qodobka 74aad ....... 41
Shaacinta liistada Kama danbeysta ah murashiinta Doorashada Golaha Wakiillada iyo Astamahooda ....... 41
Qodobka 75aad ....... 41
Habka Doorashada ....... 41
Qodobka 76aad ....... 42
Samaynta Goobo Doorasho ....... 42
Qodobka 77aad ....... 42
Habka Qaybinta Kuraasta ....... 42

Qodobka 78ad ....... 43
Musharaxiinta Doorashada ku Guul-Daraysta ....... 43
CUTUBKA LIXAAD ....... 43
QAYBTA: 1AAD. ....... 43
DOORASHADA GOLAYAASHA DEEGAANKA. ....... 43
Qodobka 79aad ....... 43
Tirada Golayaasha Degaanada ....... 43
**Qodobka 80aad** ....... 43
**Habka Doorashoyinka Deegaaanada** ....... 43
Qodobka 81aad ....... 44
Shuruudaha Murashaxa Golaha Degaanka ....... 44
Qodobka 82aad ....... 44
Ururada u Gudbi Waaya Xisbi ....... 44
Qodobka 83aad ....... 45
Deebaajiga Musharaxiinta Doorashada Golayaasha Deegaanka ....... 45
Qodobka 84aad ....... 45
Qaabka soo Bandhigida Musharaxiinta ....... 45
Qodobka 85aad ....... 46
Shaacinta liistada Kama danbeysta ah musharixiinta Doorashada Golayaasha Deegaanka iyo Astamahooda ....... 46
Qodobka 86aad ....... 46
Xulista iyo Xalinta Khilaafadka Musharixiinta Golayaasha Deegaanka ....... 46
Qodobka 87aad ....... 46
Musharaxiinta Doorashada ku Guul-Daraysta ....... 46
CUTUBKA TODOBAAD ....... 47
HANAANKA DOORASHOOYINAKA (ELECTION PROCEDURES) ....... 47
QAYBTA 1AAD ....... 47
OLALAHA DOORASHOOYINKA ....... 47
Qodobka 88aad ....... 47
Bilowga iyo Dhamaadka Ololaha Doorashada ....... 47
Qodobka 89aad ....... 47
Qabashada Shirarka & Banaan-baxyada ....... 47
Qodobka 90aad ....... 47
Muuqaalka Boodhadhka ....... 47
Qodobka 91aad ....... 47

Hub iyo Lebbis Ciidannimo ........................................ 47
Qodobka 92aad ........................................ 48
Hawlaha Ololaha ........................................ 48
QAYBTA 2aad ........................................ 48
DHAQAALAHA OLOLAHA ........................................ 48
Qosobka 93aad ........................................ 48
Nidaaminta Dhaqaalaha Ololaha Doorashada ........................................ 48
Qodobka 94aad ........................................ 49
Reebbanaanta Isticmaalka Hantida Danta Guud ........................................ 49
Qodobka 95aad ........................................ 49
Cidda Awoodda u leh Qaadhaan Ururinta ........................................ 49
Qodobka 96aad ........................................ 49
Meelaha uu ka Imanayo Dhaqaalaha Ololaha Doorashadu ........................................ 49
Qodobka 97aad ........................................ 50
Maaliyada aan ku jirin Ilaha dhaqaalaha ee Ololaha ........................................ 50
Qodobka 98aad ........................................ 50
Kharashaadka doorashada: ........................................ 50
Qodobka 99aad ........................................ 50
Soo Bandhiga Dhaqaalaha Ololaha ........................................ 50
QAYBTA 3AAD ........................................ 51
HANAANKA COD-BIXINTA GOOBAHA DOORASHADA ........................................ 51
Qodobka 100aad ........................................ 51
Qandaraasyada la Xidhiidha Agabka & Adeegyada Doorashooyinka ........................................ 51
Qodobka 101aad ........................................ 51
Qalabka Goobta Doorashooyinka ........................................ 51
Qodobka 102aad ........................................ 51
Waraaqaha Cod-bixinta ........................................ 51
Qodobka 103aad ........................................ 52
Habaynta Liisaska Rasmiga ah iyo Goobaha Cod-bixineed ........................................ 52
Qodobka 104aad ........................................ 52
Ogeysiinta Liiska Murashaxiinta ........................................ 52
Qodobka 105aad ........................................ 52
Qaybinta Qalabka Doorashada ........................................ 52
QAYBTA 4AAD ........................................ 53

BILOWGA HAWLAHA GOOBTA COD-BIXINTA ......53
Qodobka 106aad ......53
Xafiiska Goobta Cod-bixinta......53
Qodobka 107aad ......53
Awoodda Guddoomiyaha Goobta Cod-bixinta ......53
Qodobka 108aad ......54
Masuuliyadaha Shaqaalaha kale Goobta Cod-bixinta ......54
Qodobka 109aad ......54
Wakiilada Axsaabta/ururada ......54
Qodobka 110aad ......54
Gelidda Goobta Cod-bixinta ......54
Qodobka 111aad ......55
Talaabooyinka Ka Horeeya Cod-bixinta ......55
Qodobka 112aad ......55
Cod-bixiyayaasha aan Codka Dhiiban Karin ......55
QAYBTA 5AAD......56
HAWLGALKA COD-BIXINTA ......56
Qodobka 113aad ......56
Nidaamka Cod-bixinta ......56
Qodobka 114aad ......57
Muddada Cod-bixinta......57
Qodobka 115aad ......57
Go'aanka Cabashooyinka ee Goobta Cod-bixinta ......57
QAYBTA 6AAD......58
TIRINTA CODADKA ......58
Qodobka 116aad ......58
Hawsha ka Horaysa Tirinta Codadka ......58
Qodobka 117aad ......58
Hawsha Tirinta Codadka......58
Qodobka 118aad ......59
Dib u Tirinta Codadka ee Goobta Cod-bixinta......59
Qodobka 119aad ......59
Xidhitaanka Hawsha Tirinta......59
Qodobka 120aad ......60

Codadka Xumaada ama Lagu Muransanyahay ....60
Qodobka 121aad ....61
Qoraalka Raadraaca Goobta Cod-bixinta ....61
Qodobka 122aad ....61
Qaadista iyo Wareejinta Qalabka ....61
**QAYBTA 7AAD** ....61
**SHAQOOYINKA XAFIISYADA DEGMADA, GOBOLKA IYO XARUNTA DHEXE EE TIRINTA CODADKA IYO KU DHAWAAQISTA NATIIJOOYINKA** ....61
Qodobka 123aad ....61
Shaqada Xafiiska Doorashada ee Degmada ....61
Qodobka 124aad ....62
Tirinta Codadka Doorashada Degaanka & ku Dhawaaqidda Natiijada ....62
Qodobka 125aad ....62
Gudbinta Raad-raaca (Records) ....62
Qodobka 126aad ....62
Soo Saaridda Go'aanada Doorashooyinka Degaanada ....62
Qodobka 127aad ....63
Isugeynta tirada Cod-bixinta Doorashada Madaxtooyada iyo Golaha Wakiilada ee xafiiska Degmada ....63
Qodobka 128aad ....63
Shaqada Xafiiska Doorashada Gobolka ee Doorashooyinka Deegaanka ....63
Qodobka 129aad ....64
Shaqada Xafiiska Gobolka ee Doorashada Golaha Wakiilada ....64
Qodobka 130aad ....64
Ku Dhawaaqida Natiijada Hordhaca ah ee Doorashada Golaha Wakiilada ....64
Qodobka 131aad ....65
Gudbinta Raad-raacyada ....65
Qodobka 132aad ....65
Shaqada Xafiiska Gobolka ee Doorashada Madaxtooyada ....65
Qodobka 133aad ....65
Hawsha Xafiiska Dhexe ee Doorashada Golaha Wakiilada iyo Degmooyinka ....65
Qodobka 134aad ....65
Hawsha Xafiiska Dhexe ee Doorashada Madaxtooyada ....65
Qodobka 135aad ....66
Ku Dhawaaqidda Natiijada Doorashooyinka Madaxtooyada ....66

Qodobka 136aad ....................................................................................................66
Dhaarinta Xildhibaanada la Doortay ee Golaha Wakiilada ....................................................................................................66
Qodobka 137aad ....................................................................................................66
Dhaarinta Xildhibaanada la Doortay ee Golayaasha Degaanka ....................................................................................................66
Qodoka 138aad ....................................................................................................67
Dhaarta Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha ....................................................................................................67
Qodobka 139aad ....................................................................................................67
Xeerka Anshaxa iyo Guddida Anshaxa iyo Xalinta Khilaafaadka ....................................................................................................67
**CUTUBKA SIDEEDAD** ....................................................................................................67
**DAMBIYADA DOORASHADA LA XIDHIIDHA IYO XAD-GUDUBYADA XEERKA IYO NIMAADKA DOORASHOODA** ....................................................................................................67
Qodobka 140aad ....................................................................................................67
U Hogaansanka Nidaamka iyo Xeerarka Doorashooyinka ....................................................................................................67
Qodobka 141aad ....................................................................................................67
Dambiyada Guud ee la Xidhiidha isoo Baxyada Bulshada ....................................................................................................67
Qodobka 142aad ....................................................................................................67
Matalaadda ....................................................................................................67
Qodobka 143aad ....................................................................................................68
Bixinta Laaluushaka ....................................................................................................68
Qodobka 144aad ....................................................................................................68
Khasabka iyo Khiyaamada ....................................................................................................68
Qodobka 145aad ....................................................................................................68
Dambiyada la Xidhiidha hawlwadeenada ....................................................................................................68
Qodobka 146aad ....................................................................................................68
Dambiyada la xidhiidha Codaynta ....................................................................................................68
Qodobka 147aad ....................................................................................................69
Dambiyada La xidhiidha Diiwaan-gelinta Cod-bixiyaha ....................................................................................................69
Qodobka 148aad ....................................................................................................69
Dambiyada la Xidhiidha Anshax xumada waqtiga ololaha ....................................................................................................69
Qodobka 149aad ....................................................................................................69
Anshaxmarinta ku Xad-gudubka Xeerka iyo Habka Doorashada ....................................................................................................69
Qodobka 150aad ....................................................................................................70
Ku Xadgudubka Xeerarka iyo Habka Doorashooyinka ....................................................................................................70
**CUTUBKA SAGAALAAD** ....................................................................................................70

**Qodobka 151aad** ..... 70
**Dacwadaha Doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa** ..... 70
Qodobka 152aad ..... 70
Dacwadaha Dorashada Golaha Wakiilada ..... 70
**Qodobka 153aad** ..... 71
**Dacwadaha Doorashada Golayaasha Degaanka** ..... 71
**CUTUBKA TOBNAAD** ..... **Error! Bookmark not defined.**
**QODOBO QUBANE AH** ..... **Error! Bookmark not defined.**
**Qodobka 154aad** ..... **Error! Bookmark not defined.**
**Xeer-nidaamiye** ..... **Error! Bookmark not defined.**
**Qodobka 155aad** ..... **Error! Bookmark not defined.**
**Laallid** ..... **Error! Bookmark not defined.**
**Qodobka 156aad** ..... **Error! Bookmark not defined.**
**Dhaqan-galka** ..... **Error! Bookmark not defined.**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILLADDU

**Markuu Arkay**:- Qodobka $4^{aad}$ farqadiisa $1^{aad}$, Qodobka $9^{aad}$ farqadiisa $1^{aad}$, Qodobka $22^{aad}$ farqadiisa $3^{aad}$ iyo Qodobada $40^{aad}$, $41^{aad}$, $42^{aad}$, $82^{aad}$, $83^{aad}$ $111^{aad}$ farqadiis 2aad ee Dastuurka Qaranka JSL.

**Markuu Arkay**:- In ay muhiim tahay in laga faa'iidaysto waayo aragnimadii laga dhaxlay doorashooyinkii kala duwanaa ee ay soo martay ummada Somaliland taas oo muujinaysa in loo baahan yahay in la adkeeyo nidaamka sharci ee suurto gelinaaya in ay muwaadiniintu cod-kooda ku dhiibtaan isla markaana la tir-tiro in ay dhacdo in lagu noq-noqdo cod-bixinta taa soo sharci-daro ah.

**Markuu Aqoonsaday**: Baahida loo qabo in dib u habeyn, wax ka badal iyo kaabis lagu sameeyo, dibna loo eego Xeerarkii Doorashooyinka Madaxtooyada, Golaha Wakiilada iyo Golayaasha Deegaanka iyo sidoo kale Xeerkii Diiwaan-galinta Cod-bixiyayaasha.

**Markuu Arkay**: Soo jeedinta Komishanka iyo Xukuumada oo isku soo dartay hal xeerna iskaga soo dhigtay Xeerarkii Doorashooyinka oo dhan iyo Xeerkii Diiwaangalinta Cobxisiyayaasha kaas oo noqonaya Xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka iyo Diiwaangalinta Cod-bixiyayaasha Xeer Lr. 91/2020.

## Wuxuu Ansixiyay

Xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka iyo Diiwaangalinta Cod-bixiyayaasha

*Xeer Lr. 91/2020*

**CUTUBKA KOOWAAD**
**QAYBTA 1AAD**
**QODOBBADA GUUD**

## Qodobka 1aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa **Xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka iyo Diiwaangalinta Cod-bixiyayaasha. Xeer Lr; 91/2020**

## Qodobka 2aad
## Eray-bixinta

**Astaan/Astaamaha:** - waxa loola jeedaa summad ama calaamad ama lambar u gaar ah hal xisbi/urur ama musharax oo lagu aqoonsanayo.

**Cod-bixiye: -** Waxaa loola jeedaa qofka buuxiyey shuruudaha cod-bixinta si waafaqsan Xeerkan kaas oo xaqiisa cod-bixineed gudanaya maalinta doorashada.

**Daneeyayaasha Doorashooyinka:-** Waxaa loola jeedaa Xisbiya/Ururrada siyaasadda, komishanaka doorashooyinka qaranka, musharixiinta, goob-joogayaasha, xukuumadda, golayaasha sharci-dejinta, iyo hay'adaha komishanka ka caawiya qabsoomidda doorashooyinka
**Dastuur:** Waxa loola jeedaa dastuurka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland

**Degmo-doorasho:**- Waxaa loola jeedaa degmooyinka ay u qaybsamaan Gobolada Dalka JSL, kuwaas oo leh gole deegaan oo lasoo doorto.

**Dhaarta Sirta:-** Waxaa loola jeeda dhaarta ay shaqaaluhu ku dhaaranayaan ilaalinta siraha iyo xogaha la xidhiidha doorashada iyo diiwaangalinta
**Diiwaangelinta cod-bixiyaha**:- Waxaa loola jeedaa muwaadiniinta isu diiwaangeliya inay codeeyaan xilliga doorashooyinka qaranka JSL

**Diiwaangelinta Muwaadinka**:- Waxaa looga jeedaa Diiwaangalinta muwaadin kasta oo reer Somaliland ah oo ay sameysay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo dawladaha hoose ee degmooyinka JSL.

**Diiwaanka Cod-bixiyaha:-** Waxaa loola jeeda diiwaanka lagu kaydinayo muwaadiniinta isu diiwaangaliyay in codkooda dhiibtaan doorashooyinka

**Diiwaanka Cod-bixiyeyaasha:-** Waxaa loola jeedaa diiwaanka lagu diiwaangaliyay cod-bixiyayaasha si waafaqsan Xeerka Diiwaangalinta Cod-bixiyayaasha.
**Diiwaanka Gobolka ama Degmada:-** Waxaa loola jeedaa diiwaanka heer degmo ama heer gobol ee warqada aqoonsiga ama warqadda codaynta.

**Diiwaanka Guud:-** Waxaa loola jeedaa diiwaanadda dhexe ee la dhigo xarunta Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Komishanka Doorashooyinka, kuwaas oo lagu kaydiyo dhammaanba xogta Muwaadiniinta iyo Cod-bixiyayaasha.

**Diiwaanka:-** Waxaa loola jeedaa diiwaanka lagu qoro xogta muwaadiniinta ee warqadda aqoonsiga.

**Doorashooyinka Qaranka:-** Waxaa loola jeedaa habka cod-bixiyayaashu ku soo doortaan Madaxweynaha iyo ku-xigeenka Madaxweynaha, mudanayaasha Golaha wakiilada iyo golayaasha deegaanka, iyada oo lagu go'aan qaadanayo aqlabiyada codadka la kala helay.

**Gobol-doorasho:** - Waxaa loola jeedaa sooh-dimaha kulmiya degmooyin doorasho ee Gobol.

**Golaha Degaanka:-** Waxaa loola jeedaa Golaha cod-bixiyayaasha degmadu u doortaan maamulka iyo sharci-dejinta D/Hoose ee degmada.

**Goob-cod-bixin:-** Waxaa loola jeedaa goobta tirooyin dadweyne oo cayimani (ka diiwaangashani) ka dhiibanayaan codkooda maalinta doorashada.

**Goob-joogayaal:-** Waxaa loola jeedaa kormeerayaasha caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah ee hubinaya habsami u socodka hawlaha doorashooyinka ee Komishanku ogolaaday..

**Hadhaa:-** Waxa loola jeedaa tirada codadka ee ka yar inta hal kursi lagu heli karo.

**Hawl Wadeen/Shaqaale:-** Waxaa loola jeedaa dhamaan shaqaalaha kala duwan ee Komishanku u hawlgeliyay inay ka shaqeeyaan goobaha cod-bixinta, xafiisyada doorashada ee degmooyinka iyo gobolada iyo xarunta dhexe Komishanka sida xeerku jideeyay.

**Kaadhka Aqoonsiga:** - Waxaa loola jeedaa kaadhka aqoonsiga muwaaddinimo (teesarada)

**Kaadhka Cod-bixinta:-** Waxaa loola jeedaa kaadhka la siiyo cod-bixiyaha marka la diiwaan-geliyo.

**Komishanka:-** Waxaa loola jeedaa Guddiga Sare ee loo xilsaaray maamulidda iyo ka garsooridda arrimaha doorashooyinka.

**Kursi:-** Waxaa loola jeedaa jago ama xil gole oo lagu tartamayo xili doorasho.

**Liis/Liisaska:-** Waxaa loola jeedaa magacyada musharaxiinta uu soo gudbiyey xisbi/ urur ee u tartamaya doorasho mucayina ama magacyada cod-bixiyayaasha.

**Musharax:-** Waxaa loola jeedaa qof kasta oo u tartamaya xil doorasho lagu heli karo, kaas oo buuxiyay shuruudaha u dejisan si waafaqsan Xeerkan, isla markaana uu ururkiisu/xisbigiisu u soo xulay in uu ku tartamo doorasho mucayan ah

**Muwaaddin:-** Waxaa loola jeedaa qof kasta oo buuxiyay shuruudaha uu tilmaamayo xeerka jinsiyaddu Xeer Lr. 22/2002.

**Ololaha Doorashada:-** Waxaa loola jeedaa hawlgalka dhaca muddada sharcigu jideeyay ee ka horaysa maalinta doorashada, ee ay ururada/axsaabtu iyo murashaxiintoodu kusoo bandhigaaan

barnaamijkooda siyaasadeed iyo mabaadiidooda. Hawlgalkaasi waxa ku jiri Kara kulano, isu-soo baxyo (rallies), waraysiyo, doodo, IWM, iyadda oo ay ujeedadu tahay in ay hantaan/kasbadaan cod-bixiyayaasha.

**Saraakiisha Dawlada:-** Waxaa loola jeedaa shaqaalaha mas'uuliyiinta ah ee ku siman agaasime Guud iyo wixii ka hooseeya iyo madaxda hay'adaha madaxa banaan ee dawladda iyo wixii ka hooseeya, iyo sidoo kale, saraakiisha ciidamada darajo kasta oo ay leeyihiin.

**Si Taxane ah:-** Waxaa loola jeedaa wax kala duwan oo xidhiidhsan oo loo qoray siday u kale horeeyaan.

**Wakiil:-** Waxaa loola jeedaa xubinta urur/xisbi usoo wakiishay la socodka hawlaha doorashada ee goob-cod-bixineed ama xafiisyada doorashada.

**Wasaarad:-** Waxaa looga jeedaa Wasaaradda Arimaha Gudaha JSL.

**Xad-gudub:-** Waxaa loola jeeda fal kasta iyo qawl kasta oo lid ku ah nidaamka doorashada iyo nabadgelyada guud.

**Xafiiska Degmada:-** Waxaa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo goobaha cod-bixinta ee degmo gaar ah.

**Xafiiska Gobolka:-** Waxaa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo hawlaha doorashada ee Gobol gaar ah

**Xafiiska Goobta:-** Waxaa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo hawlaha doorashada ee goob-cod-bixineed oo gaar ah.

**Xarrunta Dhexe:-** Waxaa loola jeedaa xafiiska ugu saraysa ee laga maamulayo hawsha doorashada ee ay ku shaqeeyaan Komishanka Doorashooyinka Qaranku.

**Xarun cod-bixineed:-** Waxaa loola jeedaa barta kulmisa hal ama in ka badan oo goobo cod-bixineed ah, oo la hawlgaliyo maalinta cobixinta.

**Xeerka Habka Ciqaabta:-** Waxaa Loola Jeeda Xeerka Habka Ciqaabta Guud.

**Qaadhaan:-** Waxaa loo jeeda deeq kasta Xisbi/urur ama Murashax ku helay lacag ahaan ama agab ama adeeg ahaan oo loogu talo galay in hawlaha ololaha lagu galo

## QAYBTA 2AAD

### Qodobka 3aad
### Xadka Adeegsiga Xeerka iyo Mabaa'diida Guud

1. Xeerkan
   a) Waxaa lagu maamulayaa doorashooyinka Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha JSL, Golaha Wakiillada, Golayaasha Degaannada, iyo hannaanka Cod-bixinta guud
   b) Waxaa lagu maamulayaa hannaanka diiwaangalinta cod-bixiyayaasha ee ka qayb-galaya doorashooyinka qaranka JSL.
   c) Wuxuu dajiyey aassaasidda, awoodaha iyo waajibaadka iyo hawlaha Komishanka Doorashooyinka ee Qaranka ee madaxa bannaan iyo xafiisyada doorashooyinka ee ay dhisto.
   d) Wuxuu cayimayaa falalka ku xad-gudubka hab-sami u socodka iyo nidaamka, diiwaangalinta, doorashooyinka iyo ciqaabtooda**.**
2. Mabaa'diida guud ee Xeerkan ku dhisan yahay waa:
   a) Xoriyadda muwaadiniintu u leeyihiin in ay adeegsadaan xuquuqdooda siyaasiga ah si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka JSL.
   b) Hirgelinta doorashooyin xor iyo xalaal ah, oo ka madhan cabsi gelin, laaluush iyo musuq-maasuq, loona maamulay si madaxbannaan, dhexdhexaad ah, sugan, hufan, oo la xisaabtan leh.

### Qodobka 4aad
### Shuruudaha Cod-bixiyaha

1. Waa inuu yahay Muwaadin Somaliland u dhashay.
2. Waa in aan da'diisu ka yaraan 15 (Shan iyo toban) sanno jir.
3. Waa inuu xor yahay oo aanu xabsi ku jirin.
4. Waa in uu yahay cod-bixiye ka diiwaangashan goobta uu ka codaynayo, haddii aanu kamid ahayn hawl-wadeennadda xafiiska goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyada/ururrada ee goobta ama ciidanka booliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka goobta cod-bixinta
5. Hadii qof aan buuxin shuruudaha cod-bixintu qaato kaadhka cod-bixinta si khaldan waxa Komishanka Doorashooyinka Qaranku awood u leyahay inu ka joojiyo dhiibashada codka maalinta cod-bixinta marka sidaas la cadeeyo, laguna qanco.
6. Musharrixiinta u tartamaya doorashada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynuhu waxa ay ka codayn karaan goob kasta oo cod-bixineed. Haseyeeshee hawl-wadeennada doorashada goobtu waa in ay arrintaas diiwaan-geliyaan. Waxase khasab ah in ay hal mar oo keliya ay codkooda dhiibtaan.
7. Musharrixiinta u taratamaya doorashada Golaha Wakiillada iyo Golayaasha Deegaanku waxa ay ka codaynayaan goobaha ay iska diiwaangaliyeen.

### Qodobka 5aad
### Xuquuqda Cod-bixiyaha

Cod-bixiye kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamay wuxuu xaq u leeyahay:-

1. Inuu codkiisa ka dhiibto goobta uu cod-bixiye ahaan uga diiwaangashan yahay.

2. Cod-bixiyaha ka maqan dalka JSL wuxuu ka codaynayaa xafiisyada diblomaasiyadeed ee JSL ku leedahay dibedda ee ugu dhow, haddii aanay jirin ama aanay suuragal ahayn waxa tallo ka gaadhaya Komishanka.
3. Codku waa inuu ahaado mid shakhsi ah, xor ah, toos ah, qarsoodi ah oo si siman loo tixgeliyo.
4. Cod-bixiye kastaa wuxuu yeelanayaa hal cod oo keliya doorashadiiba.
5. Xubnaha Komishanka doorashooyinku ma laha xaqa cod-bixinta inta ay xilka hayaan, laakiin waxay isu diiwaangalin karaan cod-bixiye ahaan.
6. Hawl-wadeennada xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta, Wakiilada Xisbiyada/Ururada, iyo ciidanka booliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixinta waxa ay ka codayn karaan goobta cod-bixineed ee ay ka hawl-gelayaan maalinta cod-bixinta.

## Qodobka 6aad
## Wakhtiga Qabashada Doorashooyinka

**1.** Komishanka ayaa cayimaya taariikhaha la qabanayo doorashooyinka si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerka, iyaga oo ku salaynaya bil ka hor mudo-xileedka Madaxweynaha, Madaxweyne ku xigeenka iyo Golaha Wakiilada, waxaana si rasmi ah loogu cayimayaa Degreeto Madaxweyne.
**2.** Komishanka Doorashooyinku waa in ay cayimaan waqtiga doorashada 120 (Boqol iyo Labaatan Maalmood) ka hor waqtiga doorashadu dhacayso, Madaxweynuhu waa in uu 15 maalmood gudahood ku soo saaraa degreetada cayimaadda muddada doorashadda, kadib marka uu helo cayimaadda Komishanka.
**3.** Komishanka doorashooyinku wuxuu markiiba wada qaban karaa hal doorasho iyo wixii ka badan haddii ay habboonaato.
**4.** Hadii doorashooyinka Madaxtooyada ay cadaato inaanay ku qabsoomi karin wakhtigii loo asteeyey arrimo farsamo awgeed ama arrin kasta oo ka baxsan xaaladaha ku xusan Qodobada 83aad iyo 42aad ee Dastuurka JSL waxa go'aan ka gaadhay wakhtiga mudo xilkeedka la kordhinaayo Golaha Guurtida oo la tashanaaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka.
**5.** Xaaladaha ku xusan Qodobada 83aad iyo 42aad ee Dastuurka waxa awood u leh mudo kordhinta Golaha Guurtida si waafaqsan dastuurka JSL.

## Qodobka 7aad
## Xaqa is Sharaxidda

1. Si waafaqsan Qodobka 22aad ee Dastuurka dalka iyo shuruudaha Xeerkan jideeyay, marka uu soo magacaabo xisbiga/ururka uu ka tirsan yahay muwaaddin kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu isu taago doorashayooyinka kala duwan ee madaxtooyada, Golaha wakiillada iyo Golayaasha Deegaanka
2. Xisbiyada Qaranku waa in ay u soo xulaan musharixiinta doorashada uga qayb galaya si Xeerkan waafaqsan, caadalad ah, daahfuran una adeegaysa ujeeddooyinka Xeerkan.

## **Qodobka 8aad**
## **Ka Qaybgalka Bulshada**

1. Komishanku waa in uu qaado talaabo kasta oo lagama maar-maan u ah ka qayb-galka bulshada ee nidaamka doorashooyinka oo ay ku jiraan in ay –
    a) Dajiyaan nidaamka wacyi-galinta cod-bixiyaasha,
    b) Suurto galiyaan qaab ay dadka naafada ahi uga qayb gali karaan dooorashooyinka;
    c) U fududeeyaan kor-joogayaasha doorashoyinka la socodka hawlaha doorashada iyo gudashada waajibkooda;
    d) Suurta galiyaan hab sahlan oo lagu heli karo xogta la xidhiidha habka doorashooyinka iyadoo la dhowrayo xogta gaarka ah;
2. Komishanku waa inuu ka talo galiyaaa daneeyayaasha doorashooyinka qorshayaashooda iyo hawlahooda shaqo ee la xidhiidha doorashooyinka.
3. Komishanku wuxuu Baarlamaanka iyo Xukuumada u soo jeedin karaa tallooyin ku saaabsan siyaasadaha doorashooyinka iyo dib u habayntooda.

## **Qodobka 9aad**
## **Shaqaalaha Dawladda & Hay'adaha Dawliga ah**

1. Shaqaalaha Dawladda iyo ciidamada Qaranka darajo kasta ha lahaadeene looma ogola inay isu sharaxaan doorashooyinka kala duwan, haddii aanay shaqo-ka-tegis soo qoran 90 cisho ka hor taariikhda qabashada doorashada.
2. Shaqo-ka-tegidda waxa shardi u ah inay sidaa qoraal ku soo caddeyso xafiiska ama Hay'adda awooda u leh caddayntaas.
3. Cadaynta shaqo ka tagista looma diidi karo murashaxa, dibna loogama dhigi karo sabab la'aan.

## **Qodobka 10aad**
## **Muddo-xileedyada**

Mudadda xilka ee Musharixiinta la doortay waxay ahaanaysaa: -

1. Madaxweynaha & Ku xigeenkiisa 5 sanno.
2. Golaha Wakiillada 5 Sanno.
3. Golayaasha Degaannada 5 sanno.

## **Qodobka 11aad**
## **Astaamaha murashixiinta iyo kala horaysiinta Magacyada iyo Astaamaha Xisbiyada/Ururada**

1. Komishanka Doorashooyinka qaranka ayaa murashixiinta Golaha wakiilada iyo deegaanada u astaynaaya astaamaha murashaxnimo,
2. Komishanka Doorashooyinku waxa uu Xisbiyada/ururada u samaynaya qori tuur si loogu asteeyo astaamaha iyo hannaanka ay ugu kala horaynayaan warqada cod-bixinta iyo qoraalada kale ee la xidhiidha doorashooyinka.

**CUTUBKA LABAAD**
**QAYBTA 1AAD**
**KOMISHANKA DOORASHOOYINKA QARANKA JSL**

**Qodobka 12aad**
**Qaab-dhismeedka Komishanka Doorashooyinka Qaranka**

Qaab-dhismeedka xafiisyada Komishanka Doorashooyinku wuxuu ahaanayaa sidan:

1. Xarunta Dhexe ee doorashooyinka.
2. Xafiiska Gobolka ee doorashada.
3. Xafiiska Degmada ee doorashada.
4. Xafiiska goobta cod-bixinta doorashada.

**Qodobka 13aad**
**Xubnaha Komishanka Doorashooyinka**

1. Komishanku wuxuu ka koobnanaya 7 (Todoba) xubnood, oo kala ah:
    a) Guddoomiye, gudoomiye ku-xigeen iyo 5 xubnood.
    b) Guddoomiyaha & Guddoomiye-xigeenka Komishanka iyagaa iska dhexdooranaya.
    c) Muddada xilka ee Komishanku waa 5 sanno, oo ka bilaabmaysa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, waana loo cusboonaysiin karaa xilka.
    d) Shaqaale dawladeed, xubin Barlamaan, Xubnaha Golaha Wasiirrada, ciidan Qaran iyo xubin xil u haysa urur/xisbi kama mid noqon karo Komishanka.
2. Komishanka doorashooyinka waxa magacaabaya Madaxweynaha JSL kaddib marka uu helo soo jeedimaha :-
    a) 2 xubnood oo Golaha Guurtidu soo xulo.
    b) 2 xubnood oo ay soo xulayaan ururada/xisbiyada mucaaridka ah ee diiwaangashan.
    c) 3 xubnood ee kale Madaxweynaha ayaa soo xulaya.
3. Komishanka waxa cod kala badh iyo hal ah (absolute majority) ku ansixinaya Golaha Wakiillada, markuu guddi- hoosaadka Arrimaha Guduhu soo hubiyo in ay buuxinayaan shuruudaha Xeerku tilmaamayo.
4. Xafiiska dhexe ee Komishanka Doorashooyinku wuxuu xaruntiisa ku yeelanayaa caasimadda Hargeysa.
5. Komishanka xil-gudashadiisa wuxuu ku salaynayaa Dastuurka JSL, Xeerkan, iyo xeerarka kale ee khuseeya, shirarkoodu wuxuu ku qabsoomayaa Kooram, go'aanadoodu waxay ku ansaxayaan aqlabiyad.
6. Komishanku waxa uu yeelan doonaa Xeer-hoosaad u gaar ah, oo waafaqsan Xeerkan.
7. Komishanku wuxuu xilkiisa u gudanayaa si madaxbannaan, lagumana samayn karo wax fara gelin ah haba yaraatee.

**Qodobka 14aad**
**Shuruudaha Xubinta Komishanka**

1. Waa inuu yahay muwaadin Somaliland u dhashay.
2. Waa inaan da'diisu ka yarayn 40 jir kana weynayn 70 jir.

3. Waa inuu Muslin yahay, kuna dhaqmaa diinta Islaamka.
4. Waa inuu leeyahay aqoon heer jamacadeed ugu yaraan.
5. Waa inaanu ka mid ahayn urur/xisbi siyaasadeed, kana madaxbannaan yahay.
6. Waa in lagu yaqaan dhawrsanaan, sharaf iyo caddaalad bulshada dhexdeeda.
7. Waa inaan dembi ciqaab oo maxkamad horteed kaga cadaadey ku dhicin weligiiba.
8. Waa inuu jidh ahaan iyo maskax ahaanba gudan karaa xilka.

## Qodobka 15aad
## Xil ka Qaadista Komishanka

1. Xubnaha Komishanka waxa xilka lagaga qaadi karaa:
   a) Markuu jabiyo shardi ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay.
   b) Marka uu xilka gudan Kari waayo karti darro ama caafimaad darro awgeed.
   c) Marka uu ku kaco anshax-xumo, xatoyo, musuq-maasuq, eex IWM.
2. Marka arrimaha kor ku xusan yimaadaan waxa Madaxweynuhu u magacaabayaa guddi-baadhiseed madaxbanaan oo ka soo warbixisa si uu go'aan ugu qaato.
3. Xil ka qaadista Komishanka waxa awood u leh Madaxweynaha, waxase shardi ah in Golaha Wakiiladu ku ansixiyo xil ka qaadistaas cod hal-dheeri ah (simple majority).
4. Marka ay bannaanaato xubin Komishanka ka mid ahi, xil ka qaadis, geeri, ama is casilaad awgeed, waxa buuxinta jagadaas loo raacayaa habka xubintii banaysay xilku ku timid.

## Qodobka 16aad
## Awoodaha Komishanka

Komishanku wuxuu awood u leeyahay:

1. Inuu cayimo wakhtiga doorashooyinka la qabanayo, iyagoo Madaxweynaha u gudbinaya si uu Degreeto ugu soo saaro.
2. Inay cayimaan tirada iyo goobaha cod-bixinta degmooyinka & gobolada.
3. Inay magacaabaan, eryaan, anshax-mariyaan shaqaalaha xafiiska dhexe iyo Gobolada iyo Degmooyinka doorashoyinka Si madaxbannaan.
4. Inay qorsheeyaan Miisaaniyadaha lagu maamulayo hawlaha doorashooyinka iyo Diwaangalinta Cod-bixiyayaasha.
5. Inay ku dhawaaqaan natiijooyinka doorashooyinka Madaxtooyadda, Golaha Wakiilada iyo Golayaasha Deegaanka si ku meel gaadh ah, inta aan Maxkamadda Sare ansixin.
6. Inay kormeeraan si kedis ah iyo si qorshaysanba goobaha doorashada iyo meel kasta oo hawshooda khusaysa.
7. Inay go'aan ka gaadhaan muranada iyo cabashooyinka doorashada ee ka soo gaadha xafiisyada hoos yimaada.
8. Inay sameeyaan daraasad ku saabsan sidii dalka loogu samayn lahaa goobo doorasho, oo cod-bixiyayaashu codkooda ka dhiibtaan maalinta doorashada.
9. Inuu diiwaan-geliyo cod-bixiyayaasha ka hor taariikhda doorashada.

10. In ay ogolaadaan, jiheeyaan, isku xidhaan, hay’adaha caalamiga ah, kuwa maxaliga ah iyo daneeyayaasha kale ee ka shaqeeya hawlaha doorashooyinka.
11. In ay maamulaan hawlaha wacyigelinta cod-bixiyayaasha ee doorashooyinka.
12. In ay soo saaraan Xeer-nidaamiye (regulations), Habraacyo, go’aanno, Xeerar Anshax (Codes of Conduct), oon ka hor imanayn Xeerkan iyo xeerarka kale ee doorashooyinka khuseeya.
13. In ay awood u leeyihiin in ay dejiyaan habab maamuleed oo ku saabsan ilaalinta, baadhista iyo dabagalka ku dhaqanka xeerarka anshaxa arrimaha doorashooyinka ee xisbiyadda/ururada iyo murashaxiintooda iyo talaabooyinka idaariga ah oo ay ku jiraan ganaax idaari ah, oo laga qaadi karo ku xadgudbyada qodobbada xeeraka anshaxa.
14. In ay maamulaan olalayaasha doorashooyinka.
15. Komishanku wuxu si madax bannaan u maamulayaa qandaraasyada la xidhiidha Agabka iyo adeegyada doorashooyinka iyo diiwaangelinta cod-bixiyayaasha si waafaqsan habraaca qandaraasyada.
16. Komishanku waxa uu leeyahay awoodaha kale ee ku xusan xeerarka kale ee dhaqangalka ah.

## Qodobka 17aad
## Miisaaniyadda Komishanka Doorashada

1. Komishanku wuxuu yeelanayaa Miisaaniyad u gaar ah, oo ay soo qorshaysteen, una gudbinayaan Madaxweynaha, taas oo marka laysla ogolaado loo gudbinayo Golaha Wakiilada oo ansixinaya.
2. Miisaaniyadda doorashada waxay Komishanku u isticmaalayaan si madax bannaan, iyadoo ay waajib tahay inay xisaab-celin saddex biloodle ah u gudbiyaan Xisaabiyaha Guud, Madax-xigaha Doorashooyinka waxaa la xisaab celinayaa marka ay dhamaato Diiwaan-galinta ama Doorashadu.
3. Miisaaniyadda komishanka doorashooyinka qaranka waxaa lagu hanti dhawrayaa Digreeto Madaxweyne oo kaliya, iyada oo la tix galinayo Dhex-dhexaad-nimada Komishanka doorashooyinka qaranka.

## Qodobka 18aad
## Sanduuqa Doorashooyinka/Diiwaangalinta

1. Waxa Xeerkan aas-aasayaa sanduuqa doorashooyinka oo Komishanku maamulayo laguna shubayo:–
   a) Dhammaan lacagaha loogu talo galay komishanka;
   b) Lacagaha ay bixiyaan qaadhaan bixiyayaashu ee komishanka loogu talo-galay;
2. Komishanku waa inuu sanduuqa u maamulaa si xil-kasnimo leh oo madaxbannan una xisaab celiyaa Xisaabiyaha Guud.
3. Dhamaan ganaaxyada laga qaado murashixiinta/xisbiyada/ururada kala duwan ee u tartamaaya doorashooyinka waxa lagu shubayaa Sanduuqa Doorashooyinka Qaranka.

**Qodobka 19aad**

**Xafiiska Goobta Cod-bixinta**

1. Xafiiska goobta cod-bixinta ee doorashu wuxuu ka koobmi doonaa guddoomiye, guddoomiye ku-xigeen, hubiye, iyo xoghaye.
2. Guddoomiyaha, guddoomiye ku-xigeenka, xoghayaha iyo hubiyaha waxaa magacaabaya Komishanka, waxaanu samayn karaa isku bedelid haddii loo baahdo.
3. Haddii loo baahdo oo arrin deg deg ahi timaado, Hubiye ama xoghayaha waxa bedeli Kara guddoomiyaha goobta cod-bixinta, iyadoo cod-bixintu socoto, waxaanu bedelkaas ka samayn karaa dadka goobta ku sugan ee leh xaqa cod-bixinta sida sharcigu xusayo ka dib marku la tashado Gudoomiye ku-xigeenka goobta.
4. Xafiiska goobta cod-bixintu wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee goobta.

**Qodobka 20aad**

**Xafiiska Degmada ee Doorashada**

1. Xarunta degmo kasta waxa jiraya xafiis doorasho degmo. Waxaanu ka koobmayaa Guddoomiye, Guddoomiye ku-xigeen, xoghaye, hubiye, iyo laba tiriye.
2. Guddoomiyaha, guddoomiye ku-xigeenka, Hubiyaha, Xoghayaha iyo tiriyeyaasha waxaa magacaabaya Komishanka, isagaana awood u leh isku-bedelkooda.
3. Xafiiska degmada ee doorasho wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee degmada.

**Qodobka 21aad**

**Xafiiska Gobolka ee Doorashada**

1. Magaalo-madaxda gobol kasta waxaa jiraya xafiis doorasho gobol oo ka kooban guddoomiye, guddoomiye Ku-xigeen iyo xoghaye oo uu soo magacaabay Komishanku.
2. Xafiiska gobolka ee doorashadu wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee gobolka.
3. Haddii loo baahdo Komishanka Doorashooyinku waxa uu awood u leeyahay in uu kordhiyo tirada shaqaalaha ee ka hawl-galaysa goob cod-bixineed, heer degmo, iyo/ama gobol.

**Qodobka 22aad**

**Shaqaalaha komishanka doorashooyinka Qaranka**

1. Shaqaalaha Komishanka doorashooyinku u qaato wakhtiga doorashada kama mid ah shaqaalaha dawlada wayna ka madaxbanaan yihiin waxaana lagu maamulayaa Xeer-nidaamiye Ugaar ah oo uu samaynayo komishanka doorashooyinka Qaranku.
2. Shaqaalaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka uma bannaana inuu ku kaco fal loo arki karo inaanu dhex ahayn, gaar ahaan Kama qayb qaadan karo qaadhaan loo ururinayo musharax u tartamaya doorasho, hogaan xisbi ama jago kasta oo xisbi ama urur siyaasadeed.

**Qodobka 23aad**

**Shaqo qorista iyo ka Saarista gudoomiyayasha gobolada iyo degmooyinka doorasho**

1. Komishanku waxay shaqada ka eryi karaan Guddoomiye Gobol/Degmo Doorasho kasta oo:-

a) Awoodi waaya inuu shaqadiisa u guto sababo caafimaad sida xanuun jidheed ama maskaxeed ama karti darro keenta inuu kasoo bixi waayo waajibaadkiisa shaqo ee Xeerkan jideeyay;
b) Ku guuldaraysta gudashada xilkiisa Guddoomiyenimo ee sharcigu jideeyay ama u hogaansami waayo awaamiirta Komiishanka;
c) U hogaansami waayo xudduudaha goobaha doorasho ee Komishanku dajiyay;
d) Komiishanku u arko in aanu dhexdhexaad ahayn haddii dhexdhexaadnimo la'aantiisu soo baxdo intuu shaqada ku gudo jiro iyo haddii kaleba.

2. Komishanku waa inuu shaaciyaa magacyada, ciwaanka iyo shaqada dhammaan Guddoomiyaasha Gobolada doorasho iyo Degmo doorasho.
3. Guddoomiyaha Gobolku ka dib marka uu la tashado Komishanka, wuxuu qoraal qayb shaqadiisa Xeerkan jideeyay ka mid ah ugu igman karaa cid kale isagoo ku kormeeraya.
4. Haddii Guddoomiye Gobol/degmo shaqada laga joojiyo sabab kasta oo xil-gudasho la'aaneed, Komishanku waxay bedelkiisa u igman karaan qof kale oo qabta shaqadii iyo waajibaadkiisa Guddoomiyaha ee doorashadaas la xidhiidhay.

## Qodobka 24aad

## Hawl-wadeennada Xafiisyada Doorashada/Diiwaangalinta

1. Xubnaha Komishanku u magacaabo xafiisyada doorashada/diiwaangelinta waa in loo sheego in xilka loo magacaabay ugu yaraan 15 maalmood ka hor taariikhda la qabanayo doorashada/cod-bixinta.
2. Qofkii loo magacaabo xilalka xafiisyada doorashooyinka/diiwaangelinta marmarsiiyo shaqada loogama dayn karo, haddii aanu jirin cudurdaar dhab ah oo Komishanku ku qanci karo.
3. Xubnaha loo magacaabay xafiisyada doorashada ee goobaha, degmada iyo gobolka waxa dhaarinaya guddoomiyaha Maxkamadda degmada (dhaar fagaare), dhaartaas oo noqonaysa sidan:

"WAXA IGU WALAAHIYA OO IGU BILAAHIYA INAAN HAWSHA DOORASHADA U GUDAN DOONO SI XILKASNIMO, DAACADNIMO LEH. INAAN DHEX U AHAADO XISBIYADA/URURADA IYO MURASHAXIINTA, SHARCIGA IYO CADAALADNA AAN KU SHAQAYNAYO"

4. Xubnaha Komishanku waxay mid mid dhaarta kor ku xusan kaga hor dhaaranayaan Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.
5. Xubnaha ciidamada qalabka sida ama kuwa leh qaab-ciidameed, Guddoomiyayaasha gobolada, degmooyinka, golayaasha degaanada, xubnaha golayaasha sharcidejinta, murashaxiinta u taagan doorasho looma magacaabi karo xafiisyada doorashooyinka.
6. Hawl-wadeenada goobaha cod-bixinta, kuwa xafiisyada doorashada degmooyinka/gobolada waxay mudada shaqadoodu ku dhamaanaysaa marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada, hasayeeshee Komishanku wuu kordhin karaa muddada shaqada intii uu u baahdo.
7. Guddoomiyayaasha xafiisyada doorashada degmooyinka iyo gobolada ma noqon karaan shaqaale dawladeed, ciidan qaran, xubin xisbi/urur. Shuruudaha lagu soo xulanayaa waxay la

mid yihiin kuwa Komishanka Heer Qaran lagu soo doortey, marka laga reebo da'da oo ah in aanu/aanay da'diisu/da'deedu ka yarayn 36 jir kana waynayn 60 jir.

**Qodobka 25aad**

**Gunnada Hawl-wadeenada**

1. Gunnooyinka ay qaadanayaan hawl-wadeenada xafiisyada doorashooyinka waxa qorshaynaya Komishanka, iyagoo ku salaynaya xilalka hawl-wadeenadu ku kala magacaaban yihiin.
2. Hawl-wadeenka loo diro hawl meel ka baxsan halka uu ku noolaa wuxuu yeelanayaa gunno-saad (subsistence allowance) muddada uu maqan yahay, waxana qorshaynaya Komishanka.

**Qodobka 26aad**

**Dhawrsanaanta Komishanka, Musharixiinta iyo Hawl-wadeenada**

1. Dhammaan hawl-wadeenada ka hawlgelaya xafiisyada doorashooyinka, wakiilada Ururada/xisbiyada ee Xeerkan tilmaamay waxay sharci ahaan (legal status) la mid yihiin saraakiil guud (public officer).
2. Musharixiinta, hawl-wadeenada xafiisyada doorashooyinka iyo wakiilada xisbiyada lama xidhi karo xilliga doorashada, haddii aan la qaban iyaga oo danbi ciqaabeed faraha kula jira.
3. Komishanku wuxuu leeyahay dhawrsanaan la mid ah ta Golaha Wasiirada mudada uu xilka hayo. Dhawrsanaan ka qaadistoodana waxa loo marayaa sida uu tilmaamayo Qodobada 94(8) iyo 96(4) ee Dastuurka.

## CUTUBKA 3AAD
## QAYBTA 1AAD
## DIIWAAN-GELINTA COD-BIXIYAYAASHA

**Qodobka 27aad**

**Xadka ku dhaqanka**

Cutubkan waxaa lagu maamulayaa diiwaangelinta cod-bixiyayaasha ee Qaranka Somaliland oo ay u xilsaaran yihiin Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

**Qodobka 28aad**

**Diiwaanada Cod-bixiyeyaasha Qaranka Somaliland**

1. Qaranka Somaliland Waxa uu yeelan doonaa diiwaanka Cod-bixiyaha, Diiwaankaasi oo lagu diiwaan-gelin doono muwaaddin kasta oo xaq u leh in uu wax doorto ama la doorto, sida ku cad Dastuurka yo Xeerarka kale ee dalka.
2. Muwaadinkasta oo isku sharaxaaya Doorashada madaxtooyada JSL waa in uu yahay cod-bixiye diiwaangashan.
3. Muwaadin kasta oo isku sharaxaaya Doorashooyinka Wakiillada iyo Deegaanku waa in uu ka diiwaangashan yahay Gobolka ama Degmada uu isu sharaxaayo.
4. Diiwaanka ku xusan faqradaha 1aad waxa uu noqonayaa Dokumenti lagu kaydiyo Qalabka Kombiyuutarka iyo diiwaano oo ka kooban dhammaan xogaha laga qoro muwaaddinka marka loo diiwaan-gelinaayo cod-bixiye ahaan.

**Qodobka 29aad**

**La-haanshaha diiwaanka**

1. Diiwaankani waa hanti ummadeed oo uu leeyahay qaranka JSL
2. Diiwaanka Cod-bixiyayaashana Xisbi/urur kasta oo siyaasadeed waxa uu xaq u leeyahay in uu la socdo habaynta, dhaqan-gelinta, iyo daabacaadda liisaska Diiwaanka.

**Qodobka 30aad**

**Dhaqan-gelinta Diiwaangelinta Cod-bixiyaha**

Iyada oo la adeegsanayo dhammaan hababka warbaahinta kala duwan ee ka jira dalka:

1. Waa in la daabaco, islamarkaana la baahiyo xilliga loo cayimay Diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha iyo dhammaan wixii xog ah ee ay muwaaddiniintu u baahan yihiin in ay ogaadaan.
2. Waxaa waajib ah in la baro islamarkaana lagu wacyi geliyo muwaaddiniinta muhiimadda ay Diiwaangelinta cod-bixiyayaashu leedahay

**Qodobka 31aad**

**Dadka ay ka reeban tahay in la diiwaangeliyo**

Dadka ay ka reeban tahay in loo diiwaan geliyo cod-bixiye

1. Muwaadinka aan xiskiisu dhamyn
2. Maxaabiista Xukuman ama gar-sugayaasha ah.
3. Qof aan u dhalan Somaliland
4. Qof aan gaadhin da'da cod-bixinta 15 sanno (Shan iyo toban) jir.
5. Qofka goob hore iska diiwaangeliyey

**Qodobka 32aad**

**Kaydinta diiwaangalinta cod-bixiyayaasha iyo soo saarista liisaska Kama dambaysta ah**

Komishanku waxa xil ka saaran yahay kaydinta, xafidaadda iyo soo saarida liiska Kama dambeysta ah ee diiwaangalinta cod-bixiyayaasha 6 bilood gudahood ka hor maalinta doorasho kasta.

**Qodobka 33aad**

**Dadka aan lahayn awoodda saxeexa**

Foomka Diiwaangelinta cod-bixiyaha, qof aan lahayn awoodda saxeexa wuxuu ku saxeexayaa foomka diiwaangelinta suulka gacanta bidix, haddii uu naafo ka yahayna wuxuu adeegsanayaa suulka gacanta midig, haddii uu labadaba la'yahay waxa uu adeegsanayaa mid ka mid ah faraha kale ee gacmaha, hadduu tobankaba la'yahay waxa u saxeexaya mas'uulka diiwaangelinta, waana in arrintaa lagu qoraa foomka diiwaangelinta

**Qodobka 34aad**

**Habka xafidaadda qalabka diiwaangelinta**

1. Marka ay dhammaato hawl-maalmeedka shaqo ee diiwaangelintu Dhammaan qalabka loo isticmaalay diiwaangelinta waxa lagu celinayaa Xafiiska Degmada/Gobolka, hadii ay suurtogel tahay, hadii hawl-wadeenada qaar ka mid ahi sidaas yeeli waayaan mas'uulka

diiwaangelinta ee Degmada oo xil ka saaran yahay wuxuuna sida ugu dhakhsaha badan ugu war-geliyo komishanka, isla markaana uu faro in mas'uulka khaladkaas ku kacay la mariyo sharciga.

2. Meelaha ay ka jirto gaadiid xumo qalabka diiwaangelintu waxa ka mas'uul noqonaya diiwaangeliyaha oo marka uu shaqada dhameeyo hal mar u gudbinaya diiwaangeliyaha Degmada ama Gobolka, hase yeeshee mas'uulka diiwaangeliyaha ah waxa uu xil ka saaran yahay qorista iyo xafidaada diiwaanadda hawl-maalmeedka diiwaangelinta oo dhan.
3. Hawl-maalmeedka goobta diiwaangelinta waxa la bilaabaya todobada subaxnimo, waxayna dhammaanaysaa lixda galabnimo, haddii dib u dhac ku yimaadana waa in lagu caddeeyaa warbixinta sababta keentay dib-u-dhaca, haddii dib u dhacu aanu garawshiiyo lahayn waa in mas'uulka diiwaangelinta ee degmaddu talaabo ka qaado, sidaasna uu war bixin ugu gudbiyo mas'uuliyiinta ka saraysa, haddii ay gaadho lixda galabnimo oo ay joogaan dad aan la diiwaangelin waxa loo raacaya Qodobka 114aad, waxaana la diiwaangelinayaa dadkaas ilaa inta ay ka dhammaanayaan dadka markaa joogaa.

## Qodobka 35aad

## Hab-qoraalka magaca muwaadinka

Magaca Muwaadinka waa in lagu qoro xuruufta waaweyn (capital letters) Af-soomaali ah, waana in si wanaagsan loo tixgeliyaa shaqaallada dhaadheer iyo shibnanayaasha laban-laabma si magacna aanu ugu qormin siyaabo kala duwan.

## Qodobka 36aad

## Saxitaanka xogaha khaldama

1. Muwaadinka ku arka liiska diiwaangelinta xog khaldan oo isaga ku saabsan, waa in uu u sheego mas'uulka diiwaangalinta kuna qoro oo saxeexo foomka loogu talo galay arintan. Mas'uulkaasina waa inuu sida ugu dhakhsaha badan u sameeyo sixitaan hadii uu awoodo, warbixinna u gudbiyo mas'uulka diiwaanka heer qaran isagoo u sii marinaya mas'uuliyiinta heer Degmo iyo Gobol.
2. Marka ay dhammaato muddada loogu talo galay beddelka iyo sixitaanku, mas'uulka diiwaangalinta Qaranku wuxuu xog faahfaahsan ka diyaarinayaa dhammaan wixii is- beddelay, wuxuuna xogtan u gudbinayaa mas'uulka ay khusayso si loo ansixiyo loona ogolaado in isbeddeladan la geliyo Diiwaanka.
3. Komishanku waxa uu xeer-nidaamiye ku soo saarayaa nidaamka sixitaanka xogaha khaldama.

## Qodobka 37aad

## Nooca kaadhka cod-bixinta

Kaadhka cod-bixintu waa in ay ka samaysan tahay shay aan si fudud u duugoobayn ama dhammaanayn oo aan wax laga bedelikaraynin ama la-been abuuri kareyn (laf).

**Qodobka 38aad**

**Lumista Kaadhka Cod-bixinta**

1. Qof kasta oo uu ka lumo ama ka xumaado Kaadhka cod-bixintu, waxa uu waydiisan karaa mas'uuliyiinta u xilsaaran, mas'uuliyiintuna waa in ay siiyaan Kaadhka cod-bixineed oo cusub, oo sida xogtii iyo tixraacii hore marka sidaas laga soo codsado, lana caddeeyo sababta lumista.
2. Qofka uu ka xumaado waxa uu mutaysanaya in loo bedelo marka uu keeno kaadhkii xumaaday.
3. Qof kasta oo hela Kaadhka cod-bixinta waa inuu geeyaa meesha ugu dhow Saldhig booliis ama Xafiisyada komishanka.
4. Kaadhka marka la helo cidda loo dhiibay waa inay ku wargelisaa masuulka degmada, sida Guddoomiye degmo, haydh tuulo iyo xubin deegaan. Kuwaas oo gaadhsiin kara fariinta loo dhiibay. Waxaana la siinayaa kaadhkaa qofkii lahaa.
5. Komishanku waxa uu soo saarayaa xeer nidaamiya faahfaahinaaya hanaanka loo baddelaayo kaadhadhka cod-bixiyaha ee luma ama xumaada.

**Qodobka 39aad**

**Dhawrista Xogta Cod-bixiyaha**

1. Xogta Diiwaannadu waa sir u gaar ah Qaranka iyo qof kasta oo muwaaddin ah oo is-diiwaangeliyey, sidaas daraadeed:-
   a) Sifo aan Sharciga waafaqsanayn loogama faa'iidaysan karo, looma gudbin karo, loomana beddeli karo.
   b) Qof kasta oo, sifo aan Sharci ahayn ula baxa, u bixiya ama xada waxa uu mutaysanayaa ciqaab dhan 3 illaa 5 sanno oo xadhig ah.
2. Habka dacwada waxa loo raacayaa Xeerka Habka Ciqaabta.
3. Xogta Muwaadinka waxa la siin karaa hay'adaha nabadgalyada, haddii ay lagama maarmaan u tahay amniga iyo nabadgalyada guud ee qaranka iyo muwaadiniinta, waxaana lagu bixin karaa oo kaliya haddii uu sharci sidaas waajibiyo ama amar ay soo saartay Maxkamad awood u lihi.
4. Waxaa reebban in Xogta Muwaadiniinta iyo cod-bixinta loo gudbiyo dal & dad shisheeye ah.

**Qodobka 40aad**

**Qaadashada wax ka badan hal kaadh oo cod-bixineed**

1. Waxaa reebban in uu Muwaaddinku qaato wax ka badan hal Kaadh Cod-bixineed.
2. Haddii uu Muwaaddinku si khiyaamo ah u qaato, wax uga beddelo, u been abuuro Kaadh Cod-bixineed iyo wax ka badan waxa uu mutaysanayaa Ciqaabta ku xusan xeerkan Qodobkiisa 147aad farqadiisa 5aad.

**Qodobka 41aad**

**Diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha**

1. Qofkasta oo raba in uu isu diiwaangeliyo cod-bixiye Doorashooyinka Qaranka waa in uu sitaa Kaadhka Aqoonsiga Muwaadinka.

2. Hadii ay dhacdo in muwaadiniinta qaarkood ayna haysan Kaadhka aqoonsiga Muwaandinka, waa in Wasaarada Arrimaha Gudahu ku sugtaa Muwaadinnimadooda goobta qaadashada kaadhka cod-bixiyaha.

**Qodobka 42aad**

**Habka diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha**

1. Doorashooyinka Qaranka waxa ka codayn kara oo keliya qof muwaaddin ah oo ku diiwaangashan Diiwaanka Cod-bixiyaha.
2. Liiska diiwaanka cod-bixiyayaasha waxa soo saaraya Komishanka Doorashooyinka Qaranka Lixbilood (6) gudahood xilliga doorshada.
3. Diwaangalinta cod-bxiyayaasha laguma xidhi karo lacag lagu bixinaayo ama shuruud kale oo lacageed.
4. Muwaaddin kasta oo isaga diiwaangeliya Komishanka Doorashooyinka Qaranka cod-bixiye si Sharciga waafaqsan waxa la raacayaa habka gaarka ah ee Aqoonsiga Cod-bixiyaha (Unique Biometric Identification) oo ah in sawir la qaado indhaha muwaadinka. Komishanka Doorashooyinku wuxu ku kordhin karaa hanaan kale oo ku dhisan nidaamka casriga ah.

**Qodobka 43aad**

**Shaqada komishanka doorashooyinka qaranka ee diiwaangelinta**

Iyada oo aan waxba loo dhimayn xilka iyo waajibaadka Komishanka Doorashooyinka Qaranka ee xeerarka kale u xil-saareen, komishanku:-

1. Waxa uu dalka Somaliland ka dhaqan-gelinayaa hawsha diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha ka hor taariikhda doorashada.
2. Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa ka mas'uul ah habaynta, dhaqan-gelinta iyo daabacaadda diiwaanka cod-bixiyeyaasha.
3. Komishanka Doorashooyinka Qaranku wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiyayaal, Go'aamo, Habraacyo iyo Amarro lagu dhaqangelinayo Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha
4. Wuxu dib-ufuris ku samaynaya diiwaanka cod-bixiyayaasha ka hor doorasho kasta, Komishanka ayaa go'aamin doona hanaanka iyo habka dib-ufurista.

**Qodobka 44aad**

**Ku dhawaaqidda diiwaangelinta cod-bixiyayaasha**

Madaxweynaha ayaa ku dhawaaqaya xiliga la bilaabayo diwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha, isaga oo ku soo saaraya Xeer Madaxweyne, kaddib marka uu helo soo-jeedinta Komishanka Doorashooyinka Qaranka mudo shan iyo tobban maalmood Gudahood oo ka bilaabanta marka uu helo soo-jeedinta.

**Qodobka 45aad**

**Dhaqan-gelinta diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha**

1. Muddada ay Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaashu soconayso iyo Hab-raacaba (procedure) waxa uu Komishanka Doorashooyinka Qaranku kusoo saarayaa Xeer-hoosaad (Regulations).

2. Komishanku isagoo adeegsanaya dhammaan hababka warbaahinta kala duwan ee ka jira dalka, waa in uu daabaco, islamarkaana baahiyo xilliga loo cayimay Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha iyo dhammaan wixii xog ah ee ay muwaaddiniintu u baahan yihiin in ay ogaadaan.
3. Komishanka waxaa ku waajib ah in uu baro, islamarkaana ku wacyi geliyo muwaaddiniinta muhiimadda ay Diiwaangelinta cod-bixiyayaashu leedahay.
4. Si arrintaa loo suurto-geliyana Komishanku waa in uu diyaariyaa barnaamijyo qayb ka ah geedi-socodka Diiwaan-gelinta oo loogu talogalay in lagu baro laguna wacyi geliyo dadwaynaha in ay isu diyaariyaan diiwaangelinta cod-bixiyayaasha**.**

**Qodobka 46aad**

**Foomka diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha**

Foomka diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha ayaa sal-dhig u noqonaya diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha, waxaana lagu qorayaa xogaha hoos ku xusan:-

1. Magaca Cod-bixiyaha oo afran una qoran sida uu ugu qoranyahay Warqadda Aqoonsiga hadii ay jirto
2. Sannadka uu dhashay iyo meesha uu ku dhashay
3. Lab ama dhedig
4. Saxeexa cod-bixiyaha ama tilmaan muujinaysa in aanu cod-bixiyuhu saxeexi karayn.
5. Lambarka gaarka ah ee lagu diiwaan-geliyay cod-bixiyaha
6. Lambarka tix-raaca diiwaan-gelinta cod-bixiyaha
7. Lambarka warqadda Aqoonsiga (ID Card Number)

**Qodobka 47aad**

**Xogta lagu qorayo kaadhka codaynta**

Kaadhka cod-bixinta waxa waajib ah in ay ku qornadaan xogtan hoose:-

1. Magaca oo afran.
2. Sawirka cod-bixiyaha
3. Lambarka warqadda/Kaadhka aqoonsiga hadii uu sito
4. Lambarka Tixraaca Diiwaan-gelinta Cod-bixiyaha.
5. Sannadka uu dhashay.
6. Jinsiga (Lab ama Dhedig).
7. Goobta Doorashada ee uu cod-bixiyuhu ka dhiibanayo codkiisa.
8. wixii kale ee loo baahdo

**Qodobka 48aad**

**Sixitaanka iyo muranka da'da**

Da'da muwaadinka waxa lagu jaangoynayaa da'dda muwaadinka ee ku qoran warqadda aqoonsiga ee muwaadinka.

## Qodobka 49aad

## Shaqaalaha diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha

1. Si loo dhaqan-geliyo diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha, Komishanku waa in ay qaataan shaqaale khibrad iyo xirfad u leh dhaqan-gelinta diiwaan-gelinta
2. Shaqaalaha loo qaadanaayo xafiisyada kala duwan ee Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaashu waa in ay noqdaan dad reer Somaliland ah oo ka madaxbannaan siyaasadda oo lagu soo xushay khibradda iyo aqoonta looga baahan yahay booska uu ka shaqaynaayo.
3. Inta aan qofka la shaqaalayn, waa in la qeexo:-
   a) Shuruudaha iyo xirfadaha looga baahan yahay qofka loo qaadanaayo booska;
   b) Habka loo raacayo xulashada Shaqaalaha
   c) Waajibaadyada shaqo ee qof kasta (boos kasta) uu ku lahaanayo geedi-socodka hawsha Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha.

## Qodobka 50aad

## Habka iyo goobaha diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha

1. Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa Xeer-hoosaad (Regulations) faah-faahsan ku soo saaraya Habka Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha iyo Goobaha Diiwaangelinta ee Degmo iyo Gobol.
2. Sidoo kale waxa uu Komishanku Xeer-hoosaad ku soo saarayaa in uu Muwaaddinku farsamo ahaan iska diiwaangelin karo goobta ama Magaalada uu joogo balse uu doorto meesha uu ka codaynaayo
3. Sidoo kale waxa uu Komishanka Xeer-hoosaad ku soo saaraya in cod-bixiyuhu badelan karo goobta cod-bixinta doorashada ka hor.

## Qodobka 51aad

## Wakiillada Xisbiyada/Ururada qaranka ee diiwaangelinta cod-bixiyaha

1. Xisbi/Urur kasta oo siyaasadeed waxa uu magacaabayaa wakiil uu u soo dirsado goob kasta oo diiwaan-gelineed.
2. Wakiillada Xisbiyadu/Ururadu waxa ay hubinayaan in geeddi-socodka diiwaan-gelintu uu waafaqsan yahay sharciga, in aanay dhicin wax kala takoorid ahi, iyo in aan muwaaddin looga reebin diiwaan-gelinta si sharci-darro ah.
3. Wakiillada Xisbiyadu/Urudadu way diiwaangelin karaan wixii cabasho ah ee arrimahaas ku saabsan.
4. Shuruudaha lagu soo xulaayo iyo goorta lasoo gudbinaayo Wakiillada Axsaabta waxaa Komishanku kusoo sarayaa Xeer-hoosaad (Regulations)

## Qodobka 52aad

## Hawsha mas'uulka komishanka doorashooyinka qaranka ee goobta diiwaangelinta cod-bixiyaha

1. Mas'uulku waa inuu waydiiyo cod-bixiyaha in ay rasmi yihiin xogaha la geliyay foomka muwaadinnimada.

2. Mas'uulku waa inuu xogta sare ku xusan geliyo Foomka diiwaangelinta cod-bixiyaha, isla markaana uu u akhriyo cod-bixiyaha.
3. Cod-bixiyuhu waa in uu saxeexo Foomka diiwaan-gelinta cod-bixiyaha ama sida kale ee ku xusan Qodobka 33aad ee Xeerkan.

**Qodobka 53aad**

**Soo saarista iyo daabacaadda liisaska cod-bixiyayaasha**

Komishanka Doorashooyinka Qaranku, isagoo ku salaynaya liiska magacyada diiwaanka ku jira, waa in uu soo saaro liisaska cod-bixiyayaasha ee lagama-maarmaanka u ah qabsoomidda Doorashada, si uu u noqdo liis cod-bixineed oo rasmi ah (official).

**Qodobka 54aad**

**Soo saarista liisaska Kama dambaysta ah ee cod-bixiyayaasha**

1. Marka la diiwaangeliyo dhammaan wixii isbeddel ah, waxaa la diyaarinayaa liiska kama dambaysta ah oo noqonaaya liiska uu Komishanka Doorashooyinku amri doono in laga daabaco dhammaan liisaska loo baahan yahay sida ay waajibinayaan Xeerarku.
2. Komishanka Doorashooyinka Qaranka waxaa ku waajib ah in uu siiyo Wasaaradda Arimaha Gudaha iyo Xisbiyada/ururada Siyaasadda liiska cod-bixiyayaasha ee kama danbaysta ah.

**Qodobka 55aad**

**Qaybinta kaadhka cod-bixinta**

1. Komishanku waa inuu siiyo Kaadhka Cod-bixinta muwaadin kasta oo isdiiwaangaliyay.
2. Hadii ay suurto gal noqon waydo in muwaadinka la siiyo kaadhka cod-bixinta, duruufo farsamo awgood, Komishanku waxa uu siinaya Shahaado ku meel gaadh ah, inta duruufahaas la xalinaayo.

**Qodobka 56aad**

**Guddiga farsamo ee hawlaha diiwaan-gelinta**

1. Si loo diyaariyo arrimaha farsamo ee hawlaha diiwaangelinta, isku-duwidna loogu sameeyo hawlaha diiwaangelinta waxa uu komishanku magacaabayaa Guddi Farsamo oo ka kala socda Komishanka Doorashooyinka Heer Qaran, Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Xisbi/Ururada Siyaasadda.
2. Awoodaha iyo waajibaadka Guddida Farsamo waxa uu Komishanka Doorashooyinka Qaranku kusoo saarayaa Xeer-hoosaad (Regulations).

**Qoddobka 57aad**

**Gacan ka gaysashada arrimaha nabad-gelyada iyo wacyi-gelinta ee hawsha diiwaangelinta**

Koomishanka Doorashooyinka Qaranka waxa xilliga hawasha diiwaangalinta gacan ka siinaaya dhinaca Nabad-gelyada Ciidamada qaranka JSL iyaga oo u maraya Wasaaradda Arrimaha Gudaha

**Qodobka 58aad**

**Goob-joogayaasha**

Goob-joogayaasha ama Kormeerayaasha Caalamiga iyo Kuwa maxaliga ah ee hubinaya habsami u socodka hawlaha diwaan-gelinta cod-bixiyayaasha, waxaa wasaaradda Arrimaha Gudaha u soo

gudbinaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka, si ay ugu fuduudeyaan ogolaanshaha dal ku galka.

**Qodobka 59aad**

**Soo saaridda xeer-nidaamiyayaasha diiwaangelinta (power to issue regulations)**

Komishanka Doorashooyinku waxa uu awood u leeyahay in uu soo saaro Xeer hoosaad (Regulations), Xeerka Hab-dhaqanka (Code of Conduct) iyo Awaamiir (Directives) aan ka hor imanayn xeerka.

## CUTUBKA AFRAAD
## HABKA DOORASHADA MADAXWEYNAHA IYO KU XIGEENKA MADAXWEYNAHA

**Qodobka 60aad**

**Hanaanka Doorashada Madaxweynaha iyo ku-xigeenka Madaxweynaha**

Habka lagu dooranayo Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha wuxuu ahaanayaa kan ku tilmaaman Qodobka 83aad ee Dastuurka JSL Faqradihiisa 1aad, 2aad, 3aad, iyo 4aad, Waana habka aqlabiyadda hal dheeriga ah (majority system), sida Dastuurku tilmaamay.

**Qodobka 61aad**

**Deebaajiga Madaxweynaha Iyo Ku-Xigeenka Madaxweynaha**

1. Murashaxiinta u tartamaya xilalka Madaxweyne waxa uu bixinayaa deebaaji aan celis lahayn, oo noqonaya **Sl.Sh. 150,000, 000 (Boqol iyo konton Milyan oo Shilin).**
2. Musharax u tartamaya Madaxweyne ku-xigeen Madaxweyne waxa uu bixinayaa deebaaji aan celis lahayn oo noqonaya **Sl.Sh. 100,000, 000 (Boqol Milyan oo Shilin).**

**Qodobka 62aad**

**Shuruudaha Musharaxa Madaxweynaha Iyo Ku-Xigeenka Madaxweynaha**

Waxa Madaxweyne ama Ku-xigeen Madaxweyne loo dooran karaa qofka buuxiya shuruudaha soo socda ee ku tilmaaman Qodobka 82aad ee Dastuurka:-

1. Waa in uu yahay muwaadin u dhashay Somaliland oo muwaadinimo dawlad kale haysan, balse wuu noqon karaa qoxooti dal kale deggan.
2. Waa inuu Muslim yahay, kuna dhaqmaa Diinta lslaamka.
3. Waa inaanay da'diisu ka yaraan afartan sanno.
4. Waa inuu jidh ahaan iyo maskax ahaanba gudan karaa xilkiisa
5. Waa inuu aqoon iyo waayo-aragnimo u leeyahay arrimaha maamulka {mid dawliya iyo mid kaleba}.
6. Waa inuusan dembi maxkamadi ku xukuntay ka gelin Qaranka Somaliland.
7. Waa inuu xaaskiisu yahay Muslim.
8. Waa inuu xog-ogaal u ahaado xaqaa'iqa dalka ka jira, isaga oo joogay ugu yaraan laba sanno ka hor taariikhda doorashada loo cayimay inay qabsoonto
9. Waa inuu hantidiisa diiwaan geliyo.
10. Xubnaha isu taagaya doorashada Madaweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha waa inay ka mid yihiin xisbi diiwaan-gashan ama ansaxsan, soona sharaxay.

## Qodobka 63aad
## Qabashada Liisaska Murashaxiinta

1. Liistooyinka musharixiinta Madaxweynaha & ku xigeenkiisa waa in la geeyo xafiiska Komishanka, ka hor lixda galabnimo maalinta 45aad inta aanay cod-bixintu dhicin.
2. Xisbigu waa inuu Musharixiinta u tartamaya madaxweynaha iyo ku-xigeenka madaxwaynuhu ku soo gudbiyaan muddada ku cayiman faqradda hore sidoo kale waa in ay soo lifaaqaan faah-faahiyaan.
    a) Go'aankii xisbigu ku ansxiyay musharaxnimada madaxweynaha iyo ku-xigeenka
    b) Cadaynta Xafiiska Cashuuraha Berriga ee Wasaarada Maaliyada ee tilmaamaya in ay bixiyeen deebaajigii musharaxnimada.
    c) Qoraal uu Musharax kasta oo la soo xulay ku cadaynayo in uu buuxiyay shuruudihii musharaxnimada isla markaana ay ka go'an tahay in uu noqdo musharax u taagan doorashada Madaxtooyada;
    d) Qoraal lagu cadaynayo heerka waxbarasho iyo shahaadooyinka uu haysto;
    e) Qoraal lagu cadaynayo in aanu jirin Xeer musharaxa ka hor istaagaya in uu u tartamo doorashada madaxtooyada
    f) Bayaan ay soo saareen Madaxda Xisbiga iyo musharixiintu oo ay ku cadaynayaan in ay u hogaansamayaan Xeerarka doorashooyinka iyo Xeerarka Anshaxa ee doorashooyinka la xidhiidha.
    g) Cadayn faah-faahinaysa hantida musharaxiinta u tartamaya doorashada madaxtooyada.
    h) Haddii musharaxu haysto dhalasho ajaanib ah waa in uu soo gudbiyaa caddayn muujinaysa in uu ka noqday dhalashadii ajaanibka ahayd.

## Qodobka 64aad
## Qaabka soo Bandhigida Murashaxiinta

1. Musharaxa isusoo sharraxay Jagada Madaxweynaha ama Ku-xigeenkiisu waxa uu xaq u leeyahay in uu ka tanaasulo, hasayeeshee waa in uu qoraal rasmi ah usoo gudbiyo Xisbigii uu ka sharaxnaa iyo Komishanka Doorashooyinka Qaranka ugu yaraan 30 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.
2. Xisbigii uu marashaxaasi ka sharraxnaa waxa uu soo beddeli karaa oo keliya 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.
3. Haddii mid ka mid ah musharaxiinta Madaxweynaha ama Ku-xigeenkiisa ee Xisbiyada Siyaasaddu uu geeriyoodo kadib marka lasoo gudbiyo liiska murashixiinta, waxa uu xisbiga ay khuseysaa xaq u leeyahay in uu soo beddesho 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.
4. Haddii uu murashaxu geeriyoodo ama is casilo 20-ka maalmood ee ugu danbaysa gudahooda, xisbigaasi xaq uma laha in uu soo badasho. Xaaladaha ku saabsan bannaanaanshaha Jagada Madaxweynaha ama Ku-xigeenkiisa ee ku xusan Qodobbada 86aad, iyo 89aad ee Dastuurka, waxa loo tix-raacayaa Dastuurka.
5. Haddii muddada lagu cayimay Faqradaha 2aad iyo 3aad ee 20ka maalmood ah ay Xisbiyadu ku soo beddeli waayaan Murashaxii ay jagadiisu bannaanaatay sababaha ku xusan farqadaas awgood, magaca murashaxa jagadiisu bannaanaatay ayaa lagu tartamayaa.

## CUTUBKA 5AAD
## DOORASHADA GOLAHA WAKIILLADA

### Qodobka 65aad
### Xaqa ka Qayb Galka Doorashada Golaha Wakiillada.

1. Xisbi kasta oo doonaya in uu ka qaby galo doorashada Golaha Wakiillada, waa inuu 14 Maalmood gudahood ku soo ogaysiiyaa Komishanka inuu helay ogaysiiskii Komishanka ee qabsoomida doorashada.
2. Xisbiyadu waa in ay Komishanka u soo gudbiyaan Xeer nidaamiyayaaasha magacaabista musharaxiinta isla maalinta ay soo gudbinayaan helintaanka ogaysiiska qabsoomida doorashada ee lagu sheegay faqrada 1aad ee Qodobkan.
3. Xeer nidaamiyaasha Xisbiyada ee xulida murashixiinta waa inay waafaqsanaadaan Xeerkan.

### Qodobka 66aad
### Tirada Guud ee Golaha Wakiilada

Golaha Wakiilada Somaliland wuxuu ka kooban yahay 82 xubnood, kuwaas oo lagu dooranayo doorasho guud, si xor ah iyo cod-bixin qarsoodiya, sida uu tilmaamayo qodobka 40aad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

### Qodobka 67aad
### Shuruudaha Murashaxa Golaha Wakiillada

Sida uu tilmaamayo Qodobka 41 aad ee Dastuurka qofka isu tagaaya doorashada Golaha Wakiillada waa inuu buuxiyo shuruudahan:-

1. lnuu Muslim yahay, kuna dhaqmaa Diinta lslaamka
2. Inuu Muwaadin yahay, da'diisuna ka yaraan Shan iyo soddon {35 sanno}.
3. Inuu jidh ahaan iyo caqli ahaanba u gudan karo xilkiisa.
4. Inuu leeyahay aqoon dugsi sare ama wax u dhigma ugu hoosayn.
5. Waa lnaanu hore ugu dhicin xukun ciqaabeed oo Kama dambays ah, oo maxkamad horteeda kaga caddaaday shantii sanno ee ugu dambaysay.
6. Inuu yahay xil-kas, akhlaaqdiisa iyo dhaqankiisuna toosan yihiin.
7. Uma bannaana qof shaqaale Dawladdeed ah inuu isu taago doorasho haddaanu mudada xeerku cayimo ka hor shaqo ka tagid codsan, taaso in laga aqblaana waajib tahay.
8. Waa inuu saxeexay qoraal uu shakhsi ahaan ku cadaynaayo musharaxnimadiisa doorashada iyo inuu u hogaansamaayo shuruucda doorashada iyo kuwa anshaxa.
9. Waa in uu bixiyaa deebaajiga musharaxnimo ee ku waajibay
10. Waa in uu yahay cod-bixiye ka diiwaangashan Gobolka uu ka tartamaayo.

### Qodobka 68aad
### Deebaajiga musharixiinta doorashada Golaha Wakiillada

Musharaxiinta u tartamaya xubinimada Golaha Wakiillada waxay bixinayaan deebaaji aan celis lahayn oo dhan SL/sh 40,000,000 (Afart milyan oo shillin) oo lagu bixinaayo xafiiska cashuuraha berriga ee wasaaradda maaliyada.

## Qodobka 69aad
## Habka Xulista Musharaxiinta

1. Xisbiyadu waa in ay murashixiinta u soo xulaan hab laga wada qayb qaato isla markaana daah-furan.
2. Xeer nidaamiyaha xisbiga ee xulista murashixiinta ayaa sheegay habka xulista murashixiinta, qaabka loo raacayo, iyo shuruudaha kale ee la xidhiidha xubinimada xisbiga iyo bixinta lacagaha laga rabo.
3. Xisbi kastaa waa inuu sameeyaa Guddida xulista murashixiinta oo u xil saaran soo xulista murashixiinta xisbiga uga qayb galaya doorashada Golaha Wakiillada.
4. Xubnaha guddida waa in loo soo xulaa si waafaqsan dastuurka xisbiga, waa in ay ka mid ahaadaan xubnaha xisbiga waana in ay leeyihiin aqoon iyo waayo aragnimo ku haboon gudashada hawshan.
5. Shaqaalaha Dawlada, kuwa hay'adaha madax banaan iyo xubnaha ciidamada derejo kasta oo ay leeyihiin, uma bannaana in ay u tartamaan doorashada Golaha Wakiillada, hadii aanay shaqo ka tegistooda soo gudbin Sagaashan maalmood (90 maalmood) ka hor maalinta doorashada, sida lagu sheegay Qodobka 41(7) ee Dastuurka Qaranka.
6. Shaqo ka tegistaa waxaa wajib ah in uu oggolaado, qoraalna ku cadeeyo qofka awoodda u lihi.

## Qodobka 70aad
## Khilaafaadka ka soo Baxa soo Xulida Murashixiinta Golaha Wakiillada.

1. Xisbi kastaa waa in uu sameeyo guddida xalinta khilaafaadka ka soo baxa xulista iyo magacaabista murashixiinta oo u xil saaran ka garnaqa iyo go'aan ka gaadhista khilaafaadka xisbiga dhexdiisa ka dhasha ee la xidhiidha xulista iyo magacaabista murashixiinta u tartamaya doorashada Golaha Wakiillada.
2. Guddida xalinta khilaafaadku waa inay diyaariyaan habka xalinta khilaafaadka una soo gudbiyaan Komishanka.
3. Haddi Murashax ama xubin xisbi ka mid ahi tabasho ka qabo in habka loo soo xulay murashixiinta aanu Xeerkan waafaqsanayn waxa loo noqonayaa Xeer-nidaamiyaha xulista iyo magacaabista murashixiinta, waxaana xalinaysa guddida xalinta khilaafaadka.
4. Guddida xalinta khilaafaadku waa in ay go'aan uga gaadhaan khilaafaadka soo baxa si aan daahid lahayn oo daah-furan, waa in ay dhinacyada fursad u siiyaan in ay tabashadooda qoraal ahaan ama AF ahaan ku soo gudbiyaan.

## Qodobka 71aad
## Xeer-nidaamiyaha iyo Hagaha Xisbiyada ee Xulista iyo Magacaabista Musharaxiinta

1. Xisbi kasta oo doonaya inuu ka qayb galo doorashada Golaha Wakiilladu waa in u diyaariyaa una soo gudbiyaa Komishanka Xeer-nidaamiyihiisa xulista iyo magacaabista murashixiinta 14 casho gudahood oo ka bilaabanta maalinta uu helay ogaysiiska shaacinta qabsoomida doorashada Golaha Wakiillada.
2. Xeer-nidaamiyaha ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan waa in ay ku caddaadaan:-
   a) Habka Xisbigu u magacaabayo murashixiintiisa;
   b) Habka lagu soo xulayo murashaxiinta;
   c) Habka la raacayo maalinta magacaabista;

d) Awoodaha guddida xulista iyo magacaabista murashixiinta
e) Habka xalinta khilaafaadka la xidhiidha xulista iyo magacaabista murashixiinta;
f) Wixii awaamiir ah ee Komiishanku bixiyo si waafaqsan Xeerarka dalka.

3. Komishanku waa inuu hubiyaa in xeer-nidaamiyaha xisbiyadu soo gudbiyeen buuxiyay shuruudaha uu qodobkani tilmaamaya, waxaanu Komishanku ku amri karaa xisbiyada in ay wax ka soo badalaan si loo xaqiijiyo in aanu ka hor imanan Dastuurka dalka iyo Xeerkan.

## Qodobka 72aad

## U soo Gudbinta Komishanka liiska Musharixiinta Doorashada Golaha Wakiilada

1. Xisbi kastaa waa in uu liiska murashixiintiisa heer gobol u soo gudbiyaa Komishanka ugu yaraan ka hor 60 maalmood maalinta loo cayimay qabsoomida doorashada Golaha Wakiillada.
2. Liiska Murashixiinta ee ku xusan qodobkan faqradiisa 1aad wuxuu noqonayaa liiska Furan waxaana ahmiyad loo kala siinayaa siday u kala horeeyaan...
3. Liiska Musharixiinta ee ku xusan farqada 1aad waa in ay la socdaan:-
   a) Qoraal ay saxeexeen guddida xisbiga ugu xil saaran soo xulista iyo magacaabista musharixiinta oo ay ku cadahay in xulista iyo magacaabista murashixiintu u dhacday sida Xeerkan jideeyay;
   b) Cadaynta Xafiiska Cashuuraha Berriga ee Wasaarada Maaliyada ee inay dhammaan murashixiintu bixiyeen deebaajiga musharaxnimada;
   c) Qoraal uu Musharax kasta oo la soo xulay ku cadaynayo in uu buuxiyay shuruudihii musharaxnimada ka go’an tahay in uu noqdo musharax u taagan doorashada Golaha Wakiilada;
   d) Qoraal lagu cadaynayo heerka waxbarasho iyo shahaadooyinka uu haysto;
   e) Qoraal lagu cadaynayo in aanu jirin Xeer musharaxa ka hor istaagaya in uu u tartamo doorashada Golaha Wakiilada, Lana socdaan cadaymaha hayadaha awoodaha u leh.
   f) Cadayn faah-faahinaysa hantida musharaxiinta doorashada Golaha Wakiillada
   g) Bayaan ay soo saareen Madaxda Xisbiga iyo musharixiintu oo ay ku cadaynayaan in ay u hogaansamayaan Xeerarka doorashooyinka iyo Xeerarka Anshaxa ee doorashooyinka la xidhiidha.
4. Muran kasta oo ka dhasha xeraynta ama bandhigga liis murashaxiin oo ka soo baxa xisbiga gudahiisa waxa go'aan ka gaadhaya guddida Xalinta Khilaafadka ee xisbiga arrintu khusayso.
5. Musharaxa isu soo sharraxay Golaha Wakiillada waxa uu xaq u leeyahay in uu ka tanaasulo, Hasayeeshee waa in uu qoraal rasmi ah usoo gudbiyo Xisbigii uu ka sharaxnaa iyo Komishanka Doorashooyinka Qaranka ugu yaraan 40 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.
6. Xisbigii uu masharaxaasi ka sharraxnaa waxa uu soo beddeli karaa oo keliya 30 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.
7. Haddii mid ka mid ah murashixiinta Golaha Wakiillada ee Xisbiyada Siyaasaddu uu geeriyoodo ama is-casilo kadib marka lasoo gudbiyo liiska murashixiinta, waxa uu xisbiga ay khuseysaa xaq u leeyahay in uu soo beddesho 30 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.
8. Haddii uu murashaxu geeriyoodo ama is-casilo 30 maalmood ee ugu danbaysa gudahooda, xisbigaasi xaq uma laha in uu soo badasho.

## Qobodka 73aad

## Hubinta iyo Soo badalida Musharaxiinta doorashada Golaha Wakiillada ee buuxin waya shuuradaha xeerarka ama is-casila

1. Hogaanka Xisbiga waxa ku waajib ah in ay si wadaniyad leh u baadhaan musharaxiinta marka ay xulayaan. Iyagoo hubinaya inay buuxinayaan shuruudaha aasaasiga ah ee xeerku jideeyay, isla markaana masuuliyadda ay u tartamayaan si haboon u gudan karaan, magac iyo milgona u soo jiidi karaan xisbiga iyo qaranka.
2. Komishanku waa inay dhinacooda si madax banaan qof qof ugu hubiyaan murasharaxiinta loo soo gudbiyay inay shuruudaha buuxinayaan. Hadii komishanku ku qanco in xubin ama xubno liiska ka mid ahi aanay buuxin shardi ama shuruudaha, waxa ay mudo sadex maalmood gudahood ah ku ogeysiinayaan xisbigii u soo gudbiyay inuu muddo Shan Maalmod ah oo ka bilaabmaysa marka ay helaan qoraalka komishanka, ku soo dhameystiro shuruudaha dhiman ama badalkiisa ku keeno.
3. Hadii uu xisbi ku guuldaraysto in uu soo buuxiyo shuruudihii lagu soo celiyay musharaxiinta buuxin waayay shuruudaha xeerka ama badalkiisa keeni wayo, waxa uu dorashada ku galayaa inta buuxisay shuruudaha oo kaliya.

## Qodobka 74aad

## Shaacinta liistada Kama danbeysta ah murashiinta Doorashada Golaha Wakiillada iyo Astamahooda

1. Astaamaha liisaska musharaxiinta ee xisbiyada ka muuqdaa waa inay kala duwanaadaan marka lasoo bandhigayo.
2. Xisbina waa in aanuu isticmaalin astaan xisbi kale loo asteeyay.
3. Astaantu waa inay ahaato mid gaar ah oo muujinaysa sumadda aqoonsiga xisbiga, hasayeeshee waa in aanay ka muuqan calaamado dawladeed, qabyaaladeed ama astaan diimeed.
4. Komishanka waa inay daabacaan liisaska musharaxiinta gobol kasta, iyagoo si bayaan ah u kala muujinaya astaamaha xisbiyadooda.
5. Komishanku goob kasta oo cod-bixineed waa inay gaadhsiiyaan nuqulada liisaska musharaxiinta gobolka si loogu dhajiyo dhamaan goobaha cod-bixinta gobolkaas.
6. Komishanka iyo xafiisyadiisu waa inay 30 maalmood kahor taariikhda cod-bixinta si rasmi ah u faafiyaan liisaska musharaxiinta xisbiyada, iyaga oo adeegsanaya warbaahinta kala duwan; isla markaana ku dhawaqaaqaya sifo kasta oo ay ku xaqiijiyaan in shacbigu meel kaska oo ay ku sugan yihiin ay si haqab la’aan ah uga Bogan karaan liisaska musharaxiinta tartamaya.

## Qodobka 75aad

## Habka Doorashada

1. Doorashada Golaha Wakiilladu waxay ku salaysan tahay habka saami qaybsiga oo ku salaysan liistada furan ee musharaxiinta ee ay Xisbiyadu soo gudbiyaan si ay ugaga qayb-galaan tarantanta doorashada Golaha Wakiillada.
2. Doorashada Golaha Wakiillada, Gobol kasta waxa loo tixgalinayaa Gobol doorasho.
3. Kuraasta Gobolada loo qoondeeyay waxa loogu kala guulaysanayaa sida ay ugu kula badan yihiin saamiga codadka ay Xisbiyadu gobolka ka heleen. Murashixiintuna siday u kala cod badan yihiin.

4. Habka codayntu waxay ku xidhnaanaysaa qaabka saami qaybsiga ee liiska furan.

**Qodobka 76aad**
**Samaynta Goobo Doorasho**

1. Marka la qabanaayo Doorashada Golaha Wakiillada ee Jamhuuriyada Somaliland, sida uu dhigayo Qodobka 109 ee Dastuurka Dalka waxaa dalka loo qaybinayaa Gobolo doorasho, kuwaas oo yeelanaya xuduudihii lixdii Degmo ee jiray 26 June 1960 oo haddana Gobolo ah.
2. Komishanka Qaranku, wuxuu aasaasayaa Goobo doorasho ka hor maalinta doorashada.
3. Komishanku wuxuu ku dhawaaqayaa goobaha uu u cayimay goobo doorasho, wuxuu ogaysinayaa xisbiyada siyaasada magacyada Goobaha doorasho ee la Cayimay.
4. Marka uu samaynayo Goobo doorasho, Komishanku wuxuu kala tashan karaa daneeyayaasha doorashada sida Xisbiyada Siyaasada, Wasiirka Arrimaha Guddaha iyo Badhasaabada Gobolada.

**Qodobka 77aad**
**Habka Qaybinta Kuraasta**

1. Iyadoo mudnaanta la siinayo danta Qaranka si doorashadu u qabsoonto, qaybinta Kuraasta Golaha Wakiilada ee Gobol doorasho waxay noqonaysaa sidan soo socota:

| | | |
|---|---|---|
| a) | Gobolka Maroodijeex | 20 kursi |
| b) | Gobolka Togdheer | 15 kursi |
| c) | Gobolka Awdal | 13 kursi |
| d) | Gobolka Sanaag | 12 kursi |
| e) | Gobolka Sool | 12 kursi |
| f) | Gobolka Saaxil | 10 kursi |

2. Marka la dhamaystiro cod-bixinta iyo tirinta codadka guud ee ansaxay, Tirada guud ee codadka waxa loo qaybinayaa tirada kuraasta ee gobolka loo qoondeeyay, waxa la xadidayaa tirada kursi kasta oo lagu tartamayo lagu helayo, intaa ka dib waxa la cayimayaa tirada kuraasta lagu tartamayo xisbi kastaa inta uu ka helay.
3. Tirada Xisbigu gobolka ka helay waxa loo qaybinayaa tirada kursi lagu heli karo si loo soo saaro kuraasta uu xisbi kastaa gobolka ka helay.
4. Haddii, ay soo hadhaan codad ka yar in ay buuxiyaan tirada codadka looga baahan yahay in lagu helo kuraasta lagu tartamay ee ah Gobolkaa, marka si gaar ah loo kala tiriyo, waxay Xisbiyadu u qaybsanayaan kuraasta hadhay sida ay ugu kala badan yihiin codadka hadhaaga ah ee kuraas iyo Gobol kasta goonidooda.
5. Marka hawsha lagu sheegay faqradaha (2& 3) la dhamaystiro,Kuraasta uu ka helay xisbi kuraasta loo qoondeeyay Gobol gaar ah, waxaa loogu qaybinayaa musharaxiinta xisbigaa sida ay ugu kala cod badan yihiin

**Qodobka 78ad**
**Musharaxiinta Doorashada ku Guul-Daraysta**

1. Musharaxiinta liisaska xisbiyada ee kuraasi waaya waxay noqonayaan musharixiin kayd ah. Waxayna xaq u leeyiin inay buuxiyaan marka ay jago baneeyaan mudanayaasha xisbigooda kaga jira golaha wakiilada.
2. Marka ay bannaanato xubin/xubno ka mid ah Golaha Wakiilada si waafaqsan asbaabaha ku xusan Qodobka 50aad ee Dastuurka, Shir-gudoonka Goluhuna sidaa caddeeyo, waxa Komishanku bedelkii xubinta/xubnaha bannaan ku buuxinayaa musharaxiinta kaydka xisbiga ay ka soo jeedeen kuwa banneeyay, muddo aan laba todobaad ka badnayn. Waxana loo raacayaa sida ay ku kala cod badnaayeen.
3. Hadii laba murashax ay helaan coddad isku mid ah waxa u kala horaynayaan siday ugu kala horeeyaan liiska murashaxiinta xisbi soo gudbiyeen.
4. Hadii xisbi kamid ah xisbiyada kuraasta ku leh Golaha Wakiilada uu dhamaado kaydkiisu waxa buuxinaya xubinta ugu codka badan kaydka labada xisbi ee kale.
5. Hadii xubin kayd ah ka baxo xisbigii uu ka tirsana waxa uu waayay xuquuqdii kaydka ee buuxinta kuraasta bannaanata, waxaana buuxinaya xubinta ku cod xigta liistada kaydka xisbiga uu ka baxay.

## CUTUBKA LIXAAD
## QAYBTA: 1AAD.
## DOORASHADA GOLAYAASHA DEEGAANKA.

**Qodobka 79aad**
**Tirada Golayaasha Degaanada**

Tirada Golayaasha Degaanada ee la soo dooranayaa waxa loo raacaya Xeerka Is-maamulka Gobolada iyo Degmooyinka Xeer Lr.23/2019.

**Qodobka 80aad**
**Habka Doorashoyinka Deegaaanada**

1. Habka doorashooyinka degaanada wuxuu noqonayaa habka isu qiyaasidda saamiyada kuraasta iyo tirada codadka uu xisbi/urur ka helo gobol ama degmo (proportional representative system).
2. Doorashada Golayaasha degaanada xisbi/urur kastaaba wuxuu soo bandhigayaa liiska dadka uu u doonayo in degmada looga doorto
3. Xisbi/Urur kasta oo doonaaya in uu ka qaybgalo dorashada Goleyaasha Deegaanka, waa in uu Komishanka Doorashooyinku Qaranka u gudbiyo liiska musharixinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo deegmaysan, kaas oo ku sar-go’an tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah oo ku salaysan habka liistada Furan (open list system) Waxa Komishanka Doorashooyinka Qaranku uu siin doonaa musharax kasta astaan u gaar ah.
4. Liisaska doorashada Golayaasha Deegaanka ee ah liiska furan, magacyada taxanaha ah ee liisku wax saameyn sharci ah kuma leh natiijada doorashada. Kuraasta Degmo-doorasho, waxaa Axsaabtu/Ururadu ku kala helayaan habka saami qaybsiga (Proportional Representation System)

ee kuraasida iyo codadka Xisbi/Urur kasta ka helo Degmadaas, iyadoo uu Xisbigu/Ururkuna ay musharaxiintiisu ku kala guulaysanayaan sida ay u kala cod badan yihiin.

5. Tirada kuraasida uu helayo liis kasta oo ah murashaxiinta ka qaybgalaya doorashada Golayaasha degaanka waxa loo xisaabayaa qaabka qiyaasta saamiga kuraasta iyo codadka (proportional representative list system).
6. Degaamada aanu tartan ka jirin ee la soo bandhigo doorasho deegaanka liis keliya, cod-bixin laga samayn maayo, waxana la qaadanayaa dadka loo soo magacaabay Degaanadaas, iyadoo ku jaan go'an tiradii degmada laga doonayay, waxana loo raacayaa sida loo soo kala horaysiiyey.

**<u>Qodobka 81aad</u>**
**<u>Shuruudaha Murashaxa Golaha Degaanka</u>**

1. Waa inuu yahay muwaadin u dhashay Jamhuuriyadda Somaliland.
2. Waa inuu si rasmi ah u degan yahay degmada uu iska sharaxayo.
3. Waa inuu Muslim yahay kuna dhaqmaa diinta Islaamka.
4. Qofka isku taagaya doorashada Golayaasha Deegaanka waa inuu/aanay da'diisu/deedu ka yaraan 30 Sanno jir.
5. Waa inuu ku sifoobay xilkas, dhaqan toosan bulshada dhexdeeda.
6. Waa in aanu ku dhicin xukun ciqaabeed oo maxkamad horteed kaga cadaadey 5tii sanno ee u dambeeyay.
7. Musharixiinta Degmooyinka Darajada (A) Waa inuu leeyahay aqoon/waxbarasho gaadhsiisan darajada koowaad ee heer jaamacadeed oo la aqoonsanyahay, iyo waayo aragnimo shaqo oo dhan ugu yaraan 5 sannadood, oo Caydaymahooda wata.
8. Musharixiinta Degmooyinka Darajooyinka (B & C) Waa inuu leeyahay aqoon dugsi sare, iyo waayo aragnimo shaqo oo ugu yaraan 3 sanno ah.
9. Waa inuu yahay cashuur bixiye ka yahay degmada uu ka sharaxan yahay 5tii sanno ee u dambaysay.
10. Waa in uu hanti mood, nool ama midkood ku leeyahay degmada uu ka sharaxan yahay.
11. Waa inuu dhaqaale ahaan isku filan yahay.
12. Musharax kasta oo isku taagaya doorasho gole deegaan waa inu yahay cod-bixiye ka diiwaangashan degmada uu ka tartamaayo.

**<u>Qodobka 82aad</u>**
**<u>Ururada u Gudbi Waaya Xisbi</u>**

1. Murashixiinta Ururada ku guulaysan waaya inay u gudbaan xisbi, doorashada Golayaasha degaanka ee degmooyinka ee iyagu ku guulaysta kuraas, waxa ku waajib ah inay ku biiraan saddexda xisbi ee la ansixiyey midkood mudo dhan lix bilood (6 bilood) gudohood oo ka bilaabmaysa maalinta lagu dhawaaqo natiijada doorashada isagoo qoraal rasmi ah ugu soo gudbinaaya komishanka doorashooyinka.
2. Ururadii/xisbi u gudbi waayay xisbi waxa u bannaan in ay ku biiraan sadexda xisbi ee loo aqoonsaday xisbiyo qaran. Waxaana loo raacaya Xeerka Nidaamka Ururada iyo Asxaabta Siyaasadda Xeer Lr. 14/2011.

## **Qodobka 83aad**

## **Deebaajiga Musharaxiinta Doorashada Golayaasha Deegaanka**

Musharaxiinta u tartamaya xilalka waxay bixinayaan midkiiba deebaaji aan celis lahayn, oo kala noqonaya sidan: -

a) SL.sh. **15.000.000** (Shan iyo toban milyan oo shilin) Mushariixnta u tartamaya Dagmooyinka Darajada A.
b) SL.sh. **7.000.000** (Todoba milyan oo shilin) Mushariixnta u tartamaya Dagmooyinka darajada B.
c) Sl.Sh **4,000,000** (Afar Milyan oo Shilin) Mushariixnta u tartamaya Dagmooyinka C.

## **Qodobka 84aad**

## **Qaabka soo Bandhigida Musharaxiinta**

1. Liiska Musharixiinta Golayaasha degaanadana waa in la geeyo xafiisyada doorashada ee degmooyinka ka hor 6-da galabnimo maalinta 75aad intaanay cod-bixintu dhicin, iyadoo ay dhan yihiin lifaaqyadiisa ku tilmaaman Xeerka.
2. Liiska murashaxiinta golaha degaanka waxaa soo bandhigaya Guddiga degmada ee Ururka/xisbiga, waana in si cad loo soo muujiyaa,
   a) magaca murashaxa oo afaran,
   b) meesha uu ku dhashay iyo sannadkii uu dhashay;
   c) haddii ay jiraan dad isku magacyo ah waa in la sheego naanaysta (haddii ay jirto),
   d) Waxa kale oo la soo muujinayaa degmada laga sharaxay.
3. Liisaska murashaxiinta ururka/xisbiga waxa kale oo la soo raacinayaa: -
   a) Caddeynta shaqo ka tegidda ee ku xusan Qodobka 9aad ee Xeerkan.
   b) 4 koobi oo saxeexan oo ay si wanaagsan uga muuqato astaantii iyo shaanbadii ururku/xisbigu.
   c) Caddeyn uu bixiyey musharax kasta oo uu ku muujiyey inuu ogol yahay musharaxnimada iyo inuu buuxiyey shuruudaha ku xidhan
   d) Rasiidhada bixinta deebaajiga murashaxnimo ee Wasaaradda Maaliyadda ee ku xusan Qodobka 83aad ee Xeerkan.
4. Muran kasta oo ka dhasha xeraynta ama bandhigga liis murashaxiin oo ka soo baxa xisbi/urur gudahiisa waxa go'aan ka gaadhaya guddida Xalinta Khilaafadka ee xisbiga/ururka arrintu khusayso.
5. Musharaxa isu soo sharraxay Golayaasha Deegaanku waxa uu xaq u leeyahay in uu ka tanaasulo, Hasayeeshee waa in uu qoraal rasmi ah usoo gudbiyo Xisbigii uu ka sharaxnaa iyo Komishanka Doorashooyinka Qaranka ugu yaraan 40 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.
6. Xisbigii uu masharaxaasi ka sharraxnaa waxa uu soo beddeli karaa oo keliya 30 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.
7. Haddii mid ka mid ah murashixiinta Golayaasha Deegaanka ee Xisbiyadu/ururada Siyaasaddu uu geeriyoodo kadib marka lasoo gudbiyo liiska murashixiinta, waxa uu xisbiga ay khuseysaa xaq u leeyahay in uu soo beddesho 30 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.
8. Xisbi/urur ma soo badelan karo musharixiinta degaanka 30 malmood ee doorashada ka horeeya

**Qodobka 85aad**
**Shaacinta liistada Kama danbeysta ah musharixiinta Doorashada Golayaasha Deegaanka iyo Astamahooda**

1. Astaamaha liisaska musharaxiinta ee xisbiyada/ururada ka muuqdaa waa inay kala duwanaadaan marka lasoo bandhigayo.
2. Xisbina waa in aanuu isticmaalin astaan uu xisbi kale hore usoo isticmaalay doorasho.
3. Astaantu waa inay ahaato mid gaar ah oo muujinaysa sumadda aqoonsiga xisbiga, hasayeeshee waa in aanay ka muuqan calaamado dawladeed, qabyaaladeed ama astaan diimeed.
4. Komishanka waa inay daabacaan liisaska musharaxiinta Dagmo kasta iyagoo si bayaan ah u kala muujinaya astaamaha xisbiyadooda.
5. Komishanku goob kasta oo cod-bixineed waa inay gaadhsiiyaan nuqulada liisaska musharaxiinta degmo si loogu dhajiyo dhamaan goobaha cod-bixinta Dagmooyinkaas.
6. Komishanka iyo xafiisyadiisu waa inay 40 maalmood kahor taariikhda cod-bixinta si rasmi ah u faafiyaan liisaska musharaxiinta xisbiyada/ururada iyaga oo adeegsanaya warbaahinta kala duwan; isla markaana ku dhawaaqaya sifo kasta oo ay ku xaqiijiyaan in shacbigu meel kasta oo ay ku sugan yihiin ay si haqab la'aan ah uga bogan karaan liisaska musharaxiinta tartamaya.

**Qodobka 86aad**
**Xulista iyo Xalinta Khilaafadka Musharixiinta Golayaasha Deegaanka**

Dhamaan arrimaha la xidhiidha xulista iyo xalinta khilafaadka ka dhasha magacaabista musharixiinta Golayaasha degaanka waxa loo raacayaa sida ay dhigayaan Qodobada 70aad, 71aad, 72aad, 73aad iyo 74aad ee Xeerkan.

**Qodobka 87aad**
**Musharaxiinta Doorashada ku Guul-Daraysta**

1. Musharaxiinta liisaska xisbiyada/ururada ee kuraasi waaya waxay noqonayaan musharixiin kayd ah. Waxayna xaq u leeyiin inay buuxiyaan marka ay jago baneeyaan mudanayaasha xisbigooda kaga jira golayaasha deegaanka.
2. Marka ay banaanato xubin/xubo ka mid ah Gole deegaan si waafaqsan asbaabaha ay sheegen xeerarka khuseeya Golayaasha deegaanku Gudoomiyaha Golaha Deegaankuna sidaa caddeeyo, waxa Komishanku bedelkii xubinta/xubnaha banaan ku buuxinayaa musharaxiinta kaydka xisbiga/ururka ay ka soo jeedeen kuwa banneeyay, muddo aan laba todobaad ka badnayn. Waxana loo raacayaa sida ay ku kala cod badnaayeen
3. Hadii laba musharax helaan codad isku mid ah, waxay u kala horaynayaan siday ugu kala horeeyan liiska musharixiinta xisbiga/ururka soo gudbiyey.
4. Hadii xisbi/urur kamid ah xisbiga kuraasta ku leh golaha deegaanku dhamaado waxa buuxinaaya xubinta ugu codka badan kaydka labada xisbi/urur ee kale
5. Hadii xubin kayd ah ka baxo xisbigii/ururkii uu ka tirsanaa waxa uu waayay xuquuqdi kaydka xisbiga/ururka uu ka baxay, jagadan bannaanatan waxa buuxinaya xubinta kaydka ee ku cod xigay.
6. Xubnaha kaydka xisbigu/ururka kama bixi karaan xisbigooda marka laga reebo (6) lixda bilood ee ugu danbaysa.

## CUTUBKA TODOBAAD
## HANAANKA DOORASHOOYINAKA (ELECTION PROCEDURES)
## QAYBTA 1AAD
## OLALAHA DOORASHOOYINKA

### Qodobka 88aad
### Bilowga iyo Dhamaadka Ololaha Doorashada

1. Ololaha doorashooyinku wuxuu bilaabmayaa marka Komishanku ku dhawaaqo ka hor maalinta cod-bixinta, waxaanu dhamaanayaa 48 saac ka hor taariikhda la qabanayo cod-bixinta.
2. Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa go'aaminaya muddada uu socon doono ololaha doorashooyinku iyaga oo qiimaynaya xaalada markaa taagan, waxana ku waajib ah in ay siiyaan xisbiyada/ururada tartamaya tiro maalmo ah oo is- le'eg.
3. Jedwalka ollolaha doorashada waxaa soo saaraya Komishanka Doorashooyinka, iyagoo ku saleynayana nooca doorashadu hadba tahay.

### Qodobka 89aad
### Qabashada Shirarka & Banaan-baxyada

**1.** Komishanka Doorashooyinka Qaranku waxa uu diyaarinayaa soona saarayaa shaxda isku-soo-baxyada iyo dhoollo-tusyada qorshaysan ee Xisbiyada/Ururadda loogu qoondeeyey tiro maalmo ah oo is-le'eg.
**2.** Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Guddoomiyayaasha Gobollada iyo Degmooyinka waxaa waajib ku ah in ay ku dhaqmaan shaxda ay soo saareen Komishanka Doorashooyinku xiliga ololaha doorashada.
**3.** Magaalo/tuulo kasta waxa bannaan bax ka samayn Kara hal xisbi/urur maalintiiba.

### Qodobka 90aad
### Muuqaalka Boodhadhka

1. Muuqaalka boodhadhka iyo waraaqaha dacaayadaha ololaha doorashada iyo fariimaha ololaha doorashada ee xisbi/urur/murashax waxaa ogolaanaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka isla markaana joojinaaya haddii ay ka soo horjeedaan Xeerarka iyo Anshaxa Guud, mana jirto waxa cashuur ah oo laga bixinayaa arrintaas.
2. Lama Oggola in boodhadhka iyo waraaqaha ololaha doorashooyinka lagu dhejiyo masaajidada, xafiisyada & gaadiidka dawladda, xarumaha diblomaasiyiinta, xafiisyada Komishanka Doorashooyinka Qaranka & ururada caalamiga ah, urrurada bulshada, goobaha wax barashada iwm.

### Qodobka 91aad
### Hub iyo Lebbis Ciidannimo

Shirarka iyo bannaan-baxyada ololaha doorashooyinka waxa ka reebban in loo qaato hub iyo lebbis ciidan ama wax u eeg.

**Qodobka 92aad**
**Hawlaha Olalaha**

1. Hawlaha ololaha waxa ku jira:
    a. Banaanbaxyo
    b. Isu soo baxyo laysugu soo baxo goobaha dadwaynaha
    c. Isticmaalka warbaahinta sida xayaysiisyo, qoraalo, sawiro iyo isticmaalka baraha bulshada..
    d. Qaybinta qalabka ololaha.
    e. Iyo hawl kasta oo kale xisbi ama murashax ugu talo galay inuu taageerayaal ku soo jiito
    f. Samaynta sahano ( survey) olalaha la xidhiidha;
    g. Kulamo laysugu yimaado goobaha shirarka

2. Murashax kasta, xisbi/urur kasta iyo wakiil xisbi/urur kasta, waxay xaq u leeyihiin in ay ka ololeeyaan goobaha layskugu yimaado si ay taageero u kasbadaan muddada ololaha doorashadu socdo marka laga reebo goobaha xeerku ka reebay.
3. Komishanku wuxuu hor istaagi karaa qabashada isu soo bax qorshaysnaa haddii uu ku qanco in isu soo baxaasi khatar ku yahay amniga magaalada.
4. Komishanku waa inuu sababeeyaa is hortaaga ku cad Qodobkan faqradiisa 3aad.
5. Komishanku si qaldan uma adeegsan karo awooda is hortaaga ee Qodobkani jideeyay.
6. Haddii xisbi/uru tabasho ka qabo macquulnimada ama sharcinimada go'aan hor istaag oo Komishanku gaadhay wuxuu dib u eegis ka dalban karaa Maxkamada awood u leh in ay ayiddo ama wax ka bedesho go'aanka Komishanka.
7. Ciidamada Boolisku waa in ay sugaan amniga iyo nabadgalyada isu soo baxyada la xidhiidha ololaha doorashada.

## QAYBTA 2aad
## DHAQAALAHA OLOLAHA

**Qosobka 93aad**
**Nidaaminta Dhaqaalaha Ololaha Doorashada**

1. Wakhtiga la xadiday waxa loola jeeda wakhti aan ka yarayn 120 maalmood ka hor wakhtiga doorashada la qabanayo oo Komishanku ku faafiyo faafinta rasmiga laguna xadido kharashaadka doorashada la xidhiidha.
2. Kharashaadka Doorashooyinka waxa loola jeeda kharashaadka xisbiyada/ururada iyo murashixiintu u galaan doorashada si macquul ah, kharash doorasho oo loo isticmaalay ololaha doorasho ee xisbi ama musharax si taageero loo kasbado, ama Kharash loo isticmaalay ololaha doorashooyinka alaab ahaan ama adeeg ahaan; kharash gaarka ah ee murashixiinta iyo madaxda xisbiga; iyo kharash kasta oo la siiyo Hanti dhowre murashax ama kharash ku baxay dib u tirinta codad dib loo tiriyay.
3. Dadka igman waxa ku jira kuwa ku xusan Qodobka 95aad ee Xeerkan

**Qodobka 94aad**
**Reebbanaanta Isticmaalka Hantida Danta Guud**

1. Qofna, haddii aanu ahayn muwaadin Somaliland u dhashay ama qof si rasmi u Dagan, uma bannaana inuu dhaqaale ama qaadhaan siiyo xisbi ama urur siyaasadeed ama murashax u tartamaya doorasho.
2. Xisbiyada/Uruda iyo Murashixiintu toona uma isticmaali karaan hantida danta guud arrimaha ololaha doorashooyinka.
3. Hantida danta Guud waxa ololaha loo isticmaali karaa oo kaliya haddii –

    a. Dhaqaale gaar ah oo si isleeg loogu qoondeeyo Xisbiyada/Ururada Siyaasada.
    b. Warbaahinta Qaranka ee Dawladu maamusho marka la dajiyo xeer nidaamiyaha hagaya isla markaana Xisbiyada Qaranka/Ururada siyaasada si isleeg loogu ogolaado adeegsiga warbaahinta Qaranka.

4. Madaxda Dawladu hantida danta guud uma isticmaali karaan arrimaha ololaha doorashooyinka.
5. Madaxda Dawlada waxa ku waajib ah in ay Komishanka kala shaqeeyaan in aan sinaba hantida danta guud loogu isticmaalin ololaha doorashooyinka iyo fulinta Qodobkan.

**Qodobka 95aad**
**Cidda Awoodda u leh Qaadhaan Ururinta**

1. Qaadhaanka Ololaha waxa qaban Kara ama kharash garayn kara cid Xisbigu/ururku ama musharaxu u igmaday oo kaliya.
2. Qofna qaadhaan ma qaadi karo ama ma isticmaali karo haddii aan loo igman sida Qodobkan ku cad.
3. Xisbiyadu/ururadu waa in ay ka diiwaangaliyaan Komishanka cidda u igman ururinta qaadhaanka iyo isticmaalkiisaba.
4. Xisbiyadu/ururadu waa in ay ka furtaan Baanka Dhexe ee JSL Sunduuq xisaabeedka ololaha doorashooyinka kaas oo ay faahfaahintiisa siinayaan Komishanka.
5. Xisbiyada/ururadu Siyaasadu waa in diyaariyaan hage tilmaamaya siday qodobkan u hawl galinayaan.

**Qodobka 96aad**
**Meelaha uu ka Imanayo Dhaqaalaha Ololaha Doorashadu**

1. Meelaha banaan in dhaqaale ololaha laga helo waxa ka mid ah:

    a) Qaadhaanka xubinimada xisbiga/ururka ee ay bixiyaan xubnaha xisbigu/ururku;
    b) Dhaqaalaha uu xisbigu/ururku ka qaado xubnaha xisbiga iyo murashixiintiisa;
    c) Qaadhaan Sharci ah oo Xeerkan ogol yahay;

2. Qaadhaanka sharciga ah waxa ka mid ah:

    a) Qaadhaanka laga helo ilo sharci ah si waafaqsan Xeerkan;
    b) Dhaqaalaha laga helo xafladaha dhaqaale ururinta ee xisbiyadu/ururadu qabsadaan si ay ololaha ugu isticmaalaan;

c) Agab ama adeeg sharci ah oo aan lacag cadaan ah ahayn loona helay si waafaqsan Xeerkan;
d) Daynta xisbigu u qaato si waafaqsan Xeerkan.
e) Maaliyada ka baxsan Ilaha Dhaqaalaha

**Qodobka 97aad**
**Maaliyada aan ku jirin Ilaha dhaqaalaha ee Ololaha**

1. Hantida xisbigu leeyahay sida agabka iyo adeegyada lagu dari maayo ilaha dhaqaale oo loo isticmaalayo ololaha doorashada qaybna ka noqon maayaan wadarta qaadhaanka xisbiga/ururka haddii ay yihiin:

    a. Agabka iyo adeegyada xisbiga/ururka ee xarunta dhexe iyo xafiisyadiisa gobolada iyo degmooyinka;
    b. Agabka iyo adeegyada gaarka u ah murashax ee uu ugu talo galay ololaha doorashada;
    c. Hantida urur siyaasadeed ku wareejiyay xisbi siyaasadeed oo uu ku biiray.

**Qodobka 98aad**
**Kharashaadka doorashada**:

1. Kharashaadka doorashada waxa ku jira kharash kasta oo loo isticmaalay doorashada oo uu galay murashax ama Xisbi/urur ama cid kale oo awood u leh inuu kharashkaas galo. Kharashaadkaasi intan kuma xadidna waxase ka mid ah:-

    (a) Kharashaadka loo isticmaalo warbaahinta si xisbiga/ururka ama murashaxa ololihiisu bulshada u gaadho;
    (b) Qabashada kulamada iyo isu soo baxyada;
    (c) Daabacaada agabka la xidhiidha doorashada iyo ololaha;
    (d) Kharashaadka maamulka;
    (e) Wixii kharashaad ah ee kale ee Komishanku ku soo saaro Xeer nidaamiye.

**Qodobka 99aad**
**Soo Bandhiga Dhaqaalaha Ololaha**

1. Xisbi/urur kastaa waa in uu Komishanka u gudbiyo warbixin dhamaystiran oo uu ku cad yahay dakhliga soo galay iyo kharashka la galay ololaha doorashada darteed 90 casho gudahood oo ka bilaabanta maalinta doorashda.
2. Komishanka ayaa diyaarinaya xisbiyada/ururadana u gudbinaya habka loo diyaarinayo xisaab celinta xisbiyada/ururada.

## QAYBTA 3AAD
## HANAANKA COD-BIXINTA GOOBAHA DOORASHADA

### Qodobka 100aad
### Qandaraasyada la Xidhiidha Agabka & Adeegyada Doorashooyinka

1. Si looga fogaado musuq maasuq, dan shakhsiyeed iyo eex, Komishanku wuxuu qandaraas loo tartamo ku bixinayaa keenista agabka & adeegyada doorashada lagu fulinayo.
2. Komishanku wuxuu heshiis mudaysan oo faahfaahsan la gelayaa tartamaha guulaysta, heshiiskaas oo lagu caddaynayo waqtiga keenista, qaabka keenista, qalabka ama agabka doorashada iyo habka lacag bixinta.
3. Xubnaha Komishanka, qoysaskooda ama ganacsigooda iyo dhammaan shaqaalaha Komishanka, qoysaskooda iyo ganacsiyadooda midna lama siin karo qarandaraasyada uu Komishanku bixiyo, umana bannaana inay sinaba uga faaiidaystaan iyagoo adeegsanaya awoodahooda shaqo.

### Qodobka 101aad
### Qalabka Goobta Doorashooyinka

1. Komishanka Qaranka ee doorashooyinku waa inay goob cod-bixineed kasta u diyaarisaa Agabka cod-bixinta oo dhamaystiran.
2. Komishanku waa inay xafiiska dhexe ee doorasho iyo degmo/gobol kasta u diyaarisaa Qalabka loo bahan yahay.
3. Qalabka xafiis kasta oo doorasho waa in lagu rido saxarad gaar ah. Saxaradda waa in la xidho oo la lingaxo. Komishanku waa inay qalabkaas diraan wakhti ku haboon iyadoo la socdaan sanaadiiqdii codka lagu ridayey, waxaana loo dirayaa xafiisyada doorashada degmada/gobolka oo u sii gudbinaya goobaha cod- bixinta.
4. Komishanku wuxuu tirada waraaqaha cod-bixinta ee goobta cod-bixinta ku jaan-goynayaa tirada cod-bixiyayaasha goobta cod-bixinta ee ku cad liiska rasmiga ah ee cod-bixiyayaasha goobtaas cod-bixineed oo lagu daray tirada dadka ka hawlgelaya goobta cod- bixinta oo ka kooban hawlwadeennada xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiilada xisbiyada/ururada ee goobta cod- bixinta iyo ciidanka booliska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod- bixinta.
5. Komishanka Doorashooyinka Qaranku isaga oo qiimeeyanaya baahida xafiisyada gobolada, degmooyinka iyo goobaha cod-bixinta, waxa uu awood u leeyahay in uu kordhiyo, dhimo, ama qalab cusub oo lagama maarmaan ah ku darro qalabka loo dirayo goobaha doorashooyinka, waana in uu go’aan Komishan kusoo saaraa.
6. Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa xeer-nidaamiye ku soo saari doona agabka looga bahanayo goob kasta oo cod-bixineed iyada oo la eegayo duruufaha doorashada.

### Qodobka 102aad
### Waraaqaha Cod-bixinta

1. Waraaqaha cod-bixinta waa inay ku daabacan yihiin astaamaha ururada/xisbiyada. Astaan kastaa waa inay leedahay meel bannaan oo loogu talagalay inuu cod-bixiyuhu ku muujiyo codkiisa.

2. Komishanka Doorashooyinka ayaa go'aamin doona Astaamaha kale ee ay yeelanayso waraqada cod-bixintu iyo hannaanka loogu muujinayo Astaamaha iyo Magacyada Murashixiinta Doorashooyinka Madaxweynaha, Wakiilada iyo Deeganka.
3. Hadii laba doorasho ama wax ka badan mar la wada qabanaayo waraaqaha cod-bixinta waa inay kala midab duwanaadan.

**Qodobka 103aad**
**Habaynta Liisaska Rasmiga ah iyo Goobaha Cod-bixineed**

1. Goob kasta oo cod-bixinta laga dhiibanayaa waa inay lahaato ugu yaraan laba illo-xidh oo yar yar oo loogu talagalay in lala galo calaamadaynta waraaqaha cod-bixinta loona habeeyo in qarsoodi codka loogu dhiibto.
2. Sanaadiiqda cod-bixinta lagu ridayaa waa inay yaaliin meel muuqata ama hareeraha ka xigaan miisaska guddoomiyaha goobta cod-bixinta.
3. Liiska dadka ka diiwaan-gashan isku goob doorasho, waxa ay qoraal ahaan u kala horaynayaan siday xuruuftu u kala horreeyaan iyadoo laga duulayo magacooda 1aad, haddii ay ku kala bixi waayaana magacooda 2aad, haddii ay kaas ku kala bixi waayaana kooda 3aad, haddii ay kaas ka sinmaanna kooda 4aad amaba hanaankii kale ee Komishanka Doorashooyinka Qaranku ku soo saaro xeer-nidaamiye .

**Qodobka 104aad**
**Ogeysiinta Liiska Murashaxiinta**

1. Halka nuqul ee ku xusan Qodobka 74aad iyo 85aad ee Xeerkan waa in lagu dhejiyo meel la wada arki karo oo ka mid ah xafiiska doorashada ama goobta cod-bixinta gudaheeda iyo dibeddeedaba.
2. Nuqulka ogaysiinta ee ku xusan Qodobka 74aad iyon 85aad ee Xeerkan oo Komishanku ka soo sameeyay liiska murashaxiinta oo u kala horeeya sidii loogu soo gudbiyay waa in lagu dhejiyo banaanka xafiisyada doorashada iyo gudaha meel la wada arki karo.

**Qodobka 105aad**
**Qaybinta Qalabka Doorashada**

1. Xafiiska doorashada degmadu waa inuu hubiyo in goob kasta oo cod-bixin ka dhacayso in la geeyo wixii qalab ah ee loo baahan yahay ugu danbayn 12 saacadood ka hor subaxa maalinta cod- bixinta.
2. Komishanku waa inuu geeyo xafiiska doorashada degmada qalabka loogu talagalay cod-bixinta ugu dambayn 4ta galabnimo maalinta ka horaysa cod-bixinta.
3. Goob kasta oo cod-bixineed waa in la siiyo hadii ay haboonato:-
   a. Nuqul muujinaya magacyada hawlwadeenada goobta
   b. Nuqul muujinaya wakiilada ururada/axsaabta ee goob-jooga ahaanaya
   4. Dhamaan wakiilada xisbiyada/ururada, goob-joogayaasha, saxaafada iyo hawlwadeenada Goobaha cod-bixintu waa inay wataan aqoonsiga uu bixiyey Komishanka Doorashooyinka Qaranku.

## QAYBTA 4AAD
## BILOWGA HAWLAHA GOOBTA COD-BIXINTA
### Qodobka 106$^{aad}$
### Xafiiska Goobta Cod-bixinta

1. Guddoomiyaha goobta cod-bixintu markuu helo qalabka ku xusan Qodobka 105aad waa inuu: -
   a. Diyaariyo goobta cod-bixinta xafiiska oo uu Gudoomiye ku-xigeenka, xoghaynta iyo hubiyaha u sheego inay yihiin hawlwadeenadii goobta isla markaana la socodsiiyo sida ay hawsha loo xilsaaray u gudanayaan.
   b. Hubiyo in Wakiilada axsaabta/ururada ee loo soo ogolaaday inay goob-joog ahaadaan inay joogaan.
   c. Markuu hubiyo inay saxaraduhu lingaxan yihiin waa inuu furo saxarada oo hubiyo inay dhan yihiin qalabkii, waana inay goob-joog ahaadaan Hawlwadeenadii goobta iyo wakiiladii ururada/axsaabtu.
   d. Markuu hubiyo isaga iyo hawl-wadeenadiisa iyo wakiiladu in xidhmooyinka ay ku jiraan shaambadda goobta iyo waraaqaha cod-bixintu lingaxan yihiin, waa inuu furo xidhmooyinka oo waraaqaha cod-bixinta la dhaco shaambada goobta, oo si nidaamsan ugu ilaaliyo meel xafidan. Waxaa reebban in uu markaas joogo qof aan ahayn inta goobta ku qoran, Goobjoogayaasha calamiga ah iyo kuwa maxaliga ah waay joogin karan wakhtigan.
   e. Inuu hubiyo in ogeysiinta ay ku qoran yihiin tilmaamaha cod-bixinta iyo liisaska murashaxiintu ku dhegan yihiin meelihii loogu talagalay.
   f. Inuu hubiyo in qalabkii loo baahnaa ee cod-bixinta loogu talagalay loo agaasimay sida xeerku tilmaamayo, si hawsha doorashu si hufan ugu hirgasho.
2. Waa inuu diiwaan-geliyo dhamaan hawlgalka kor ku xusan in la fuliyey.
3. Qoraalka waa inay ku cadaato shaambadda goobta, tirada waraaqaha cod-bixinta ee goobta cod-bixintu heshay.
4. Waa inuu markaa ka saxeexo hawlwadeenada iyo wakiiladaba in wax waliba sidii loogu talagalay yihiin.
5. Markuu hubiyo guddoomiyaha goobta cod-bixintu in hawshaasi qabsoontay waa inuu ku dhawaaqo in cod-bixintu furan tahay.
6. Haddii ay xisbiyadda siyaasaddu goob cod-bixineed usoo diran waayayaan wakiilo, hawsha doorashadu u xannibmi mayso, hawl-wadeenada Komishanka ee goobtuna shaqadooda way wadanayaan, waana in sidaas la diiwaangeliyo.
7. Komishanka Doorashooyinka Qaranku waxa uu soo saarayaa habraacyo dhamays Tiran oo lagu faahfaahinayo hawlqabadka goobta cod-bixinta, kaas oo hawlwadeenada goobta lagu tababari doono.

### Qodobka 107$^{aad}$
### Awoodda Guddoomiyaha Goobta Cod-bixinta

1. Guddoomiyaha goobta cod-bixinta waxa waajib ku ah inuu ilaaliyo nidaamka inta doorashadu socoto. Booliska ayuu ku amri karaa inuu qof goobta dibedda uga saaro ama in la qabto qof gef ku sameeyay hawsha doorashada ama qof waali ka muuqato.

2. Booliska looma ogola inuu galo gudaha goobta cod- bixinta haddii aanu Guddoomiyuhu amrin.
3. Saraakiisha Booliska, masuuliyiinta dawladda, hawlwadeenada goobta, wakiilada axsaabta/ururada, goob-joogayaasha caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah, waa in ay fuliyaan codsiyada Gudoomiyaha goobta si loo hubiyo in si dhib yar codka loo bixiyo oo aanay dhicin in lagu ururo miiska hawl-wadeenada ama goobta agteeda.
4. Gudoomiyaha goobta cod-bixinta iyo xubnaha Komishanka heer qaran, gobol iyo degmo, waxay xaq u leeyihiin inay isticmaalaan awoodaha ku xusan farqadaha Qodobkan.

**Qodobka 108aad**
**Masuuliyadaha Shaqaalaha kale Goobta Cod-bixinta**

Masuuliyadaha iyo shaqooyinka ay qabanayaan dhamaan shaqaalaha goobta cod-bixinta oo faahfaahsan waxa xeer-nidaamiye ku soo saaraya Komishanka Doorashooyinka Qaranka kuna tababari doona shaqaalaha goobaha.

**Qodobka 109aad**
**Wakiilada Axsaabta/ururada**

1. Guddiyada dhexe ama kuwa gobolada/degmooyinka ee ururadu/xisbiyadu waxay wakiil u soo diran karaan goob kasta oo cod-bixin ka dhacayso oo ay murashaxiin ku leeyihiin. Waxa kale oo ay keeni karaan bedelkiisa haddii uu maqnaado.
2. Wakiilada ay ururadu/axsaabtu soo dirsadeen waa inay goob-joog ahaadaan marka xafiiska doorashadu hawsha hayo, soona jeediyaan wixii tabasho ama cabasho ah ee ay qabaan (haddii ay jirto), taas oo la diiwaangelinayo.
3. Magacyada wakiilada xisbiyada/urrurada waa in loo geeyo Komishanka ama xafiisyadiisa 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta. Komishanka ama xafiisyadiisu wuxuu siinayaa wakiil kasta qoraal ogolaansho ah oo u fasaxaya inuu geli karo kana hawl geli karo goobta cod-bixinta ee loo soo diray.
4. Waxaa lagu soo xulayaa wakiillada Axsaabta/Ururrada Shuruudaha hoos ku xusan:
    a. Waa in uu yahay/tahay muwaadin Somaliland u dhashay;
    b. Waa in aanu/aanay da'diisu/da'deedu ka yarayn 25 jir sannadka doorashada la qabanayo;
    c. Waa in uu/ay wax qori karo/karto waxna akhriyi karo/karto;
    d. Waa in uu yahay/tahay qof xilkas ah oo dhaqan toosan.
    e. Waa in uu/ay u hogaansamo/santo shuruucda iyo xeerarka doorashooyinka ee khuseeya shaqadiisa/deeda.

**Qodobka 110aad**
**Gelidda Goobta Cod-bixinta**

1. Xafiiska goobta cod-bixinta waxa geli Kara dadka maamulaya xafiiska iyo kuwa ka wakiilka ah axsaabta/ururada iyo kuwa codka bixinaya iyo cidii kale Komishanka Doorashooyinku siiyo ogolaansho sida goob joogayaasha maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah.
2. Waxa reebban in cod-bixiyayaashu hub la yimaadaan goobta, markiiba qof ayaa gelaya, iyadoo lookala hor marinayo sidii loo soo kala horeeyay, hasayeeshee waa in tixgelin la siiyaa inuu ugu

hormaro haddii ay jirto qof naafo ah, hooyo uur leh ama ilmo sidata, qof waayeel ah, ama qof ka shaqaynaya hawsha doorashada oo doonaya inuu codkiisa bixiyo.

## Qodobka 111aad
## Talaabooyinka Ka Horeeya Cod-bixinta

1. In uu Kaadhkiisa cod-bixinta u dhiibo Guddoomiye- ku-xigeenka goobta cod-bixinta, si uu u hubiyo inuu yahay kaadh cod-bixineed oo sax ah (valid), isaga oo ka hubinaaya tilmaaha kaadhka cod-bixiyaha, isla markaana hubinaaya in wajiga cod-bixiyaha iyo sawirka is leeyihiin, isaga oo ku hubinaya habka indhaha qofka kaadhka sita (Biometric Identification), isla markaana hubiyo in far-yaradiisa bidix, haddii aanu lahaynna far-yaradiisa midig, haddii aanu taana lahayna meelaha muuqda ee jidhkiisa inaanu kaga oollin khadka aan masaxmini, dabadeedna uu kaadhka ugu gudbiyo xoghayaha goobta, iyadda oo ay kaadhka isha sii marinayaan wakiilada xisbiyaddu, haddii ay goobta ku sugan yihiin..
2. Marka uu xoghayaha goobtu ka helo magaca kaadhka ku qoran liiska rasmiga ah ee cod-bixiyayaasha goobta, isla markaana uu hubiyo inay is waafaqsanyihiin lambarka kaadhka ku qoran iyo lambarka kaadhka ugu diiwaangashan liiska cod- bixiyayaashu, waa in uu cod-bixiyuhu suulka bidix saaro meesha liiska cod-bixiyayaasha ah ee loogu talo galay.
3. Wuxuu xariijin ka talaabinayaa magaca cod-bixiyaha iyo dhamaan xogta kale ee cod-bixiyaha ee ku qoran khaanadaha cod-bixiyahaas ee liiska, isaga oo adeegsanaya mastaradda iyo qalin, ilaaliyana in magaca cod-bixiyaha iyo xogtiisa kaleba la akhriyi karo xariijin marinta ka dib.
4. Marka tallaabooyinka farqaddaha sare ee Qodobkan ku xusan u guto si dhamaystiran oo nidaamka waafaqsan, kuna wada qancaan hawlwadeenada iyo wakiilada axsaabtu ee goobta cod-bixinta ku sugan ayaa cod-bixiyaha loo goyn karaa warqadda cod- bixinta.
5. Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa xaddidi doona tiradda cod-bixiyayaasha ee hal goob ka codaynaya, iyaga oo u kala qaybin kara haddii tirada cod-bixiyayaasha ee hal goob ka codayn karaa ay ka bataan tiro xaddidan oo Komishanku goyn doono, iyaga oo ku xisaabtamaya in dhamaan cod-bixiyayaasha diiwaagashani codkooda wada dhiiban karaan maalinta cod-bixinta.
6. Hadii la adeegsado qalab casri ah oo fududaynaaya talaaboyinka cod-bixinta, Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa xeer nidaamiye faahfaahsan ku soo saari doona hanaanka loo adeegsanayo qalabka casriga ah.

## Qodobka 112aad
## Cod-bixiyayaasha aan Codka Dhiiban Karin

1. Waxa codkiisa dhiiban Kara cod-bixiyaha taga goobta cod-bixinta, ee buuxiyey shuruudaha cod-bixinta.
2. Haddii uu jiro qof ay naafonimo/am wax-qoris iyo akhris la'aan u diidey inuu codkiisa bixiyo guddoomiyaha goobta cod-bixinta ayaa u ogolaanaya in cod-bixiye kale oo uu aaminsan yahay inuu gacan siiyo oo ka caawiyo sidii uu codkiisa u dhiiban lahaa.
3. Haddii uu jiro qof waayeel ah ama aan fahmi karayn halka uu warqadda ka calaamadinayo, guddoomiyaha goobta cod-bixintu wuxuu amrayaa in qof uu ku kalsoon yahay ama haddii aanu jirinna hawlwadeenadda goobtu ay gacan ka siiyaan oo ay ka caawiyaan sidii uu codkiisa u dhiiban

lahaa. Wakiilada xisbiyada/ururrada waa in la tusaa cida uu doortay, cod-bixiyuhu ee loo calaamadiyey.

4. Xoghayaha goobta cod-bixinta ayaa qoraalka gelinaya sababta loo ogolaaday in qofkaas naafada ah laga kaalmeeyo sidii uu codkiisa u bixin lahaa, waxa kale oo uu qoraalka ku muujinayaa qofka naafada ah iyo qofka kaalmeeyey.

## QAYBTA 5AAD
## HAWLGALKA COD-BIXINTA
### Qodobka 113aad
### Nidaamka Cod-bixinta

1. Marka la dhamaystiro hawlaha ku xusan Qodobka 111aad ayuu guddoomiyaha goobtu:
    a. Cod-bixiyaha u goynayaa warqadda cod-bixinta isagoo xaqiijinaya in dabadii hadhaaga ahayd ee warqadda cod-bixineed ku hadhay buugga, hubinayana in shaanbadii goobtu ku taalo, kuna wareejinayaa si uu ugu soo codeeyo;
    b. Kaadhka cod-bixiyaha u gudbinayaa hubiyaha goobta;
2. Haddii uu arko cod-bixiyuhu intaanu codayn in warqadda cod-bixiyuhu aanay dhammayn ama ay jeexan tahay, ama aanay lahayn shaanbadii goobta wuu soo celinayaa, waxaanu codsanayaa in lo beddelo, dhacdadaasna waa in la diiwaangeliyaa.
3. Cod-bixiyuhu wuxuu dabadeed gelayaa ilo-xidhka waraaqaha lagu soo calaamadiyo.
4. Isaga oo adeegsanaya mid ka mid ah qalimadda goobta, ayuu cod-bixiyuhu calaamadinayaa halka loogu talo-galay ee ka mid ah qaybaha warqadda ee u gaarka ah xisbiga/ururka/musharraxa uu doonayo inuu u codeeeyo, dabadeena wuu soo laalaabayaa warqadda kana soo baxayaa qolka calaamadinta warqadda.
5. Intaa kadib ayuu cod-bixiyuhu wuxuu ku ridayaa warqaddiisa cod-bixinta sanduuqa cod-bixinta.
6. Cod-bixiyuhu wuxuu dabadeed u imaanayaa hubiyaha oo loo soo gudbiyey kaadhkiisa, kaas oo faryaradiisa bidix u marinaaya khadka aan masaxmin, haddii aanu far-yaro bidix lahayna, far-yarada gacanta midig, haddii aanu labada far-yaro midna lahayna farta kale ee kusoo xigta iyadoo gacanta bidix mudnaanta khadaynta la siinayo, haddii aanu laba gacmood midna lahayna meeshii kale ee jidhkiisa ah ee muuqanaysa.
7. Intaas kadib ayuu hubiyahu siinayaa cod-bixiyaha kaadhkiisii, cod-bixiyuhuna waa in uu si deg-deg ah uga baxaa goobta cod-bixinta isaga oo anshaxa dhawraya.
8. Qof kasta oo ka mid ah hawl-wadeenadda doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyadda ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka booliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixintu, wuxuu codkiisa dhiiban karaa (isaga oo u maraya tallaabooyinka ku xusan farqadaha 1-6 ee Qodobkan) isla marka goobta cod-bixinta la diyaariyo, ee hawl-wadeenada goobta cod-bixintu iyo wakiillada xisbiyadda ee goobta-cod-bixintu ay isla hubiyaan in kaadhka qofkaasi yahay mid sax ah (valid) horena aan loogu codayn, foomka uu Komishanka Doorashooyinku Qaranku u soo diyaariyena lago qoro:-

    a) Magaciisa oo afarran;
    b) Lambarka iyo goobta uu ka diiwaangashan yahay;

c) Lambarka iyo magaca goobta uu ka codaynayo;
d) Xilka uu ka hayo goobta cod-bixinta;
e) Saxeexa suulkiisa bidixna uu dhiga meesha foomka loogaga talo-galay.
f) Tirsiga Kaadhka shaqada ee Komishanku siiyay ( marka laga reebo ciidamada)

9. Qof kasta oo ka mid ah dadka ku xusan farqadda 8aad ee Qodobkan waxa kaadhkiisa cod-bixinta haynaya, guddoomiyaha Goobta cod-bixinta oo dib usiin kara uun ka dib marka lasoo gebagebeeyo hawsha doorasho ee goobta cod-bixinta.
10. Guddoomiyaha goobtu wuxuu ku ilaalinayaa hawl- wadeennada kale ee xafiiska doorasho ee goobta gudashada xilkooda, waxaanu u gacan bannaanaanayaa kala-socodsiinta hawsha goobta.
11. Guddoomiyuhu wuxuu awood u leeyahay inuu debadda uga saaro cod-bixiyaha cudur-daar la'aan dhex meeraysta goobta iyo inuu cod-bixiyayaas dib ugu soo celiyo warqadda cod-bixinta. Cod-bixiyayaas waxa loo oggolaanayaa inuu codkiisa dhiibto ka dib marka dadka safka taagani codkooda wada dhiibtaan.
12. Haddii uu cod-bixiye la yimaaddo goob cod-bixineed kaadh aan waafaqsanayn goobtaas, Gudoomiye ku xigeenka wuxuu u tilmaamayaa goobta cod-bixineed ee uu kaadhkiisu waafaqsan yahay.
13. Cod-bixiye kasta oo sita kaadh cod-bixineed oo aanu lahayn ama waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah ama ka duwan kuwa la isticmaalayo, Guddoomiyuhu wuxuu si deg-deg ah u amrayaa in laga qaado, waxaanu si deg- deg ah ugu dhiibayaa ciidanka nabadgelyada si dacwad loogu oogo, dhacdadaasna qoraal ayaa lagu diiwaangellinayaa.

## Qodobka 114aad
## Muddada Cod-bixinta

1. Hawlgalka cod-bixintu waa in la dhamaystiro hal maalin gudaheed oo ka bilaabmaysa 7:00 saac ee subaxnimo kuna dhamaanaysa 6:00 fiidnimo.
2. Cod-bixintu way soconaysaa wakhtiga xidhitaanka la tixgelin maayo, haddii ay jiraan cod-bixiyayaal safka ku jira oo aan welli codkooda bixin ilaa ay ka dhamaanayaan.
3. Marka ay saacadu gaadho 6:00 fiidnimo, askarta ilaalinaysa safku waxa ay calaamadin doonaan qofka ugu danbeeya dadka taagan safka, waxaanay u ogolaan doonaan in ay codeeyaan inta safka ku jirta oo kali ahi.
4. Komishanka Doorashooyinka ayaa go'aamin doona goobaha xaalado gaar ahi la soo darsaan maalinta doorashada.

## Qodobka 115aad
## Go'aanka Cabashooyinka ee Goobta Cod-bixinta

1. Hawlwadeenada goobta cod-bixintu waa inuu si ku meel gaadh ah go'aan uga gaadho cabashooyinka (haddii ay jiraan) oo ay ka mid yihiin kuwa af ahaan loo soo jeediyey iyo wixii muran ah ee ku hawl-galka goobta cod-bixinta. Cabashooyinka iyo muranadaas waa in qoraal ahaan loo diiwaan-geliyo.
2. Haddii ay jirto amni darro halis galin karta hawlwadeenada goobta iyo dadka cod-bixiyayaasha, guddoomiyaha goobtu waxa uu si ku meel gaadh ah u xidhayaa goobta cod-bixinta, waana in uu

sida ugu dhakhsaha badan u soo wargaliyaa Komishanka Doorashooyinka ee heer degmo, gobol, iyo heer qaran.

3. Habraac gaar ah oo uu komishanku soo saaro ayaa faah-faahin doona hanaanka cabashada doorashooyinka

## QAYBTA 6AAD
## TIRINTA CODADKA
### Qodobka 116aad
### Hawsha ka Horaysa Tirinta Codadka

1. Markay cod-bixiyayaashu codkooda bixiyaan guddoomiyaha goobtu wuxuu cod sare ku dhawaaqayaa inay cod-bixintu xidhan tahay.
2. Markuu guddoomiyaha goobtu ka ururiyo miiska dhamaan waraaqaha iyo qalabka aan tirinta wax ahmiyad ah u lahayn wuxuu bilaabayaa hawsha soo socota: -
   a) Wuxuu hubinayaa tirada cod-bixiyayaasha isagoo ka eegaya tirada waraaqaha cod-bixinta iyo tirada suulasha la dhigay buuga cod-bixinta.
   b) Wuxuu ururinayaa oo tirinayaa waraaqaha cod- bixinta ee aan la isticmaalin waxaanu ku ridayaa buqshadda 1aad.
   c) Wuxuu xaqiijinayaa oo saxeexiisa ku muujinayaa waraaqaha doorashada ee xumaaday ama aan hagaagsanayn ee ay soo celiyeen cod-bixiyayaashu, ama la arkay inay xun yihiin, waxaanu ku ridayaa buqshada 2aad.
   d) Waxaana uu Gudoomiyaha Goobta cod-bixintu buuxinaya Buuga Diiwaanka goobta qaybta ka horaysa tirinta codadka isaga oo ka saxeexaya hawl-wadeenada goobta iyo wakiilada xisbiyada/ururada.

### Qodobka 117aad
### Hawsha Tirinta Codadka

1. Intaan tirinta codadka la bilaabin Gudoomiyuhu wuxu eegaya inay jiraan waraaqo cod-bixineed oo xero ka waydaartay (Waraqo ku dhacay sanduuq aan ahayn kii saxa ah , marka laba doorasho ama inkabadan hal mar la wada qabanaayo), si looga taxadaro in codka muwadiniintu lumaan, Gudoomiyuhu hadu arko warqad khaldan oo ku jirta sanduuqa wuu ka saarayaa, wuxuna diiwaangelinaya dhacdadaas, waxaana la hubinaya inay warqadu leedahay shanbadi goobta iyo tirsigii goobta, waxaana lagu ridayaa bushqada loogu talo galay , marka tirintu dhamaato ayaa lagu darayaa codadka doorashada.
2. Marka guddoomiyaha goobtu dhameeyo hawsha ku xusan Qodobka 116aad wuxuu bilaabayaa tirinta waraaqaha cod-bixinta ee sanduuqa ku jira. Si taa loo fuliyo guddoomiye ku-xigeenku wuxuu markiiba sanduuqa ka soo saarayaa hal warqad cod-bixineed, wuxuuna u dhiibayaa Guddoomiyaha, guddoomiyuhuna wuxuu furayaa warqaddii cod-bixinta oo cod sare ku dhawaaqayaa ururka/xisbiga/murashaxa codka lagu siiyey; warqadaas waxa guddoomiye ku-xigeenku u sii gudbinayaa Hubiyaha oo tusi doona wakiilada Xisbiyada/Ururada, markaas xoghayaha ayaa gelinaya foomka khaanadaysan ee loogu talagalay ururka/xisbiga codkaas helay waxaanu warqadaas ku ridayaa buqshada 3aad, iyada oo u kala xidhan xisbi/urur ama murashax.

3. Ma banana in sanduuqa laga soo saaro warqad kale oo cod-bixineed inta tii ka horaysay laga dhamaynayo ee buqshadda lagu ridayo. Hawsha waxa maamulaya hawl-wadeenada goobta cod-bixinta oo keliya.
4. Guddoomiyaha goobtu markuu dhameeyo tirinta, wuxuu hubinayaa tirada guud ee waraaqaha cod-bixinta, iyo inay isle'ekaadaan tirada codadka ururada/axsaabtu guud ahaan heleen, tirada codadka lagu muransan yahay, aan hagaagsanayn, aanay waxba ka jirin, iyo kuwa aan la isticmaalin ee ku xusan Qodobka 116aad ee Xeerkan.
5. Guddoomiyaha goobtu markuu caddeeyo ee sidaas saxeexiisa ku muujiyo:
    a. Wuxuu waraaqaha cod-bixinta ee waxba kama jiraanka laga dhigay ku ridayaa buqshadda 4aad.
    b. Wuxuu waraaqaha cod-bixinta ee lagu muransan yahayna ku ridayaa buqshada 5aad.
    c. Ugu danbeyntiina, wuxuu waraaqaha ansaxay ee la tiriyey ku ururinayaa buqshada 3aad, iyaga oo u kala xidhan xisbi/urur/murashax.
6. Haddii sanduuqa cod-bixinta laga helo waraaqo dheeraad ah ama ka duwan kuwii goobta lagaga codeeyey, sida iyaga oo aan lahayn shaanbadii goobta, lambarkii waraaqda cod-bixinta ee goobta ama nooc ahaan aanay ula mid ahayn waraaqadaha lagaga codeeyay goobta, hawl-wadeenada goobta cod-bixineed waxay ka dhex saarayaan waraaqaha la tirinayo, waxayna tusayaan wakiillada xisbiyadda/ururrada ee goobta cod-bixinta, ka dib waxa lagu ridayaa buqshad gaar ah iyada oo dhacdadaas la diiwaangelinayo.
7. Hadii labo doorasho ama wax ka badan mar la wada qabanaayo waxa tirinta codadka loo kala horaysiinaya siday heerka doorashadu u kala sareeyan, Madaxtooyada, Guurtida, Wakiilada iyo Deegaanka.

## Qodobka 118$^{aad}$

## Dib u Tirinta Codadka ee Goobta Cod-bixinta

1. Guddoomiyaha goobtu wuxuu amri karaa in waraaqaha cod-bixinta dib loo tiriyo, hadduu codsado/codsadaan wakiil/wakiilo xisbi/urur. Dib u tirin waxa la samayn karaa hal mar.
2. Hadii Gudoomiyaha Goobtu diido codsiga dib u tirinta wakiilada xisbiyadu waxay qoran karaan cabasho, ama wakiilka xisiga/ururka ee degmada ayaa cabasho qoran Kara, waxaana dib u tirinta lagu samayn doona xafiiska degmada.
3. Guddoomiyuhu wuxuu iskii u amri karaa in dib loo tiriyo waraaqaha cod-bixinta haddii codadku ka Bataan tirada ku diiwaangashan diiwaanka cod-bixiyayaasha goobta ama ay jiraan khaladaad xisaabeed.
4. Dib u tirinta waxaa loo raacayaa si la mid ah tirinta caadiga ah ee waraaqaha cod-bixinta. wakhtiga dib u tirintu waa intaan la saxeexin foomka natiijada goobta

## Qodobka 119$^{aad}$

## Xidhitaanka Hawsha Tirinta

1. Markuu guddoomiyaha goobtu dhameeyo hawsha tirinta ee ku xusan Qodobada 117aad iyo 118aad, waxa uu goobta kaga dhawaaqayaa wadarta tirada cod-bixiyayaasha, wadarta codadka ansaxay iyo tirada codadka uu helay, murashax kasta oo xisbi/urur.

2. Si looga badbaado luminta codadka ay muwaadiniintu dhiibteen, waxa wakiilka xisbi/urur ku waajib ah in uu saxeexo Xaashida Natiijada Goobta-cod-bixinta (result sheet) ama uu qoraal kusoo gudbiyo sababaha uu u saxeexi waayay, iyo cabashooyinka kale ee xisbiyada/ururada laguna rido buqshadda 6aad.
3. Buqshadaha korkooda waxa lagu qorayaa faahfaahinta waxa buqshadda gudaheeda ku jira.
4. Hawsha tirinta waa in loo dhamaystiro si is-daba joog ah ee la soo tilmaamay oo hakad lahayn oo wax kale aan la dhex galin.
5. Qoraalada raadraaca ahi (records) waxay muujiyaan hawlaha kor ku xusan.
6. Komishanka Doorashooyinka Qaranku wuxu soo saari doonaa habraac dhamays tiran oo ah habka xidhitaanka iyo tirinta codadka ee Xeerku tilmaamay.

**Qodobka 120aad**

**Codadka Xumaada ama Lagu Muransanyahay**

1. Waraaqaha cod-bixinta marka la tirinaayo waxay noqonayaan waxba kama jiraan:
    a. Haddii ay ka duwan yihiin waraaqaha cod-bixinta ee Komishanku gartay in doorashada loo isticmaalo.
    b. Haddii aanay lahayn shaambadda goobta cod- bixinta.
    c. Haddii warqadda cod-bixinta ay ka muuqdaan qoraal ama calaamado ama raad si xirfad leh loo soo agaasimay oo aan loogu talagelin in lagu qoro.
    d. Haddii warqadda cod-bixinta aanay si fiican uga muuqan Karin Ururka/xisbiga codka la siiyey oo la aqoonsan Kari waayo.
    e. Haddii warqadda cod-bixinta ay ka muuqato in cod-bixiyuhu calaamadeyay hal astaan xisbi/urur wax ka badan.
    f. Hadii Cod-bixiyuhu calaamadiyo astaamaha hal murashax wax ka badan oo kala xisbi/urur ah ama isku xisbi/urur ah
    g. Haddii warqadu muujinayso in cod bixiyuhu calaamadiyay astaanta hal musharax wax ka badan oo isku xisbi/urur ah, codkaas waxa uu noqonaya cod xisbi/urur, murashax gaar ah ma yeelanayo, waxaana lagu daray wadarta guud ee codadka xisbiga/ururka.

**2.** Codka waxba kama jiraan wuxuu noqon karaa marka go'aan wadajir ah isku raacaan Hawl-wadeenada goobta cod-bixintu iyo wakillada xisbiyada/ururada. Haddiise ay isku raaci waayaan oo ay ku kala qaybsamaan, waxa waraaqahaas cod- bixineed loo aqoonsanayaa kuwo muran ka taagan yahay, waxaana loo raacayaa Qodobkan 120aad ee Xeerkan.

3. Xafiiska Doorashada ee degmada ayaa go'aan ka gaadhi kara waraaqaha cod-bixinta ee muranku ka taagan yahay iyada oo ay goobjoog ka yihiin wakiilada xisbiyada/ururada iyo musharaxiinta ee heer degmo.

**Qodobka 121aad**

**Qoraalka Raadraaca Goobta Cod-bixinta**

1. Natiijada raadraaca ee goobta cod-bixinta waxa lagu qorayaa foomka uu soo diyaariyey Komishanka Doorashooyinka Qaranku ee ka kooban xaashi asal (original ah) iyo nuqulada lagama maarmaanka ah (copies), waxaana uu gudoomiyaha goobtu ku dhawaaqayaa:
    a. Tirada guud ee ka codaysay goobta;
    b. Tirada codadka xumaaday;
    c. Tirada codadka lagu muransan yahay;
    d. Tirada codadka ansaxay, iyo
    e. Tirada ay kala heleen xisbiyada/ururada/murashaxiinta tartamay.
2. Xaashida asalka ah ee Natiijada goobta ku xusan Farqadda 1aad ee Qodobkan waxa lagu ridayaa Buqshada 7aad waxaana gacanta loogu gudbinayaa Guddoomiyaha Xafiiska Doorashada ee Degmadda.
3. Laba nuqulna waxa lagu ridayaa buqshada 8aad, oo lagu ridayo isla sanduuqa ay ku jiraan buqshadaha lingaxan ee ku xusan Qodobka 118aad ee Xeerkan iyo wixii ka hadhay agabkii doorashada waxaana loo gudbinayaa Xafiiska Doorashada ee Degmadda, wakiilada xisbiyadana/ururada waa in la siiyaa min hal nuqul.

**Qodobka 122aad**

**Qaadista iyo Wareejinta Qalabka**

1. Guddoomiyaha goobta cod-bixinta oo ugu yaraan ay la socdaan xubin hawl-wadeenada ka tirsan iyo Ciidamo ilaalo ah ayaa qaadaya qoraalka raadraac iyo buqshadaha goobta kuna wareejinaya xafiiska doorashada ee degmada, iyadoo aan lahayn wax dib u dhac ah.
2. Wakiilada Xisbiyadu waxay soo raacayan qalabka iyo natiijada doorashada si loogu wareejiyo degmada iyaga oo goob-joog ah, hadii aanay iyagu iskood uga hadhin
3. Marka xafiiska doorashada ee degmada lagu wareejinayo sanduuqa ay ku jiraan buqshadaha waa in la hubiyo inay lingaxan yihiin oo aan la furin Lana farafarayn. Guddoomiyaha doorashada ee degmadu waa inuu bixiyo caddaynta la wareegidda agabkaas.

## QAYBTA 7AAD

## SHAQOOYINKA XAFIISYADA DEGMADA, GOBOLKA IYO XARUNTA DHEXE EE TIRINTA CODADKA IYO KU DHAWAAQISTA NATIIJOOYINKA

**Qodobka 123aad**

**Shaqada Xafiiska Doorashada ee Degmada**

1. Markuu Guddoomiyaha xafiiska doorashada ee degmadu helo agabka lagu tilmaamay Qodobka 122aad ee Xeerkan: -
    a. Waa inuu faro guddoomiye ku-xigeenka, hubiyaha, xoghayaha iyo tiriyayaasha inay hawshooda u diyaar garoobaan.
    b. Waa inuu u yeedho wakiilada ururadda/axsaabta ee murashaxiin ku leh degmada ee Komishanku soo ogolaaday inay goob-joog ahaadaan inta hawshu socoto.

c. Waa in Gudoomiyaha degmadu fura bushqada xafidan ee ay ku jiraan foomka natiijada ee asalka ah iyo agabka kale, hubiyaana inay lingaxanyihiin, leeyihiina saxeexyadii iyo shanabadi goobta cod-bixinta.
d. Markay guddoomiyaha, hawlwadeenada iyo wakiilada xisbiyada/ururradu hubiyaan inay sanduuqyaddu lingaxan yihiin oo aan la furin, waa inuu furo sanduuqa oo ka soo saaro qalabka ku jira oo hubiyaa.
e. Markay wadajir u hubiyaan in buqshadahu lingaxan yihiin oo aan hore loo furin, waa inuu furaa buqshadda ay ku jirto shaambadu oo hubiyaa in lambarka shaambadu ku yaal qoraalada.

2. Xafiiska doorashada ee degmadu waa inuu markaas hubiyo in qoraalada iyo buqshadaha ku xusan Qodobadda 116aad, 117aad, 119aad, 120aad ee Xeerkan ay dhan yihiin.

## Qodobka 124aad
## Tirinta Codadka Doorashada Degaanka & ku Dhawaaqidda Natiijada

1. Guddoomiyaha xafiiska doorashada ee degmadu markuu helo agabka ku xusan Qodobka 122aad ee doorashada degaanka, markaas waa inuu:
    a. Tiriyo oo isu geeyo dhamaan cod-bixinta ka soo baxday goobaha cod-bixinta degmada.
    b. Hubiyo codadka waxba Kama jiraanka ah ee ka soo xerooday goobaha cod-bixinta degmada.
    c. Go'aan ka gaadho codadka lagu muransan yahay.
    d. Tiriyo codadka ansaxay ee urur/xisbi/murasha kasta ka helay doorashada degmada.
    e. Xisaab ahaan isu qaybiyo tirada guud ee codadka ansaxay ee degmada iyo tirada kuraasta degaanka degmada, soona saaro inta urur/xisbi waliba ka helayo codadka.
    f. Hubiyo urur/xisbi kasta inta uu ka helayo kuraasida degaanka.
    g. Markaas ku dhawaaqo magacyada murashaxiinta ee xisbi/urur kasta ku guulaystay doorashada, iyagoo isugu xiga siday u kala cod sareeyan,
    h. Natiijada doorashada degmada si fagaare ah ugu dhawaaqo kuna dhejiyo boodhka xafiiska doorashada ee degmada magacyada murashaxiinta guulaystay.

## Qodobka 125aad
## Gudbinta Raad-raaca (Records)

1. Raadraacyada hawlgalada ku xusan Qodobada 122aad iyo 123aad ee Xeerkan waxa lagu qorayaa foomamka Komishanku u diyaariyey mid kasta, waana inay ka koobnaadaan nuqulada lagama maarmaanka ah ee Komishanku go'aamiyo.
2. Nuqulada raadraacyada (records) waxaa loo qaybinayaa sida uu tilmaamayo Qodobada 122aad iyo 124aad ee Xeerkan.

## Qodobka 126aad
## Soo Saaridda Go'aanada Doorashooyinka Degaanada

Xafiiska doorashada ee degmaddu waa inuu soo saaro go'aanka doorashada degmada, iyagoo ku muujinaya qoraal kooban oo ay ku qoran yihiin magacyada murashaxiinta ku guulaystay

doorashada degaanka, waxaana lagu dhejinayaa xafiiska maamulka Dawladda Hoose ee ay khusayso. Iyagoo nuqul ka mid ahna u gudbinaya xafiiska dhexe ee Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

## Qodobka 127aad

## Isugeynta tirada Cod-bixinta Doorashada Madaxtooyada iyo Golaha Wakiilada ee xafiiska Degmada

Guddoomiyaha doorashada ee degmadu markuu qabanayo hawsha doorashada Madaxtooyada iyo Golaha Wakiilada: -

a) Waa inuu tiriyo oo isu geeyo dhamaan cod-bixinta ka soo hoyatay goobaha cod-bixinta.
b) Waa inuu hubiyo codadka waxba Kama jiraanka noqday ee ka soo hoyday goobaha cod-bixinta.
c) Waa inuu go'aan ka gaadho codadka muranku ka taagan yahay, sida uu tilmaamay Qodobka 120aad ee Xeerkan.
d) Waa inuu isu geeyo codadka xisbi kasta oo murashaxiin ku leh degmada ka helay goobaha cod- bixinta.
e) Waa inuu natiijada codadka ee soo baxay iyo cabashooyinka (haddii ay jiraan) u gudbiyo Xafiiska doorashada gobolka iyo xarunta dhexe.
f) Waa in Xafiiska Degmadu diyaariya raad raacyada natiijada Doorashada Madaxtooyada iyo Wakiilada kuwaas oo lagu qoraayo foomamka Komishanka Doorashooyinka Qaranku u diyaarshay.
g) Waa inu nuqul kamid ah natiijada degmada uu siiya wakiilada xisbiyada/ururada ee heer degmo.

## Qodobka 128aad

## Shaqada Xafiiska Doorashada Gobolka ee Doorashooyinka Deegaanka

1. Xafiiska doorashada ee gobolku markuu helo qoraalka raad-raaca ee goobaha cod-bixinta iyo natiijada guud ee codadka ka soo baxay degmooyinka gobolka iyo inta xisbi/urur kasta ka helay ee uu u soo gudbiyey xafiisyada doorashada ee degmooyinka gobolku wuxuu hubinayaa xisaab ahaan natiijada codadka.
2. Xafiiska Doorashada ee Gobolku wuxuu ka go’aan gaadhayaa wixii cabasho ka taagnayd ama lagu muransanaa ee loo soo gudbiyey, iyada oo ay goob-joog yihiin wakiilada xisbiyada/ururada tartamayaa, wuxuu isu geynayaa natiijooyinka doorashada ee degmooyinka gobolka, waxaanu soo saarayaa:-
    a. Tirada guud ee codadka laga dhiibtay dhamaan degmooyinka gobolka;
    b. Tirada guud ee codadka xumaaday ee degmooyinka Gobolka.
    c. Tirada Guud ee codadka ansaxay ee degmooyinka gobolka.
    d. Tirada codadka ay kala heleen xisbiyada/ururrada tartamay.
3. Xafiiska Gobolku wuxu xarunta dhexe u gudbinaya hadii ay jiraan cabashooyin iyo natiijada heer Gobol oo ku qoran foomamka Komishanka Doorashooyinka Qaranku u diyaarshay, waxaana nuqul la siinaya Wakiilada Xisbiyada/Ururada ee heer Gobol.

**Qodobka 129aad**

**Shaqada Xafiiska Gobolka ee Doorashada Golaha Wakiilada**

1. Ka dib marka uu helo xidhmooyinka nuqulada qoraalada tixraaca ah ee goobaha cod-bixinta iyo natiijada isugaynta codadka ee ay soo gudbiyeen Degmooyinka Gobolku, xafiiska doorashada ee Gobolku wuxuu si taxadar leh u hubinayaa wadarta xisaabta natiijooyinka codadka ee dhamaan Degmooyinka Gobolka.
2. Marka la dhamaystiro hawlaha faqrada (1) ee Qodobkan xafiiska doorashada ee Gobolku wuxuu xisaabinayaa wadarta codadka ee uu helay musharax kasta/xisbi kasta, wuxuuna gaar u dejinayaan codadka xisbi kasta u gaarka ah.
3. Haddii Guddoomiyaha doorashada ee Gobolku ogaado in xisaab ahaan qalad ku jiro dokumentiyada Xafiiska Degmadu soo gudbiyay wuxuu xafiiska degmada ka codsanaya in uu qoraal ku soo sameeyo qalad ka jira sheegana sida saxda ah.
4. Xafiiska Doorashada ee Gobolku wuxuu ansixinayaan sida uu xaqiijiyay Xafiiska Degmadu marka uu hubiyo ee uu ku qanco, hadii kale wuxu qaadayaa taloobiyanka sharci ee u banaan isaga oo raacaya habraacyada uu Komishanku soo saaray.
5. Marka Gudoomiyaha xafiiska doorashada ee Gobolku uu ku qanco hawsha la qabtay, wuxuu diyaarinayaa qoraal tixraac foomam ku haboon ku qoran oo hawsha la qabtay ah oo ka kooban nuqulka asliga ah iyo nuqulada kale lagama maarmaanka ah, kuwaas oo loo gudbin doona Xarunta dhexe ee Komishanka Doorashooyinka Qaranka si loogu sii gudbiyo Maxkamada Sare,
6. Waxa min hal nuqul la siin doona Xisbiyada qaranka ee ka qayb galay doorashada Gobolkaas.

**Qodobka 130aad**

**Ku Dhawaaqida Natiijada Hordhaca ah ee Doorashada Golaha Wakiilada**

1. Gudoomiyaha xafiiska doorashada ee Gobolku, iyadoo uu goob-joog yahay xubin Komishanka Doorashooyinka Qaranka ah ee Gobolkaa loo xilsaaray iyo wakiilada xisbiyada ee heer gobol, wuxuu soo saarayaa natiijada Gobolka ee doorashada Golaha Wakiilada oo hordhac ah iyo murashixiinta guulaystay.

2. Natiijada doorashada ee Gobolka waxaa loo soo saarayaa qaab kooban oo muujinaysa guud ahaan wadarta codadka Gobolka ee la bixiyay, wadarta codadka ansaxay, wadarta codadka xumaaday, tirada cod ee uu xisbi kastaa gaarkiisa u helay.

3. Nuqul ka mid ah natiijada doorashada ee Gobolka waxaa loo dirayaa xafiiska dhexe ee Komishanka Doorashooyinka Qaranka, sadexda xisbina mid walba nuqul ayaa la siinayaa

4. Hadii la adeegsado nidaamka liistada furan, Gudoomiyaha Gobolka ayaa ku dhawaaqi doona murashixiinta guulaysatay , tirada codadka ay kala heleen, iyo murashixiinta aan guulaysan siday ugu kala horeeyan liistada kaydka iyada oo loo raacay hanaanka Xeerkan jideeyey.

**Qodobka 131aad**

**Gudbinta Raad-raacyada**

1. Raad-raacyada hawlgalada ku xusan Qodobada 113aad, 114aad iyo 117aad ee Xeerkan waxa lagu qorayaa foomamka komishanku u diyaariyey mid kasta, waana inay ka koobnadaan nuqulada lagama maarmaanka ah
2. Qoraalada tixraacyada waa in loo qaybiyaa sida lagu sheegay Qodobada 114aad & 117aad ee Xeerkan.

**Qodobka 132aad**

**Shaqada Xafiiska Gobolka ee Doorashada Madaxtooyada**

1. Ka dib marka uu helo xidhmooyinka nuqulada qoraalada tixraaca ah ee isugaynta codadka ee ay soo sareen Degmooyinka Gobolku, xafiiska doorashada ee Gobolku wuxuu si taxadar leh u hubinayaa wadarta xisaabta natiijooyinka codadka ee dhamaan Degmooyinka Gobolka.
2. Waa inuu ka go'aan gaadha wixi cabashooyin ah ee soo gaadhay
3. Waa inuu natiijada codadka ee soo baxay iyo cabashooyinka (haddii ay jiraan) u gudbiyo Xarrunta Komishanka Doorashooyinka ee Heer Qaran.
4. Xafiiska Doorashada Gobolku
    a. Wuxuu natiijada raadraaca doorashada ee gobolka ku qorayaa foomka ku xusan Farqada 2aad ee Qodobkan oo ka kooban xaashi asal ah iyo nuqulada lagama maarmaanka ah;
    b. Nuqulada foomamka natiijada gobolka, oo ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihii asalka ahaa ee natiijooyinka doorashada ee degmooyinka gobolka, waxa uu u dirayaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka;
    c. Wakiiladda Axsaabta/ururada ee Xafiiska Doorashada Gobolkana waa in uu siiyaa min hal nuqul.

**Qodobka 133aad**

**Hawsha Xafiiska Dhexe ee Doorashada Golaha Wakiilada iyo Degmooyinka**

1. Komishanka Doorashooyinka Qaranku marka uu helo dhamaan raad raacyada doorashooyinka degaanka iyo golaha wakiilada ee ay soo saareen xafiisyada awooda u leh, waxa uu samaynaya hubinta xisaabta, waxa uu go'aan ka gaadhay wixi dacwado ah ee soo gaadhay, waxaana uu soo saaray natiijooyinka heer degmo iyo gobol oo faahfaahsan si heer Qaran ah.
2. Komishanka Doorashooyinka Qaranka xafiiskiisa dhexe wuxu marka uu ku qanco natiijada ka timi degmooyinka iyo Gobolada uu diyaarinaya raad raacyada lagama maarmaanka ah, waxaan nuqul la siinaya Xisbiyada Qaranka iyo Maxkamada awooda u leh ka garniqida doorashooyinka.

**Qodobka 134aad**

**Hawsha Xafiiska Dhexe ee Doorashada Madaxtooyada**

1. Xafiiska Dhexe ee Komishanku markuu helo qalabka & qoraalada raadraaca ee ku xusan Qodobka 131aad ee Xeerkan, waa inuu:
    a. Faro kaaliyayaasha iyo xoghaynta inay u diyaaargaroobaan hawsha.
    b. U yeedho Wakiilada ururada/axsaabta si ay goob- joog u ahaadaan marka hawshu socoto.

c. Inay wadajir u hubiyaan in buqshaduhu lingaxan yihiin oo aan la furin, markaa waa inuu furaa oo ka soo saaraa agabka ku jira.
d. Inay wadajir u hubiyaan in buqshadahu lingaxan yihiin oo aan la furin, markaa waa inuu furo buqshadaha hubiyana in raadraacyadu dhanyihiin.

2. Xafiiska dhexe ee doorashooyinku waa inuu markaas hubiyo inuu helay qoraalka raadraaca ee ku xusan Qodobka 131aad ee Xeerkan oo laga doonayo xafiisyada doorashooyinka ee degmooyinka/gobolada.

## Qodobka 135aad
## Ku Dhawaaqidda Natiijada Doorashooyinka Madaxtooyada

Xarrunta dhexe ee Komishanku markuu ka helo xafiisyada doorashooyinka ee degmooyinka/gobolada waa inuu:

1. Go'aan ka gaadho dacwooyinka iyo murranada la xidhiidha cod-bixinta iyo tirinta.
2. Tiriyo oo isku geeyo (xisaab ahaan) codadka ansaxay, kuwa xumaaday ama waxba Kama jiraanka ah ee ka yimid xafiisyada doorashooyinka gobolada.
3. Markuu si walba u hubiyo ee uu ku qanco in hawshu si habsami u dhacday, Guddoomiyaha Komishanku wuxuu si ku meel gaadh ah ugu dhawaaqayaa natiijooyinka doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha
4. Marka uu Komishanku ku dhawaaqo natiijada ku meel gaadhka ah waa in xafiiska dhexe ee Koomishanku u gudbiyaa nuqul rasmiya Maxkamada Sare.

## Qodobka 136aad
## Dhaarinta Xildhibaanada la Doortay ee Golaha Wakiilada

1. Ka dib ku dhawaaqista natiijada rasmiga ah, Maxkamada Sare ayaa cayimaysa taariikhda dhaarinta muddo aan ka badnayn todobada casho gudahood oo ka bilaabanta maalinta natiijada rasmiga ah lagu dhawaaqay, waxaana lagu dhaarinayaa xubnaha Golaha Wakiilada ee la doortay xarunta Golaha Wakiilada si waafaqsan Qodobka 129aad ee Dastruutka JSL,
2. Kulanka dhaarta waxaa furaya, hogaaminayana Guddoomiyaha Maxkamada Sare sida ku cad Qodobka 44(3) ee Dastuurka.

## Qodobka 137aad
## Dhaarinta Xildhibaanada la Doortay ee Golayaasha Degaanka

1. Ka dib ku dhawaaqista natiijada rasmiga ah, Maxkamada Gobolka  iyo hadii ay jiraan racfaano laga qaatay natiijada degmada , Dhaarinta Murashixiinta la doortay Maxkmada Gobolka ayaa cayimaysa taariikhda dhaarinta muddo aan ka badnayn 14 casho gudahood oo ka bilaabanta maalinta natiijada rasmiga ah lagu dhawaaqay, waxaana lagu dhaarinayaa xubnaha Golaha Deegaanka ee la doortay si waafaqsan shuruucda dalka.
2. Kulanka dhaarta waxaa furaya, hogaaminayana Guddoomiyaha Maxkamada Gobolka ay degmadu ka tirsantahay ama cida uu u wakiisho.

**Qodoka 138aad**

**Dhaarta Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha**

Dhaarta Madaxweynaha waxa loo raacaya sida uu dhigaya Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland Qodobada 84aad iyo 129aad ee Jamhuuriyada Somaliland.

**Qodobka 139aad**

**Xeerka Anshaxa iyo Guddida Anshaxa iyo Xalinta Khilaafaadka**

Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa soo saaraya xeerarka anshaxa doorashooyinka iyo diiwaangelinta iyo xeerarka anshaxa warbaahinta xiliga doorashooyinka/diiwaangelinta, magacaabayana gudida anshaxa doorashooyinka iyo xalinta khilaafadka marka uu la tashado daneeyayaasha kala duwan ee arrimaha doorashooyinka,

## CUTUBKA SIDEEDAD
## DAMBIYADA DOORASHADA LA XIDHIIDHA IYO XAD-GUDUBYADA XEERKA IYO NIMAADKA DOORASHOODA

**Qodobka 140aad**

**U Hogaansanka Nidaamka iyo Xeerarka Doorashooyinka**

1. Waajibka Guud ee u Hogaansanka; Dhawridda nabadgelyada guud iyo u hogaansamidda xeerka iyo nidaamka doorashadu waa waajib saaran muwaadin kasta oo u dhashay dalka Jamhuuriyada Somaliland, iyo qofka kasta oo ku sugan Dalka Somaliland wakhtiga doorashada.
2. Carqaladaynta (General Obstruction Offence) Qof kasta oo si ulakac ah, u carqaladeeya nidaamka doorashada, ku xadgudba xeerkan, qodobo ama qaybo ka mid ah wuxuu galay fal-dambiyeed.

**Qodobka 141aad**

**Dambiyada Guud ee la Xidhiidha isoo Baxyada Bulshada**

Qofkasta oo ku kaca ama cid kale ku dhiiri galiya in ay ku kacaan fal lid ku ah habsami u socodka hawlaha doorashooda inta u dhaxaysa maalinta doorashada la cayimo ilaa maalinta cod-bixinta ka dambaysa, iyadoo u jeedadu tahay in la hor istaago ama la carqaladeeyo isu soo bax dadwayne oo doorashada la xidhiidha, wuxuu galay fal dambiyeed. Waxaana uu mutaysanayaa ciqaab dhan hal sanno ilaa laba sanno oo xadhig ah, ama ganaax lacageed oo dhan 2,000,000/= ilaa 3,000,000/= (laba ilaa saddex milyan oo shilin Somaliland ah).

**Qodobka 142aad**

**Matalaadda**

Qofkasta oo iska dhiga qof aanu ahayn si uu u marin habaabiyo ama is been ah wakiil uga noqdo Xubnaha hoos ku qoran ama cid kale ku dirqiya inay sidaas yeelan Iska dhiga xubin Komishanka ka mid ah, xubin Shaqaalaha Komishanka ka mid ama wakiil Komishan, Iska dhiga Hawlwadeen doorasho,Iska dhiga Wakiil Xisbi ama urur sharciyaysan, Iska dhiga Musharax ama Wakiil musharax, Iska dhigo goobjoogayasha Komishanku ogolaaday, Iska dhiga ciidanka amniga ee goobta cod-bixinta sida rasmiga ah ugu qoran wuxuu galay faldamiyeed waxaana uu mutaysanayaa ciqaab dhan sadex bilood ilaa lix bilood oo xadhig ah, ama ganaax lacageed oo dhan 2,000,000/= ilaa 3,000,000/= (laba ilaa saddex milyan oo shilin Somaliland ah)

**Qodobka 143aad**

**Bixinta Laaluushaka**

1. Qofkastaa oo laaluush u bixiya si toos ama si dadban wakhtiga doorashada si uu cod-bixiye ugaga hor istaago in uu codkiisa bixiyo am cid gaar ah u codeeyo wuxuu galay faldambiyeed. Waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan lix bilood ilaa laba sannadood oo xadhig ah iyo/ama ganaax lacageed ah oo dhan 500,000/= ilaa 2,000,000 oo Shilin Somaliland ah.
2. Qaadashada laaluushka: Cod-bixiye kasta oo aqbala inuu qaato laaluushka faqrada sare ku sheegan si toos ah ama dadban wuxuu galay faldambiyeed waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan lix bilood ilaa laba sannadood oo xadhig ah iyo/ama ganaax lacageed ah oo dhan 500,000/= ilaa 2,000,000 oo Shilin Somaliland ah.

**Qodobka 144aad**

**Khasabka iyo Khiyaamada**

Qof kasta oo qof kale ku khasba in aanu codayn ama aanu cid gaar ah u codayn, ama si khiyaamo ah qof uga hor istaaga in uu codeeyo ama cid gaar ah u codeeyo sida in uu ku qanciyo in aan cod-bixintu sir ahayn wuxuu galay faldambiyeed waxanu mutaysanayaa ciqaab dhan saddex bilood ilaa lix bilood oo xadhig ah, iyo ganaax lacageed oo dhan 2,000,000 ilaa 3, 000, 000 (laba milyan ilaa sadex milyan oo Shilin Somaliland ah).

**Qodobka 145aad**

**Dambiyada la Xidhiidha hawlwadeenada**

1. Hawlwadeen kasta oo fududdeeya in la musuqmaasuqo natiijada goobaha cod-bixinta, ama wax-is-daba marin ku kaca, waxa uu galay danbi, waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan 3 sanno ilaa 5 sanno oo xadhig ah iyo ganaax lacageed oo dhan 1,000,000/= ilaa 5,000,000/= oo Somaliland Shilin ah.
2. Hawlwadeen kasta oo si ula kac ah u burburiya, qariya, ama baabiiya waraaqaha cod-bixinta, najiitada cod-bixinta, ama qalabka goobt cod-bixinta waxa uu galay danbi waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan hal sanno ilaa laba sanno oo xadhig ah, ama/iyo ganaax lacageed oo dhan **1,000,0000 = illaa 3,000,000/= oo Shilin.**

**Qodobka 146aad**

**Dambiyada la xidhiidha Codaynta**

1. Qof kasta oo la yimaada goob-cod-bixineedkaadh cod-bixneed oo aanu lahayn, isaga oo ujeedadiisu tahay in uu ku codeeyo, ama waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah, waxa uu galay danbi waxaana uu mutaysanayaa ciqaab dhan hal sanno ilaa laba sanno oo xadhig ah, ama ganaax lacageed oo dhan 2,000,000/= ilaa 3,000,000/= (laba ilaa saddex milyan oo shilin Somaliland ah)
2. Qof kasta oo keydsada kaadhadh cod-bixineed oo cid kale leedahay isaga oo ujeedadiisu tahay in tahay in uu maalinta cod-bixinta si qaldan uga faa’iideysto waxa uu galay danbi waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan lix bilood ilaa laba sannadood oo xadhig ah iyo/ama ganaax lacageed ah oo dhan 500,000/= ilaa 2,000,000 oo Shilin Somaliland ah.
3. Qof kasta oo sameeya, qaybiya, qaata, ama sifo kalaba u adeegsada kaadh cod-bixineed oo been abuura ama waraaqo cod-bixneed oo been abuur ah, waxa uu galay danbi waxanu mutaysanayaa

ciqaab dhan saddex sanno ilaa lix sanno oo xadhig ah, iyo ganaax lacageed oo dhan 5,000,000 ilaa 10, 000, 000 (Shan milyan ilaa toban milyan oo Shilin Somaliland ah).

4. Waxa reeban in goobta cod-bixinta laga ololeeyo, cod-bixiyayaasha laga hor istaago ama loo diido in ay codeeyaan, la hadido, la laaluusho ama khalkhal gelin lagu sameeyo nidaamka goobta cod-bixinta. Qof kasta oo falalkaasi ku kacaa waxa uu galay danbi waxanu mutaystay ciqaab dhan lix bilood ilaa saddex sanno iyo/ama ganaax lacageed oo dhan 1 milyan ilaa 3 milyan oo Somaliland Shiling ah.
5. Qof kasta oo xoog u adeegsada ama ugu hanjaba inuu xoog u adeegsanayo, hawlwadeenada goobta cod-bixinta, si ugu qasbo in ay wax-is-daba marin sameeyaan, ama joojiyaan hawsha goobta cod-bixinta, waxa uu galay danbi, waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan lix bilood ilaa 5 sanno oo xadhig ah, iyo/ama ganaax dhan 1,000,000/= ilaa 5,000,000/= oo Shilin

## Qodobka 147aad

## Dambiyada La xidhiidha Diiwaan-gelinta Cod-bixiyaha

1. Qof kasta oo is diiwaangeliya in ka badan hal mar ama been ka sheega xogtiisa waxa uu mutaysayanaa ciqaab dhan 3 bilood oo xadhig ah iyo ganaax lacageed oo dhan 1Milyan oo Somaliland Shilin ah
2. Qof kasta oo isdiiwaangeliya hal mar wax ka badan, waxa uu waayayaa Xaqa Cod-bixinta ee doorasho illaa inta diiwaangelinta dambe laga gaadhaayo
3. Qof kasta oo aan muwaadin Somalilander ahayn oo isku daya inuu is diiwaan geliyo ama qaata kaadhka cod-bixinta wuxuu galay fal-dambiyeed waxaanu mutaysanayaa ciqaab dhan 6 bilood ilaa 2 sannadoood iyo dalka oo laga mustaafuriyo marka uu dhamaysto Xadhig, kaadhkii uu qaatayna la tirtiro, magaciisana laga saaro liisaska diwaan-gelinta.
4. Mas'uul kasta oo ka shaqeynaya diiwaangalinta kuna xadgudba xeerka wuxuu mutaysanayaa ciqaab dhan 3 illaa 5 sanno oo xadhig ah.
5. Qof kasta oo been abuur ku sameeya Kaadhadhka Cod-bixinta ama Diiwaanka Cod-bixiyeyaasha waxaa mutaysanayaa ciqaab dhan 3 illaa 5 sanno oo xadhig ah.

## Qodobka 148aad

## Dambiyada la Xidhiidha Anshax xumada waqtiga ololaha

Qof kastaa oo ku kaco anshax xumo ka soo horjeeda dhaqanka suuban, diinta Islaama isaga oo ku guda jira ololaha xisbiga ama ururka ama si ka baxsan shariicada islaamka uuga qayb qaato ololaha xisbiga ama ururka ama ku kaco fisqi ama waxyaalaha dhaqan xumada ah ee lamida waxa uu galay faldambiyeed waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan hal sanno ilaa laba sanno oo xadhig ah, ama/iyo ganaax lacageed oo dhan 1, 000, 0000/= ilaa 3,000,000/= oo Shilin.

## Qodobka 149aad

## Anshaxmarinta ku Xad-gudubka Xeerka iyo Habka Doorashada

1. Komishanku waxa uu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer anshax oo aan ka hor imanayn xeerkan
2. Haddii qof lagu helo in uu ku gafay xeerarka iyo habka doorashooyinka Komishanku wuxuu ku anshaxmarin karaa sida ku cad xeerkan iyo xeerka anshaxa

3. Haddii Komishanku lagama maarmaan u arko, wuxuu Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ka codsan karaa baadhitaan dheeraad ah iyo dambi oogis isagoo Komishanku ku salaynaya baadhitaan hordhac ah oo uu sameeyay oo ku lifaaqan codsiga.

## Qodobka 150aad

## Ku Xadgudubka Xeerarka iyo Habka Doorashooyinka

1. Komishanku waxay mas'uul ka kayahay hubinta habsami u socodka doorashada. Waxay awood u leedahay dhagaysiga iyo go'aan ka gaadhista dacwadaha la xidhiidha ku xadgudubka xeerarka doorashooyinka.
2. Marka Komishanka u cadaato in lagu xadgudbay Xeerka Anshaxa ee doorashooyinka waxay soo saari karaan talaaboyinkan anshax marineed oo waafaqsan xeerka
3. Haddii xadgudubku yahay mid aan ku xusnayn xeerkan ama mid culus oo uu ka dhalan karo fal ciqaabeed ama khatar ku ah nidaamka doorashada ama nidaamka kala dambaynta iyo nabadgalyada, Komishanku iyagoo Xeerka raacaya waxay amri karaan in la qaado talaabooyinka ku haboon sida xadhig iyo maxkamadayn si waafaqsan xeerka ciqaabta guud.
4. Marka la samaynayo amarka ku xusan faqrada (3) Komishanku waa in ay warbixintooda hordhaca u gudbaan Xeer Ilaalinta iyagoo taladooda raacinaya.

# CUTUBKA SAGAALAAD

# DACWADAHA DOORASHOOYINKA

## Qodobka 151aad

## Dacwadaha Doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa

1. Dacwadaha ku saabsan doorashooyinka Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha waxa awood u leh Maxkamadda Sare, waana in dacwadaasi soo gaadho kaalinta maxkamadda 7 maalmood gudahood oo ka bilaabmaya marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada. Haddii ay wakhtigaa dhaafto dacwadaasi wax tixgelin ah ma yeelanayso.
2. Maxkamadda Sare waa in ay dacwadaha doorashada madaxtooyada kaga go'aan gaadhaan muddo 10 casho gudahood ah.
5. Maxakamadda Sare markay hesho qoraaladda raad-raaca ee xafiiska dhexe ee Komishanka Doorashooyinka Qaranka isla markaana hubiso xisaab ahaan iyo sharci ahaan doorashada waxay ansixinaysaanatiijada doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa.
   6. Maxkamada Sare waxay awood u leedahay in ay soo saarto amaradan:–
      a. In ay wax ka badasho codadka markay hesho cadaymo ku filan;
      b. Waxba kama jiraan ka dhigto natiijada doorashada amartana in doorashada dib looga qabto si waafaqsan shuruucda Dalka.

## Qodobka 152aad

## Dacwadaha Dorashada Golaha Wakiilada

1. Maxkamada Sare ayaa awood u leh ka garnaqa iyo go'aan ka gaadhista cabashooyinka la xidhiidha natiijada doorashada Golaha Wakiilada.

2. Qofka kasta oo cabasho ka qabo natiijada doorashada Golaha Wakiiladu wuxuu cabashadiisa u gudbinayaa Maxkamada Sare 14 casho gudahood oo ka bilaamanta maalinta lagu dhawaaqay natiijada rasmiga ah ee doorashada Golaha Wakiilada.
3. Si ay go'aan uga gaadho cabashooyinka soo baxa, Maxkamada Sare waxay awood u leedahay in ay:-
    a. Amarto in la hubiyo waraaqo cod-bixineed ama dib loo tiriyo codadka gobol, degmo ama goob cod-bixineed;
    b. U yeedho markhaatiyo ama dalbato in dokumentiyo Maxkamada la hor keeno;
    c. Dadwaynaha u sahasho ka soo qaybgalka dhagaygsiga dacwada.
4. Maxkamada Sare waxay awood u leedahay in ay soo saarto amaradan:–
    a. In ay wax ka badasho saamiga kuraasta loo kala helay;
    b. Waxba kama jiraan ka dhigto natiijada doorashada amartana in doorashada dib looga qabto gobol ama degmo gaar ah;
5. Go'aanka Maxkamada Sare waa kama dambays, racfaanna lagama qaadan karo.
6. Wakhtiga dhagaysiga dacwada Guddoomiyaha Maxkamada Sare wuxuu shaacinayaa arrimaha uu qodobkani jideeyayay
7. Maxkamadda Sare waa in ay dacwadaha doorashada Golaha wakiillada kaga go'aan gaadhaan muddo 30 casho gudahood ah, oo ka bilaabanta maalintii ay maxkamadda ku dhawaaqday natiijada rasmiga ah.

## Qodobka 153aad

## Dacwadaha Doorashada Golayaasha Degaanka

1. Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolku waa inuu hubaal-celiyo oo ansixiyo go'aanka doorashada Golayaasha degaanada. Waa inuu go'aan ka gaadho wixii muran ama cabasho ah ee guud ahaan uu u soo gudbiyey xafiiska doorashada ee degmadu ee soo baxay intii hawshu socotey.
2. Dacwadaha ku saabsan Doorashada Deegaanka waxaa awood u leh Maxkamadda Gobolka, waana in dacwadaasi ay soo gaadho kaalinta maxkamadda gobolka 7 (toddoba) maalmood gudahood oo ka bilaabmanta maalinta ay Xafiiska heer degmo ee Komishanka Doorashooyinka Qaranku ay soo saaraan go'aannada doorashooyinka deegaanada. Cabasho kasta oo ka danbaysa muddada qaanuuniga ahi waa waxba kama jiraan (null and void).
3. Maxkamadda gobolku waa in ay go'aan qaadataa muddo 30 (sodon) maalmood ah gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta ay cabashadu soo gaadhay kaalinta Maxkamadda Gobolka ee ay khuseyso.
4. Dhinac kasta oo aan ku qanacsanayn go'aanka Maxkamadda Gobolku waa in ay rafcaan qaadashadooda diiwaangeliyaan isla marka xukunka lagu dhawaaqo. Waa in ay rafcaan qaadashadooda qoraal ahaan ku soo gudbiyaan muddo saddex (3) malmood gudahood ah oo ka bilaabmaysa isla maalinta ay maxkamaddu ku dhawaaqday go'aanka.

5. Maxkamadda Gobolku waa in ay muddo 2 (laba) maalmood ah ugu soo gudbiso Maxkamadda Sare. Haddii ay isla maalintaa rafcaan qaadan waayaan, xaq uma laha in ay dacwadoodu u gudubto Maxkamadda Sare.

6. Go'aanka Maxkamadda Gobolka waxaaa looga racfaan qaadanayaa Maxkamadda Sare Maxkamadda Sare waa in ay muddo sodon maalmood gudahood ah (30 maalmood) kusoo saartaa xukunka iyo natiijada Kama danbaysta ah.

## CUTUBKA TOBNAAD
## QODOBO QUBANE AH

### Qodobka 154aad
### Xeer-nidaamiye

1. Komishanka Doorashooyinku waxa uu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer-nidaamiye, xeerar anshax, habraacyo, hagaha tababarka (training manuals), wacyigalino hannanka doorashooyinka oo lagu hirgalinayo, laguna faafaahinayo Xeerkan iyo doorashooyinka, kuwaas oon ka hor imaanayn Xeerkan.
2. Dhamaan xeer-nidaamiyayaasha, habraacyada, awaamiirta iyo natiijada ay soo saran Komishanku waa in lagu soo saara faafinta rasmiga ah ee Qaranka.

### Qodobka 155aad
### Laallid

1. Waxa xeerkan lagu laallay xeer kasta oo hore u jiray oo la xidhiidha doorashooyinka qaranka iyo diiwaangelinta cod-bixiyayaasha, xeerarkaas oo kala ahaa Xeer Lr. 20/2001, Xeer Lr. 20-2/2005, iyo Xeer Lr. 37/2007 marka laga reebo Diiwaanka madaniga oo ku jira Xeer Lr. 37/2007.
2. Waxaa dhaqangal ah oo sidoodii u jiraaya dhamaan qodobadii xeerka diiwaangelinta ee la xidhiidhay diiwaangelinta madaniga ah inta laga samaynaayo xeer u gaar ah diiwaan gelinta madaniga ah.

### Qodobka 156aad
### Dhaqan-galka

Xeerkan waxauu dhaqangelayaa marka ay ansixiyaan Goleyaasha Xeer-dejintu (Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida), Madaxweynuhuna uu saxeexo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee JSL.

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle** | **Md. Baashi Maxamed Faarax** |
| **Xoghayaha Guud ee G/Wakiillada JSL** | **Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL** |